
«U CELINTA DADKEENI FAHANKOODI SAXDA AHAA»

# KAFAALO MAGAZINE

2015 // www.kafaalo.org




## SOYL
## AQOON YAR & ARAGTI FOG

Saddex iyo toban dhallinayaro ah, da'dooduna udhexeyso 16-33 sano haddana tiro iyo awood ahaan yar, ayaa 17 sano gudahood xorriyad iyo dawladnimo ku gaaray. Haddaba waa inaan is weydiinno duruusta laga dhaxli karo habkay uqorsheeyeen.......

Bogga 18aad

## Maxay ku kala duwan yihiin dumarka iyo raggu?

Xoolo badan wexey ka jeceshahay hadal macaan, wax sheeg badan wexey ka jeceshahay taabasho naxariis leh..

Bogga 30aad

### Waa kuma Sh. Maxamed Idriis?

Waxaan horfariistay, waxna ka akhristay Sh. Cabdilcasiis Bin Baaz, Sh. Ibnu Cutheymiin, Sh. Xasan Ayuub, Sh. Maxamed Qutub, Sh. Sayyid Saabiq, Sh. Maxamed Saabuuni, Sh. Cali Hindi......

Bogga 28aad

### Agabyada lumay ee ababinta ubadka

Ummad kastaa waxay maal iyo mood weyn gelisaa siday u ababin lahayd.....

Bogga 4aad

### Ma dhaqaale ayay abuuraan NGO-yadu?

Wadanka Bangladesh waxaa ka diiwan gashanaa 2333 NGO-yo, waana wadanka ugu faqrisan dunida...!

Bogga 44aad

### Aabe balantiis

Balaayadu waa wax wada yar-yar oo islaale'eg, bal sug hooyadii baan waydiinayaaye.

Bogga 16aad

CONTENT

# KAFAALO MAGAZINE


03 **Editors Letter**
Mukhtar Qoransay

04 **Ma ogtahay?**
Team-ka KM

08 **Goos-Goos**
KM

12 **Caqabadaha Qurbaha & Qurbojoogta**
Aadam Sh. Cali Maxamud

14 **Guurguurista Qurbajoogta iyo Saamaynteeda Bulshada**
Cawil Cabdiraxman Axmed

18 **Yaa Mudan Inuu Maamulo Dadka?**
Mukhtar Qoransay

23 **Yagleel Yoolkaaga**
Cabdulqani Xaaji Cali (Albanna)

26 **Waa Kuma Sheekh Maxamed Cabdi Umal?**
Cumar Maxamed Cabdiraxmaan

28 **Taariikhda Imaam Al-Qazaali**
Dr. Saadiq Eenow

32 **Nidaamka Bangiyada**
Yuusuf Xasan Maxamuud

34 **Hantida-Kheyraad ee Kujirta Insaanka (Human Capital)**
Mukhtar Qoransay


26

12

23

32

## QORAYAASHA



**ADAM SH. CALI**
Electrical Engineer Bsc
Practical Pedagogy Diploma
Didactics in Mathematics and Physics
Msc in International and Multicultural Education



**DR. SAADIQ EENOW**
Dhakhtar
Wasiirka Caafimaadka ee Puntland



**CAWIL ABDIRAXMAAN AXMED**
Bachelor – Teacher Education for Bilingual Teachers
Master of Multicultural and International Education



**AXMED CIISE AXMED**
BS in Molecular Biology
BA in Teacher Education for Bilingual Teachers



**XALIIMO SH. CALI**
BSc Biomedical Science



**DR. HIBAAQ CABDIRAXMAAN BUUBAAL**
Bacheloar of oral medicine and dental surgery
Dhakhtar Gynecology ,dental



**CAALIYA AADAM SH. CALI**
Odontology
Student
Oslo University



**CABDIRASHIID XASAN CILMI**
Bachelor of Administration & Economics



**MAXAMED FAARAX AADAN**
Ingineering
Student - HIO



**AXMED CAWIL AXMED**
Reliability Engineering (RAMS)
Student - NTNU University



**CABDICASIIS CARTAN**
Civilization & History



**MUKHTAR QORANSAY**
IT-Engineer & Economist
BSC/MBA
Diploma in Politics - Oxford University



**DR WARFA ABDI (GARWEYNE)**
Former lecturer in Hydrogeology
Somali National University
Doctor in Sedimentary Geology
University of Napoli, Italy



# XXXXXXXXXXXX

WaxbaWaxbadan ayay Soomaalidu maqashaa SYL ama taariikho dad la mid ah oo qaab sheeko ahaan loo dhigay, qofkuna niyadda ka jeclaysto. Balse arinkoodu intaas waa ka gude balaarnaa, waxaana sanadkaan Kafaalo Magazine dib ugu eegaynaa qaab xeeldheer oo ku dhisan feker ay maskaxdo waxbadan iska waydiin karto, jawaabaha uga soo baxana falcelis uga sameyn karto.

Waxaan dhiraandhirinaynaa shan fikradood oo uu fahamkoodu ku qottamay, aamineen, kadibna qayb ka noqday habdhaqankooda, ficilada iyo go'aamada ay qaadaneyeen iyo kadib natiijada ka dhalatay. Arimahaan oo markii la barbardhigo insaanku siduu u samaysan yahay, noo caddeynaysa in bini'aadamku marka uu doonayo inuu isbedel sameeyo, meesha ugu horeyn uu ka dhaqaaqo inay tahay fekerka, kadibna rumeynta fekerkiisaas. Rumeyntaas ayaa la falgasha falalkiisa, kadibna sidaa ayay ku sii socon qodobada kale ee laxiriira.

Xeeldheeri iskugu fiirinta qaabka insaanku u samaysan yahay iyo qaab fekerkooda oo aan ku dul fekerno, ayaa cashar noo noqon karta, naguna dhalin karta inaan u eegin taariikh ahaan keliya, laakin feker ahaan u eegno.



**Mukhtar Qoransay**
*Editor-in-chief of Kafaalo Magazine*



# KALMADA CADADKA

Aas-aasyada koonku ku dhisan yahay waxaa kamid ah xaqiiqada "Cilmiga", iyo insaanku inuusan ku noolaan mugdi. Waana tan sababteeda loo soo diray rasuullo, si ay dadka ugaarsiiyaan farriin, uguna yeeraan xaqiiqa ah inuu Ilaah kali ah jiro, Isagana ay ka danbeeyaan. Waxaa taa garab socota mar walba, dhinaca kale oo looga gacan haadinayo insaankaas isaga ah, laguna doonayo in xaqiiqada looga riixo. Labadaa farriimood ayuu banii'aadamku udhexeeyaa weligii, iyo hadba tuu dhankeeda ujanjeersan lahaa. Hadba qaddarka uu xaqiiqada ka hantiyo, mid adduun iyo mid aakhiraba, ayey noloshiisa toosin, go'aamadiisuna saxmin, mustaqbalkiisuna baraarin. Intuu hadba xaqiiqada ka durkana, ayey noloshiisu heehaab iyo hadaf la'aan noqon.

Waxaannu ka wada dhereg-sannahay, dadaalka maanta dunidu ugu jirto, qof iyo qaranba, inay ku biiraan naadiga hantiilayaasha xaqiiqada "Cilmiga". Ahmiyaddaas ay leedahay awgeed, ayey dawladaha iyo hay'aduhuba ubixiyaan dadaal joogto ah, iskuna dayaan garab istaagga shucuubtooda, iyo usahlidda hanashada xaqiiqada iyo siday uhorumarin lahaayeen noloshooda. Waayo khilaafka ragaadiyey ummaddeenna, iyo is-fahmid la'aanta xidideystay ee na dhextaalla waxay salka ku haysaa ka fogaanta xaqiiqada waxyaabaha aan isku hayno.

Sidaas darteed, noqo insaankii xaqiiqada, raadinaya mar iyo meel walba, ogowna sharaf inay kuu tahay, inaad ku biirto naadiga kor ku xusan, adigoo markaa ka weynaan doona inaad cid kale qool ugu jirto. Dariiqa xaqiiqadu mar waa barasho iyo xeraysi, marna waa aqrin iyo daalacasho, labadaa midkoodna ayaad ugu yaraan kala dooran kartaa.



**Cabdicasiis Cartan**
*Executive Editor*

PUBLISHER **KAFAALO**
PRINT **LUNDBLAD**
NEXT KAFAALO MAGAZINE **END OF 2015**

**LASOO XIRIIR**
KAFAALO MAGAZINE
DALAB IYO FIKRADO KUSOO HAGAAJIYO
EMAIL: *km@kafaalo.com*

**NORWAY**
0047 91 32 11 08
0047 45 45 92 40
0047 94 43 86 33
0047 96958534

**SWEDEN**
0046 737 310 541
0046 707 794 977
0046 700 777 303

**Afarta qaybood ee ilmaha laga koriyo waxaa u horeeya quudka la siiyo.**

# AGABYADA LUMAY EE ABABINTA UBADKA

Caanaha hooyada oo ah waxa ugu horeeya ee ilmuhu cabbaan markii ay dunida yimaadaan, ayaanan jirin wax loo dhigi karo ilaa hadda. Cuntada nafaqada leh ee kuxusan Qur'aanka iyo qaabka ay dowladuhu uga faa'iideen, ayaa jawaab u ah horumarka uu bini'aadamka qaarkii kasameeyay nolosha.

AV **AXMED CIISE AXMED** PHOTO **THINKSTOCK**

Ummad kastaa waxay maal iyo mood weyn gelisaa siday u ababin lahayd ubadkeeda. Ababinta ubadka waxay ummad kastaa ka leedayahay ujeeddo. Tusaale ahaan, ujeeddadii ubad korinta ee Giriiggii reer Isbaarta wuxuu ahaa in laga soo saaro dagaalyahanno ragga da'doodu u dhaxayso 15-60. Loona tababari jirey si aanay u dib guran oo baqa cararin marka dagaal lagu jebiyo ee laakiin ruugga aastaan ilaa ay ka dhimanayan. Gabadhaha reer Isbaarta waxay u carbin jireen sidii ay u dhali lahaayeen ubad fayow oo berri u diyaar ah dagaalyahannimo iyo sidii loo diyaarin lahaa hooyooyinkii mustaqbalka.

Ujeeddada carruur carbinta ee Carabtii hore waxay ahayd in ay soo baxaan carruur aftahan ah oo leh dhaqan suubban. Ilmaha Carabka ah marka uu yaryahayba waxaa loo diri jirey miyiga si jidhku ugu soo dhismo; si uu ugu soo dhex barbaaro af hodon ah; si uu u soo barto dad-la-dhaqanka iyo caadooyinka nadiifta ah ee Carabta.

Haddaaan fiirino barnaamijka waxbarasho ee Noorweey, waxa la arkayaa in ujeeddada loo dejiyay ay tahay sidii loo soo saari lahaa: qof macne raadiye ah (det meningssøkende menneske), qof hal-abuur leh (det skapende menneske), qof shaqeeye ah (det arbeidende menneske), qof waxbarasho guud leh (det allmenndannede menneske), qof iskaashi yaqaan ah (det samarbeidende menneske), qof bii'ada ku baraarugsan (det miljøbevisste menneske), qof dhammaystiran (det integrerte menneske). Ujeeddada ubad barbaarinta Soomaalidu waxaay ku muujiyaan ducada ay isuga hambalyeeyaan marka ilme uu midkood u dhasho, ' Ilaah ha ka dhigo mid diintiisa iyo dadkiisaba anfaca'. Sida ka muuqata qorshayaasha ubad korinta ee bulshooynika, ummad kastaa waxay isku daydaa sidii maalka ay geliysay ubad korinteeda uu miro fiican u dhali lahaa.

Haddiise ummadi ujeeddada ubad barbaarinta ku guuldarraysato oo ka miro dhalin weydo, waxa dhacaysa in guuldarradaasi keento dhibaato aan laga soo kaban karin oo keeni karta in ummaddaasi dabargo'do. Dabargo'a ummadaha qaar waxa keena inay ka ilduufeen ujeeddada ubad barbaarinta oo ahayd mid aan fiiro dheerayn ama aan anfacayn bulshada. Qaar kale waxay leeyihiin ujeeddo sax ah, balse waxay ka hawl yareestaan sidii ujeeddada loo gaari lahaa oo waxay u qaataan in ubadku iska kori doonaan iyadoon hawl la gelin. Qaar kale waxayba ilaawaan ujeeddadii ay ubad korinta ka lahaayeen. Qaarna qaabka ay u gaari lahaayeen ujeeddada



> «Haddii ummadi ujeeddada ubad barbaarinta ku guuldarraysato oo ka miro dhalin weydo, waxa dhacaysa in guuldarradaasi keento dhibaato aan laga soo kaban karin oo keeni karta in ummaddaasi dabargo'do»
>
> AXMED CIISE AXMED

«Agabyadani waa cunto tayo leh, hurdo fiican, firfircooni iyo hadal. Afartaan ayaa ilmaha u dhisa jidh iyo maskax fayow.»
AXMED CIISE AXMED

ayaanay haabkeeda hayn oo waxay noqdaan sidii gorayada. Gorayadu ilmaheed aroori bay dhigtaa oo aboodigu ku laayaa. Sabab kastaa ha keento ubadka oo la dayaco, natiijaduse waa jiilasha soo socda oo hanan waaya mas'uuliyaddii hor u sii wadidda ummadda.

In la helo ujeeddo sax ah keliya kuma filna in lagu saleeyo korinta ubadka, ee waxa iyana lagama maarmaan ah in la eego bii'ada ubadka lagu korinayo. Waa tii odhaahdu odhanaysay in ay ku qaadato, 'tuulada oo dhan in ilme la koriyo'. Odhaahdani waxay ku salaysan tahay in waalidka iyo bii'adu ujeeddada ubad kobcinta iyo qalabka la adeegsanayo ay ka midaysan yihiin. Waxa laga yaabaa in aanay waalidka iyo bii'adu isku ujeeddo ahaynba. Waxa kale oo laga yaaba qalabka ayna isku waafaqsanayn. Haddii bii'adu ka xoog badnaato waalidka, waalidku wuxuu ku guuldarraysanayaa korintii ubadkiisa. Ubadka oo dayacmaana wuxuu si gaar ah u saameeyaa waalidka. Qofna ma jecla in uu lumiyo tacabkiisa ugu weyn. Si looga soo kabto dhibaatooyinka, waxa loo baahan yahay in waalid kastaa ogaado waxa mas'uuliyaddiisu tahay iyo ujeeddada ama himilada uu ka leeyahay korinta ubadkiisa. Haddii waalidku



Aabe iyo caruurtiisa wada quraacanaya.

»



Cuntada caruunta lasiiyo, dawr weyn kaciyaartaa koriinkooda maskaxeed.

«In la helo ujeeddo sax ah keliya kuma filna in lagu saleeyo korinta ubadka, ee waxa iyana lagama maarmaan ah in la eego bii'ada ubadka lagu korinayo»

AXMED CIISE AXMED

moogyahay ujeeddada korinta ubadkiisa. Haddii waalidku aqoon u lahayn qalabka uu u adeegsanayo korinta ubadkiisa,. Haddii aanu ogayn ujeeddooyinka iyo qalabka ay ku kala duwan yihiin iyo kuwa ay iskaga midka yihiin bii'ada la korinaysa ubadkiisa, waxa hubaal ah in waalidku shiddo la kulmo oo tacabkiisu khasaarayo.

Si looga hor tago ku khaasaaridda barbaarinta ubadka, waxaan maqaalkan si kooban ku eegayaa ujeeddada korinta ubadka Soomaalida. Waxa kale oo aan ku soo bandhigayaa dhinac kamida dhinacyada kala duwan ee loo baahan yahay in ubadka laga dhiso si loo gaaro himilada ubad barbaarinta. Ujeeddada ubad korinta Soomaalida waa caddahay: ubad diintooda iyo dadkooda anfaca. Haddaba si waalidku u gaaro yoolkani, waa in waalidku ogaado in bii'ada uu ku nool yahay ay isku ujeeddo yihiin ama kala ujeeddo yihiin; ama inay qayb ujeeddada iskaga mid yihiin, qaybna ku kala duwan yihiin. In ay waalidka iyo bii'adu qalabka iskaga mid yihiin, ama inay qayb qalabka iskaga mid yihiin iyo in kale. Marka bii'adda lagu nool yahay iyo waalidku isku ujeeddo yihiin, waa ta



Khudaar loo shiido karo ilmaha.

ugu habboon sababtuna waa istaageeridda darandooriga ah . Haddiise bii'adu ka soo horjeeddo dhammaan ama qayb ujeeddada barbaarinta, waalidku waa inuu fiirayaa dhinaca xoog badan- waalidka mise bii'ada. Si kastaba ha ahaatee, si loo helo ubad dadkooda iyo dintoodaba anfaca, waxaa la gudboon waalidka inuu yaqaanno sida ubadka looga dhiso afar dhinac iyo qalabka loo baahan yahay. Markaa waa in waalidku isu diyaariyaa siduu uga dhisi lahaa ubadka: dhinaca jidhka iyo maskaxda, dhinaca aqoonta, dhinaca dad la dhaqanka, iyo dhinaca ruuxda. Kan kuxiga kasii akhrin kartaa ubadka iyo baahidooda dareeen.

Ilmaha si looga dhiso jidhka iyo maskaxda waa in la adeegsado afar agab. Afartan agab waxa laga yaabaa in aanay bilawga waalidka si toos ah ugu muuqan. Haddiise waalidku uu u fiirsado, wuxuu arkayaa ilmuhu waxyaalaha uu sameeyo markuu yar yahay inay gundhig u tahay dhismaha jidhka iyo maskaxda. Ilmuhu wax buu cunaa; ilmuhu waa seexdaa; ilmuhu wuxuu fidfidiyaa gacmaha iyo lugaha; ilmuhu waa ooyaa oo wejigiisana waxa ka muuqdaan xanaaq ama farxad. Waxan uu ilmuhu samaynayo oo dhammi waxay tusayaan agabyada waalidku uu u baahan yahay si uu ilmihiisa uga dhigi lahaa mid qof jidh iyo maskax fayow leh. Agabyadani waa cunto tayo leh, hurdo fiican, Firfircooni, Hadal – afartan ayaa ilmaha u dhisa jidh iyo maskax fayow.

Agabka koowaad waa cuntada. Cuntada la cunayaa qayb weyn bay ka tahay nolosha illeen waa tii la yidhi, 'ninba intuu cuno ayuu ciidamiyaa.' Shaki kuma jiro in ilmuhu u baahan yahay cunto tayo leh oo nafaqaysa jidhkiisa iyo maskaxdiisa. Laakiin waxaa muhiim ah in la ogyahay in dhisidda asaasaaska maskax iyo jidh fayow ay ilmaha uu billaabmaan intaanu calool gelin iyo inta uu uurka ku jiro. Sidaas awgeed waxaa waajib ku ah labada waalid in ay isu diyaariyaa cunugga imanaya. Gaar ahaan hooyada oo noqon doonta hoygii ilmaha muddada sagaalka bilood ku dhow ee noloshiisa ugu horreeya waa inay si suubban isugu diyaarisaa. Nasiib wanaag, Ilaah ba ubadka u diyaariya aqalka iyo agabka ugu horreeya ee lagu martigelinayo. Waxaa keliya oo la gudboon waalidka in aanay kharibin agabkaas, oo aanay ku darin sun iyo waxyaalo kale oo waxyeelo keeni kara. Waxyaalaha waxyeelo u keeni kara ilmaha waxay uga soo gudbi karaan dhinaca cuntada hooyadu quudanayso.

Ka dib ilmuhu waxa uu billaabaa safarkiisii ifka. Bilawga safarka ilmuhu waa





Cuntooyinka laga helo nafaqada u fiican jirka iyo maskaxda.

marka maskaxdiisu ugu korid badan tahay. Waxay qaadataa koritaanka maskaxdu dheefta ugu badan ee jidhkiisa gasha. Markaa waqtigan ilmuhu wuxuu u baahan yahay dheef tayo leh oo isu dheelitiran. Nasiib wanaag, Ilaahay baa ilamaha soo raaciyay dheef dheeli tiran – caanaha hooyada. Tan baa ka kaafida nafaqadii uu u baahan yahay oo dhan. Caanaha hooyadu waa cunto dhanka kasta isaga dheelitiran. Caanaha hooyadu kama kabaan keliya dhismaha jidhka iyo maskaxda ilmaha sannaddada ugu horreeya ee noloshiisa, balse caanaha hooyadu waxay ka diyaariyaan dhanka difaaca jidhka iyo garaadka. Caanaha hooyadu waa dheef ku habboon koritaanka ilmaha oo ay Hay'adda caafimaadka adduunka ku boorriso waalidiinta inay ilmaha siiyaan ugu yaraan lix bilood.

Marka laga joojiyo ilmaha caanaha hooyada, waxa waalidkii la gudboon sidii uu ugu beddeli lahaa cunto sidaas oo kale isugu dheelitiran. Dabcan, dheellitirnaata cuntadaasi waxay ku xiran tahay da'da iyo firfircoonida ilmaha. Cuntooyin badan baa jira oo Qur'aanku sheegayo waxaana gundhig u ah in ay xalaal yihiin oo wanaagsan yihiin (2:168). Cuntooyinkaa

«Haddii bii'adu ka xoog badnaato waalidka, waalidku wuxuu ku guuldarraysanayaa korintii ubadkiisa»

AXMED CIISE AXMED



Ilmo yar oo cunaya yoghurt.

badan ee Quraanku sheegay waxaa ka mid ah: midho bal leh (78:15-16, 80:27-31, 55:12, 50:9); khudaar kala midab duwan (35:27). Waxaa midhaha iyo khudaarta ayaadaha kore xuseen ku ladhan furutooyin sida canab, seytuun, timir. Qaar kale oo badanna waa la xusay sida tiinka (95:1), rummaanka (55:68), mooska (56:29). Waxa kale Allah sheegay: kalluun badda (16:14, 35:12); hilib shimbireed (2:57). Ilaahay xoolaha hilib keliya kama siin aadane ee wuxuu ugu daray caano (16:66). Waxaanse la ilaawin karin biyaha waxa wax kasta oo nooli ka samaysan yahay, biyo (77:27).

Talooyin badan waxa waalidka u fududaynaya in dawlad kasta kala taliso bulshadeeda waxay quudan lahaayeen. Quudka ay Hay'adaha caafimaadka ee dowladuhu waxay u qaabeeyaan siyaabo kala duwan: Dawladda Shiinuhu waxay u samaysaa qaabka guryaha Shiinaha (Pagoda); Dawladda Jarmalku waxay samaysa Goobada Dheefta (DGE nutrition circle), Dawladda Kanada waxay u samaysan jeegaan (Canadian Food Rainbow); Maraykanku wuxuu leeyahay Ahraamka Dheefta (Food Pyramid). Inkastoo qaabkoodu kala duwan yahay, dhammaan hay'adahani waxay isku waafaqsan yihiin oo ku talinayaan in karbohaydareyto u badnaadaan waxa la quudanayo, siiba midhaha balka leh, oo la iska yareeyo kuwa la dhilay. Waxa ku xiga khudaarta iyo furuutooyinka (midabyo kala duwan leh). Barotiinnada inay ku jiraan cuntadaada oo ugu badan yahay hilibka cad ee kalluunka iyo digaagga. Waxayna ugu dambaysiiyaan dufanka oo ay tahay badankiisa inaad ka heshid kalluunka iyo dhirta, laakiin la iska ilaaliyo kuwa wershadaha lagu sameeyey. Waxay kale oo ku taliyaan in haraadka lagu jebsho biyo saafi ah oo la iska dhawro cabitaanada sonkortu ku badan tahay. Taladaase ma la raacaa?

Iyadoo la ogyahay cuntada Eebbe inoo abuuray ee hayhadihii caafimaadku dawladduhuha tilmaameen in la cunno, haddana ubadka waxa lagu quudiyaa cuntooyin dheeftii lagagala dagaalamay. Cuntooyinkan nafaqda laga siibay aad bay ubadaku u xiiseeyaan maadaama ay sonkorta, milixda iyo dufanku ku badan yihiin oo dhadhanka bani Aadmigu hammuun weyn u qabo. Shirkaduhu waxay u soo diyaariyaan iidhehda siyaabaha ay ubadka u hanan lahaayeen. Waxay u xilsaaraan khubaro ku takhasustay Cilmi Nafsiga oo yaqaan barta laga abbaaro ee uu u nugul yahay bani Aadamku. Cuntada nafaqada leh ee dukaamada taalla waxa ka badan inta aan nafaqada lahayn waxaanna la dhigaa goobo u gaar ah sida maqalka agtiisa. Markuu ilmuhu la qabsado cunto ku sheegtan, wuxuu ilmuhu ka go'ayaa oo aan u dhadhamayn cunto dheef leh. Qarracanka cunto cunid la'aanta ilmahu, waxay waalidka ku kelifaysaa inuu u oggolaado ilmaha cunto qashin ah. Haddiise waalidku



dhabar adaygo oo ku guuleysto inuu ilmaha cunto dheef leh siiyo, waxaa jira qaraabadii-ayeeyooyinkii, awoowayaashii, eeddooyinkii, abtiyaashii, habaryarihii iyo adeerradii- oo siinayaa ilmihii cuntooyinka aan fiicnayn. Waxa kale oo ilmuhu ku dayanayaa akhyaartii ka waaweynayd waxyaalaha ay sameeyanayaan; jaalayaashii iyo asxaabtii uu la socday waxayaalaha ay sameenayaan. Sidaas awgeed waalidku waa inuu si feejigan ula socdaa waxa ilmihiisu cunayo iyo saameynta bii'adaba.


Haddii waalidku ogyahay dheefta ubadkiisu u baahan yahay; meesha dheefta laga helayo; xaddiga ubadkiisu dheefta uga baahanyahay, iskuna taxalujiyo siduu uga hortiga lahaa saamaynta taban ee bii'ada, waxaa uu qaaday talaabadii ugu horreysay ee uu ku gaadhsiin lahaa ubadkiisa himilada koritaanka.

«Ummad kastaa waxay maal iyo mood weyn gelisaa siday u ababin lahayd ubadkeeda»

AXMED CIISE AXMED

# NUXURKA

- Giriiggii hore ee reer Isbaarta tarbiyadda ubadkooda kudhisneyd in laga soo saaro dagaalyahanno aanan dib u guran.
- Carabtii hore ku dadaali jireen caruur aftahan ah oo leh dhaqan suuban.
- Maanta wadamada Galbeedka, sida Norway waxaa barnaamijka tarbiyada kamid ah in la soo saaro: Qof hal-abuur leh, qof shaqeeye ah, qof waxbarasho guud leh, qof iskaashi yaqaan ah, qof bii'ada ku baraarugsan, qof bulshada la falgali yaqaan.
- Ujeeddada ubad korinta Soomaalida waa ubad diintooda iyo dadkooda anfaca.
- Dabargo'a ummadaha waxaa keena iyadoo jiilba jiilka ka danbeeya uusan tarbiyad wanaagsan u gudbin ama loo fahmo in caruurtu tarbiyad la'aan iska kori doonaan.
- Waalidku waa inuu ogaado in bii'ada uu ku nool yahay, ay isku ujeeddo yihiin ama kala ujeeddo yihiin; ama inay qayb ujeeddada iskaga mid yihiin, qaybna ku kala duwan yihiin. In ay waalidka iyo bii'adu qalabka iskaga mid yihiin ama inay qayb qalabka iskaga mid yihiin.
- Waalidku waa inuu bartaa sida uu ubadkiisa uga dhisi lahaa afar dhinac. Dhinaca jidhka iyo maskaxda, dhinaca aqoonta, dhinaca dad la dhaqanka, iyo dhinaca ruuxda.
- Meesha ugu horeysa ee ilmaha tarbiyadooda laga qaloocin karo, waa nooca cuntada la siiyo.
- Caanaha hooyada waa:
  - *Cunto dhan walba ka dheelitiran.*
  - *50% waa dufanka u wanaagsan koritaanka maskaxda.*
  - *Borotiinnadii dhisayay jirka oo xaddigoodu sax yahay.*
  - *Karbohaydarey-yada kujira lagama heli karo caanaha kale.*
  - *Fiitamiinadii iyo cusbo-macdantii kala duwan ayaa kudhan.*
  - *Waxay jirka ka difaacaan fayruusyada.*
  - *Waxay yareeyaan cudurada kaadi macaanka.*
- Dowlad walba si ayay u qaabaysaa talooyinka quudka hay'adaha caafimaadka:
  - *Shiinaha u qaabeeyay qaabka guryaha Shiinaha (Pagoda).*
  - *Jarmalku u qaabeeyay Goobada Dheefta (DGE nutrition circle).*
  - *Kanada waxay u samaysay jeegaan (Canadian Food Rainbow).*
  - *Maraykanku wuxuu leeyahay Ahraamka Dheefta (Food Pyramid).*
- Fahankaas Quraanka laga qaatay, dhamaan waxay isku waafaqsan yihiin inay cuntadu u badnaato:
  - *Karbohaydareyto, siiba midhaha balka leh.*
  - *Khudaarta iyo furuutooyinka.*
  - *Barotiinnada inuu ugu badan yahay hilibka cad ee kalluunka iyo digaagga.*
  - *Dufanka ayaa loogu danbeysiiyaa oo ah, inaad ka heshid kalluunka iyo dhirta.*
  - *Oonka oo lagu jabiyo biyo saafi ah.*



Ilma xanaaqsan oo loo diiday baahiyihiisa qayb kamid ah.



**Ubadku sida ay baahi jireed u leeyihiin, ayay baahi dareena u leeyihiin**

# UBADKA IYO BAAHIDOODA DAREEN

Baahida dareenka waxay daruuri utahay siduu insaanku ufahmi lahaa, ulana qabsan lahaa bii'ada iyo bulshada uu la nool yahay, uguna noolaan lahaa nolol qiima leh. La'aanteed insaanku ma dabar go'ayo, laakiin wuxuu ku noolaan mugdi, wel-wel, iyo niyad jab.

AV **CABDICASIIS CARTAN** PHOTO **THINKSTOCK**

Quudinta iyo arrad-tirka, waxbaridda iyo barbaarinta, difaaca iyo daaweyntuba, waa baahiyo iyo xuquuqo biya kama dhibcaan ah, midkeenna aanay ka dahsoonayn in ubadku waalidkood ka sugayaan, xaqna ugu leeyihiin, ha ogaado waalidku ama ha moogaadee, ha fuliyo ama ha dayacee. Baahidaa kor ku xusan, haddii kulligeed ama badankeedu yahay mid maaddi ah(Physiology), oo ku jihaysan jirka ubadka, macnaheedu maaha inaanay jirin baahiyo kale, oo aan ahmiyadoodu ka yareyn kuwa sare, sida kuwa ku jihaysan caqliga ubadka iyo nafsadooda.

Inteenna Rabbi ku hadeeyey, duruuftuna saacidday,jirka ubadka waan quudinnaa, daaweynaa, difaacnaa, caqligiisana waxbarnaa oo kobcinnaa, si uu mustaqbalka unoqdo insaan waxtar ah, naftiisa iyo dadkiisaba. Laakiin waxaa muhiim ah inaan milicsanno xisaabtana aan laga saarin, baahidiisa kale sida tan bulsho iyo tiisa nafsi, oo iyadu ah gaadiidka labadaa sare -baahida jirka iyo tan caqligu- ku guuraan, la'aanteedna aanay labadoodu meel ka soo bixi karin.

Haddaba, ummad dhaqankeedu oranayo, "intay togoogta ku jiri lahaayeen tubta ha yaalleen", oo lagaba yaabo inay yareysanayaan ama utaag la' yihiin, baahiyo midaan ka cad-cad ama ka culus, waa muhiim sidii loo fahamsiin lahaa ama loogu qancin lahaa, baahidaan iyo waxyeeladeeda haddii la waayo, ama waxtarkeeda haddii la helo. Annagoo xasuusan, iskana jirayna inay arrintaani qaar shacabkeenna ka mid ah ula ekaato wixii ay ugu yeeri jireen suuraha ama is yeel-yeelka.

Si aan fahamka baahidaan usoo dhaweyno ama loo wada dareemo, una qirno inay tahay xaqiiq jirta, ee aysan ahayn is yee-yeel iyo suuro, waxaan is weydiinaynaa: maxay ufashilmeen, noloshana uga dhaceen ubad badan, oo laga yaabo in laga haqab tiray baahida jirka iyo caqliga? ama ay ugu nool yihiin niyad jab iyo himmad xumo?

> «Usheeg ilmahaaga inaad jeceshahay, af iyo ficilba. Afka, sida waan ku jeclahay, waayo wiilkayga ama gabadhayda ayaad tahay»
>
> CABDICASIIS CARTAN.

### Waa maxay baahida nafsigu?

Rabbigii sarreeyey, wuxuu insaanka ku abuuray baahiyo kala duwan, qaarkood waxay daruuri uyihiin jiritaankiisa oo uu la'aantood dabar go'ayo, sida cuntada, biyaha, taranka, waxaana loo yaqaannaa baahida maaddiga ah (Physiology), waana mid ay ka siman yihiin noolaha oo dhan insaan iyo xayawaanba. Waxaa kaloo jirta baahi loo yaqaanno mida nafsiga ah, waxayna daruuri utahay siduu insaanku ufahmi lahaa, ulana qabsan lahaa bii'ada iyo bulshada uu la nool yahay, uguna noolaan lahaa nolol qiima leh. La'aanteed insaanku ma dabar go'ayo, laakiin wuxuu ku noolaan mugdi, wel-wel, iyo niyad jab. Fahmidda baahidaani, waxay waalidka ku saacidi kartaa inuu fahmo dhaqamada carruurta qaarkood ku dhaqmaan markay baahidaan waayaan, iyo inuu ku guuleysto ku barbaarinta ubadkiisa hab toosan. Halka ubadka oo baahidaan laga haqab tiraana ay ka dhigan tahay inuu ku noolaado isku kalsooni, iyo yididiilo joogto ah.

Sida noo muuqata mawduucu waa mid ballaaran, maqaal koobanna aan looga bogan karin, sidaas darteed dawrkaygu waa inaan wax ka bidhaamiyo, Anigoo insha Allaah halkaan ku soo gudbinaya, dhawr qodob oo ka mid ah baahida nafsiga ah, sida: baahida amniga iyo xasiloonida, baahida tixgelinta iyo qadarinta, baahida jacaylka, baahida ammaanta, anigoo si kooban wax uga oran doonna siday ukala horreeyaan.

### Amniga iyo xasiloonida

Sida dadka waaweynba ubadku waxay baahi uqabaan, xaqna ulleeyihiin inay ku noolaadaan nolol deggan, kana maran


Waalid wada dhunkanaya gabadhooda.



«Haddaan waalidku baahida qadarinta iyo tixgelinta, ula dhaqmin hab munaasib ah, waxaa dhacda in ilmuhu la soo baxo dhaqamo yaab leh waalidkana aad uxanuujisa, sida cinaadka, qaylada»

CABDICASIIS CARTAN.

wax kastoo ku abuuri kara wel-wel iyo walbahaar. Waayo qof wel-wel ku nooli waa bukaan socod daaweyn ubaahan, inuu wax soo saar sameeyo iskaba daaye. Waalidka is furay ama kala maqan cudurdaar iyo cudurdaar la'aanba, ama iskula jooga khilaaf iyo muran joogta ah, ama kuwa hawl gab ah oo wada joogooda aan ilmuhu waxba ka faa'iidin, kulligood waxay sabab uyihiin inuu ilmuhu waayo noloshii deganayd ee uu ku riyoonayey, xaqana ulahaa. Dhibkaas waxaa sii kordhin kara, garaaca iyo gacan qaadka joogtada ah. Si dhibkaasi loo yareeyo ama looga hortagana, waa in la waayaa dhammaan sababaha aan kor ku xusnay, Dabacsanaan iyo qabowna lagu xalliyo gefafka carruurta ka dhaca, iyo sidoo kale khilaafka waalidka.

### Qaddarin iyo tixgelin

Waxaa jira baahi nafsi ah, ilmahana ku bixisa doonitaanka inuu wax qabsado, laga bilaabo markuu laba jir gaaro, isagoo dareemaya inuu awood uleeyahay arrinkaas. Haddaan waalidku baahidaas fahmin, ulana tacaamulin hab munaasib ahna waxaa dhacda in ilmuhu la soo baxo dhaqamo yaab leh waalidkana aad uxanuujisa, sida cinaadka, qaylada iyo inuu jejebiyo alaabta guriga. Isagoo waalidkiis udiraya farriin macnaheedu yahay, haddaad iga hor istaagtay baahidaas aniga xaqayga ah, adiguna waajibka aad igu leedahay fudayd ku heli maysid. Xalku wuxuu ku jiraa, ilmaha oo la dareensiiyo inuu qaali yahay, ra'yigiisu qaali yahay oo la dhegeysto, dooqiisa ama doorashadiisa oo la tixgeliyo, xorriyad in loo siiyo waxyaabaha qaarkood inuu samayn karo, haddii la diidana loo sharraxo lagana qanciyo sababta loo diiday.

### Baahida jacaylka

Aad iyo aad wuxuu ilmihu baahi ugu qabaa inuu dareemo inuu waalidkii jecel yahay, taasoo siinaysa kalsooni iyo raaxo nafsi ah, hadduu waayana ku bixin karta gaabin fara badan. Hadduu Nabigu (csw), Asxaabta qaarkeed ku oran jiey waa ku jeclahay, annagana uu na faray inaan saaxiibkeen usheegno sidaasoo kale, miyaanu amarkaasi sii xoogaysanayn markuu la xiriiro ilmahaaga? Usheeg ilmahaaga inaad jeceshahay, af iyo ficilba. Afka, sida waan ku jeclahay, waayo wiilkayga ama gabadhayda ayaad tahay. Waan ku jeclahay, waayo sidaa iyo sidaa ayaad samaysay (ficil wanaagsan). Marnaba ilmahaaga ha ku oran kuma jecli iyo waan ku necbahay, ama ilmahayga ma tihid, iwm. Ficilka, sida inaad joogto udhunkato xataa


Wiil-yar oo yaaban

kuwa waaweyn, inaad la fara ka ciyaarto, garbaha aad usalaaxdo, hadiyad aad siiso munaasabad iyo munaasabad la'aanba.

### Baahida ammaanta

Yaan ku farxin marka la ammaano, kana xumaan marka la caayo ama la aflagaadeeyo? Yaan jeclayn marka wanaag uu sameeyey lagu faaniyo loogana marqaati kaco, yaanse niyad jab ku imaan marka laga inkiro wanaag uu sameeyey, ama lagu been abuurto xumaan aanu samayn. Sidaas darteed, baahidani waa abuur -fidri- qof kasta ku beeran yar iyo weynba. waxaana lagu dhaqan gelin karaa, adigoo qofka yar iyo weynba uqira wanaaggiisa, si aad ugu bixiso inuu sii laban-laabo, si mar

«Hadaad iga hor istaagtay baahidaas aniga xageyga ah, adiguna waajibka aad igu leedahay, fududeyd kuheli meysid.»

CABDICASIIS CARTAN



Waalid la ciyaaraya ilmihiisa, si uu ufahmo baahiyahooda nafsi.

«Gunaanadkii, waalid kastoow bal adigu booska carruurta is dhig, xagga baahida maaddiga ah naftooda ayaad taada ka hormarisaa, maxaa tan nafsiga naga hortgaan inaan sidaa ula tacaamulno?»

CABDICASIIS CARTAN

labaad iyo mar saddexaadba uu umutaysto ammaantaas. Xataa waxaa daruuri ah in ilmaha lagu ammaano isku daygiisa, walow yuusan ku guulaysane. Ammaantuna waa dhaqankii Nabiga (swc), Khalid waa seeftii Alle, Abuu Cubeyda waa amiinkii umadda, Zubeyr waa horyaal, iwm.

Gunaanadkii, waalid kastoow bal adigu booska carruurta is dhig, xagga baahida maaddiga ah naftooda ayaad taada ka hormarisaa, maxaa tan nafsiga naga hortgaan inaan sidaa ula tacaamulno? Inta aad boorrin, ammaan, xasilooni, deganaan, tixgelin ubbaahan tahay iyo toban jibbaarkeed ayuu ilmahaagu ubbaahan yahay. Inta ay arrimahaas lidkoodu ku saamayn karaana, isagana wey saamaynaysaa. Sida aad ugu baahan tahay in la ilaaliyo karaamadaada iyo shucuurkaaga ayuu ubbaahan yahay. Haddaba ha kala bakhaylin ilamahaaga dhaqan iyo hadal macaan oo aan wax qarash ahi kaaga baxayn, miro badanna aad ku goosanayso.

# NUXURKA

- Baahida dareenka waxay daruuri u tahay siduu insaanku u fahmi lahaa, ulana qabsan lahaa bii'ada iyo bulshada uu la nool yahay, uguna noolaan lahaa nolol qiima leh.
- Baahidaas dareen waxaa lagu soo koobi karaa ilmuhu inay helaan:
  - *Amni iyo xasilooni*
  - *Qadarin iyo tixgelin*
  - *Jaceyl*
  - *Amaan*
- Labada qaab ee lagu fahmo baahiyaha caruurta waa inaad u fiirsato dhaqanadiisa is-waafaqaya marka uu ciyaarayo, cunto-cunayo ama jiifo. Tan labaad waa inaad la sheekaysato, sheekada ayaad kadhex garan baahida ilmaha ugu muhiimsan. Habka ugu sahlan waa inay su'aalo kuwaydiiyaan, lana waydiiyo. Waxay fududeyn dareenkooda inay kula wadaagaan, halkaana waxbadan kadhex garato.
- Ilmaha oo la dareensiiyo inuu qaali yahay, ra'yigiisu qiime leeyahay oo la dhegeysto, dooqiisa ama doorashadiisa oo la tixgeliyo, xorriyad in loo siiyo waxyaabaha qaarkood inuu samayn karo, haddii la diidana loo sharraxo. Arimahaan waxay gaarsiin ilmaha waxa loogu yeero self-esteem sare inuu yeesho.
- Self-esteem waxaa la xusaa inay tahay furaha horumarka ilmaha, oo ah ilmuhu inuu isagana marka hore is-ixtiraamo, si loo ixtiraamo, dadka kalana u ixtiraamo.
- Self-esteem-ka waxaa ku hoos jira oo sii xoogaysanaya is-aqoonsi (identity) iyo is-fahmid (self-consept) qofka uu yahay qofku.
- Khaladka ilmaha uga dhaca si kam'a ah, ha uga dhigin danbi-weyn, waayo waxay mustaqbalka u diidaysaa inuu karti u lahaado xakameynta karkabada (stress) iyo khalad qirashada.
- Si aad qaybtaan u dhexdhexaysato oo ilmuhu u noqon ukun jabeysa, sii akhri maqaalka kusaabsan Canaan-Amaan & Ciqaab-Abaalmarin.



Hooyo gabadheeda la akhrinaysa Qur'aan

**Caruurta baahidooda jireed iyo midda dareeneed, ayaa ubaahan dhexdhexaysi.**

# CANAAN-AMAAN & CIQAAB-ABAAL-MARI

Caruuri kor kacabsaday leedahay ee kal cabsada malaha oo ubadan dhanka xagjirnimada iyo caruur loo ilaaliyo sida ukunta iyo hor-xaaqidda oo ubadan dhanka gaabiska, waa labo dhinac oo ubaahan dhexdhexaysi fahan iyo tarbiyad.

AV **AADAM SH. CALI MAXAMUD** PHOTO **THINKSTOCK**

Waxaan shaki ku jirin in aadanuhu jecel yahay ammaanta iyo abaal marinta uuna jeclayn canaanta iyo ciqaabta. Waxaan ku eegaynaa maqaalkaan sida ugu wanaagsan ee barbaariyuhu u kala dooran karo hadba qaabka habboon iyo goorta uu habbon yahay. Marka hore waxaan milicsanaynaa qaybo ka mid ah cilmiga tarbiyada casriga ah ee reer Galbeedku waxay ka qoreen. Marka xigana waxaan eegaynaa sida diinteena hufan iyo Nabiga suuban (scw) ay u barbaariyeen bulshadii wanaagsanayd oo yar iyo weynba lahayd.

Ilbaxnimo kastaa waxay kuqotontaa taariikh bulsho oo wax laga bartay. Shuruucda iyo xeerarka dadku samaystaana waxay ka ambaqaadaan waayo-aragnimada iyo baahida bulshadaas. Marka aynu eegayno qaabka barbaarinta reer Galbeedku wax ka qoreenna, waxaa lagama maarmaan ah inaan ula noqonno taariikhda iyo baahida keentay inay nidaamkaan samaystaan. Waxaa iyana muhiim ah inaan iswaydiinno ma ku wada qanacsan yihiin hal qaab oo wax loo barbaariyo.

Laga soo bilaabo qarnigii 15aad ee miilaadiga waxay dalalka Yurubta Galbeed awood u yeesheen inay ku fidaan adduunka oo dadyow kale gumaystaan dhaqaale badanna ka helaan. Arrintaasi waxay socotey ilaa iyo qarnigii 20aad ee ina dhaafay. Waxaa fiditaankaas lasocday dagaallo joogto ah oo ku dhex maray dalalkii ay qabsanayeen. Waxay dagaalladii markii dambe yimaadeen inay Yurub gudeheeda ku diriraan. Waxaa taariikhda naloogu dhigay inay ku magacaabeen dagaalkii 1aad iyo kii 2aad ee adduunka (World War I iyo World War II), inkastoo qaarkood ay magacyo kale u yaqaanaan. Markii ay Yurub kasoo baxday dagaalkii 2aad (1945) waxaa kaga dhintay sida aan tirkoobka ka helayno (WWII statistics) dad gaaraya 472,000,000 oo isugu jira askar iyo rayad. Waxaa burburay dhaqaalihii Yurub intiisa badan. Waxaa lagama maarmaan noqotay in taranta la badiyo. Waxaa markaas yimid waxa taariikhdu ugu yeerto Taran-bararka ama dhal-badsiga (baby boom).

Waxaa is garab socdey intii ka dambaysey in aad loo dhiiri geliyo taranka iyo in la sameeyo sharciyo iyo hayàdo ilaaliya xuquuqda carruurta. Waxaa taas kadarnaa oo garab socdey dadkii dagaalka ku waayey eheladoodii, baahida ay u qabeen inay tarmaan iyo kal-gacalka lagu talax tegey oo ay u qabeen carruurta. Waxaa iyaduna qayb ka ahayd in shuruucdaan iyo hayàdahaan loo sameeyo qoysas aan yarayn oo kasoo kaban waayey dhibkii dagaalka oo u weecday khamri iyo maandooriye iyo carruurtoodii oo dayac iyo marmarka qaarkood faro xumayn la kulantay. Waxaa isbeddeley guud ahaan dhaqankii ka dhexeeyey carruurta iyo waalidka ama barbaariyaha. Waxaan ka bilaabaynaa marka eegmadeenna wixii ka dambeeyey Dagaalkii 2aab ee adduunka.

Carruurtii ku dhalatay bulshada reer Galbeed dhammadkii 40-kii qarnigii 20aad ilaa 60-kii isla qarnigaas (late 1940s – mid 1960s), waxay la kulmeen waalid iyo barbaariyeyaal u arka carruurta sidii ukunta oo isku deyaya inay ka ilaaliyaan xattaa turunturrada. Markii carrurtaasi kuwii ugu

«Waalida sida diyaaradaha qummaatiga u kaca ee carruurta dul heehaaba, waxay fara-gelin ku sameeyaan caruurta dhaqan kooda iyo waxbarashadooda. Iyagu ma toosiyaan, ma canaantaan, mana khilaafaan carruurtooda, inay cid kale intaas samaysana ma aqbalaan»

DR. HAIM GINOTT.

horreeyey soo gaareen dàda dhawr iyo toban ilaa labaatan oo qaarkood kasoo baxeen baalka barbaariyaha ama waalidka, ayaa waxaa la arkay inayan u carbisnayn inay u dulqaataan wax kasta oo ka duwan waxa ay rabaan. Waxaa bilaabatay dadka ku takhasusay barbaarinta iyo cilmunafsiga inay iftiimiyaan barbaarinta ukun-dhawrka u eg oo carruurta lagula dhaqmo.

Dr. Haim Ginott (1922-1973) oo wax badan ka qoray xiriirka waalidka iyo carruurta wuxuu adeegsadey erayga (helicopter parents) oo uu ku sifeeyey waalidka sida diyaaradaha qummaatiga u kaca carruurta dul heehaaba. Wuxuu leeyahay Dr. Ginott waxay waalidka noocaas ahi fara-gelin ku sameeyaan caruurta dhaqan kooda iyo waxbarashadooda. Ma toosiyaan, ma canaantaan mana khilaafaan carruurtooda, inay cid kale intaas samaysana ma aqbalaan. Waxaa dhacda in ilmahoodu uu helo darajo uusan jeclayn marka imtixaan laga qaado. Hadday taasi dhacdo iyagoo aan iswaydiin inuu mudnaa darajada uu helay iyo waxa uu khalday toona ayay dacwad ugu tagaan macallinka imtixaanka qaaday. Mar walba waalidku wax hagaaji buu isleeyahay. Hadiise waddadu ayan toosnayn wax hagaagi maayaan.

Waxaa kacay jiil aan tooda maahee wax kale u muuqan, iyagoo gaarey dàdii ay wax dhali kareen. Maxaa kasoo baxay kuwii ay kuwaasi dhaleen?

Carruurta dhalatay intii ka dambaysey toddobaatannadii waxaa waalid u ah kuwii ay soo barbaariyeen ukun-dhawreyaashu. Waxay u barbaariyeen carruurtooda qaab uu ugu yeeray Dr. Bent Hougaard "Curling parenting" sii-horxaaq. Curling waa cayaar Olympic ah oo baraf aad loo simay lagu riixo dhagax aad loo salaaxay oo siibanaya. Waxaa layaabku yahay dhagaxa oo keligiisbaa siiban kara ayaa labo cayaartoy la hor ordin xaaqin maro ah oo barafka usii tirtiraan. Hadii iyaga loosoo ilaaliyey sida ukunta, wuxuu leeyahay Dr. Hougaard iyagu waxay u laaliyaan carruurtooda sida bùda dhexe oo ukunta gudaheeda (the yolk of the egg). Carruurtaa wax u yeerisa oo hogganka haysa. Waxaad mooddaa inay xatta siyaasiyiintii isu dhiibeen dhaqankaas. Waxaa tusaale u ah in dhowaan dalka Norway laga dhaqan geliyey sharci dugsiyada iyo macallimiinta amraya in ardayga telefoonka gacanta aan laga qaadi karin haddu adeegsado inta waxbarashadu socoto iyadoo lagu fasiray inuu telefoonku yahay hanti gaar ah. Waxaa kala dooday ardaydii aan wax u dhigayey oo dàdoodu tahay 15-16 jir. Waxay isku raaceen inay xaqqaas leeyihiin sida dadka waaweyba aan looga qaadi karin hantidooda. Markaan iri "hadii aad lasoo baxdaan anoo wax idiin dhigaya waxaan xaq uleeyahay inaan anshax-xumo ah idinka qoro, waxay kulligood yiraahdeen waxaa noo fiican inaadan wax naga qorin ee aad naga qaaddid telefoonka. Marka cilladdu carruurta maaha ee waa dhaqanka dadka waaweyn oo isbeddeley.

Inta badan culimada wax ka qoray barbaarinta way tilmaamayaan inaan carruurta dani ugu jirin in sidii ukunta loo dhawro iyo in meeshay cagta dhigayaan lasii xaaqo toona. Waxay tilmaamayaan in ay muhiim tahay in la dhegaysto oo la tixgeliyo ràyigooda. Waxay isla markaas tilmaamayaan in waalidka iyo barbariyuhu leeyihiin go'aanka si carruurtu u bartaan inaan toodu marwalba ahayn tan soconaysa.

Annagu haddan nahay Soomaali waxaan soo galnay qurbaha waxaan ubadan nahay dàda siddetannadkii iyo intii ka dambayey dhalay carruurta. Waxaan kusoo kornay dhaqan oranaya "carruuri kor cabsaday leedahay ee kal cabsada maleh". Waxaynu u nimid dhaqankaas isugu jira ukun dhowr iyo sii horxaaq. Keenniina xagjirnimaa kujirtey kaan u nimidna xagjirnimadiisa kuwii lahaa baa ka qaylinaya. Waxaa saxan dhexdhexaysiga sida ay qirayaan culimada barbaarintu. Hougaard wuxuu leeyahay in kastoo carruurtu maanta haystaan dheregta xagga maaddada wax aysan weligood helin, haddana xagga barbaarinta waxaan dhihi karnaa manta maalin ay ka baahi badan yihiin ma jirto. Waxaa halkas ka muuqanaysa in dhexdhexaysiga Islaamku yahay biyo-kama-dhibcaan aan gaf iyo gol-daloolo midna lahayn. Waxaan kusoo qaadanaynaa caddadka dambe ee KM haddi eebe ina gaarsiiyo.

# NUXURKA

- Helicopter parents - waalidka udhaqma sida diyaaradaha qumaatiga u kaca.
- Carruurta dhalatay intii ka dambaysey toddobaatannaadkii waxaa waalid u ah kuwii ay soo barbaariyeen ukun-dhawreyaashu.
- «Curling parenting» sii-horxaaq oo uu hindisay Dr. Bent Hougaard, wuxuu leeyahay Dr. Hougaard iyagu waxay u ilaaliyaan carruurtooda sida bu'da dhexe oo ukunta gudaheeda (the yolk of the egg).
- Culimo badan oo wax ka qoray barbaarinta waxay tilmaamaan inaysan carruurta dani ugu jirin in sidii ukunta loo dhawro iyo in meeshay cagta ay dhigayaan lasii hor xaaqo toona.
- Waxay tilmaamayaan in ay muhiim tahay in la dhegaysto oo la tixgeliyo ra'yigooda. Balse go'aanka waxaa iska leh waalidka iyo barbaariyaha.
- Hougaard wuxuu leeyahay, in kastoo carruurtu maanta haystaan dheregta xagga maaddada wax aysan weligood helin, haddana xagga barbaarinta waxaan dhihi karnaa maanta maalin ay ka baahi badan yihiin ma jirto.
- Soomaalida dhaqanka koriinka ay katimid iyo kuwa ay u timid, waa labo dhinac oo xagjirnimo ah, una baahan dhexdhexaysi.

«Waxaa halkaas ka muuqanaysa in dhexdhexaysiga Islaamku yahay biyo-kama-dhibcaan aan gaf iyo gol-daloolo midna laheyn.»

AADAM SH. CALI



Hooyo ilmo xambaarsan



Aabe la ciyaaraya lagdin gacan, wiilkiisa oo 8-9 jir ah. Photo: Thinkstock

**Xusuus-qor dhakhtar ilkood – Aabo wax walba oo dhaca, anigaa ku garab taagan.**

# AABE BALANTIIS

Aabe aanan kala garaneyn ilmihiisa da'dooda iyo aabe u balanqaaday inuu noloshiisa ka warqabi doono wiilkiisa. Sidaasna wiilkiisi uga warqabay markuu gaboobay.

AV **DR. HIBAAQ CABDIRAXMAAN BUUBAAL**

Taariikhdu markii ay ahayd 15/11/2013, ayey gabadh bukaan ihi iigu timid dhakhtarka. Gabadhaas oo aan u malaynayo in ay ahayd 30-jir, ilig baa xanuunayay wajigeeduna wuu bararsanaa. Islamar ahaantaasna, waxay qayd duug ah ku xambarsanayd wiil weyn. Sidoo kale waxay wadatay saddex carruura. Intaan eegay oo aan ka naxay ayaan ku idhi, walaal inanka iska dhig waad aragtaa dhibta ku haysatee! Waxay igu jawaabtay may walaal, waayo dhulka ma ogola oo qaydka ayuu bartay, gurigana cid aan kaga imaado ma joogaan.

Markii ay iga baxday gabadhii ayaa waxaa soo weydaartay nin marqaansan, shaadhkiisuna kala dheer yahay, cankana qaad baa uga buuxay. Wuxuu waday wiil uu dhalay, wuxuu igu yidhi, bal ka saar kan yar iliga, hooyaddii waxay tidhi xalay buu ka seexan waayey iligee.

Waxaan weydiiyay waa imisa jir? Wuxuu iigu jawaabey waa 7, 8 ama 9 jir. Kadibna wiilka laftiisi ayuu waydiiyay horta imisa jir baad tahay? Wiilkii oo yaaban baa yidhi, aabo ma garanayo. Markaas uu yidhi, balaayadu waa wax wada yar-yar oo is laa'le'eg bal sug hooyadii baan weydiinayaaye. Intuu wiilka hooyadii telefoonka u dirayay, ayaan naftayda weydiiyay muxuu yahay aabaha aanan garanayn da'da wiilkiisa?

> "Wuxuu igu yidhi bal ka saar kan yar iliga, hooyaddii waxay tidhi xalaybuu ka seexan waayey iligee"
>
> DR. HIBAAQ.

Dhakhtarka aan ka hawl galo carruuaraha xanuunsanaye ee lakeeno waxaa wada boqolkiiba sagaashan dumar. Suuqa ka soo horjeeda dhakhtarka aan ka hawl galo boqolkiiba sagaashan waxaa ka xoogsada dumar. Boqolkiiba sagaashan dumarka aan garanayo ama arkay caruuraha waxay geeyan kana soo celiyaan dugisayada.

Maanta waxaan ka sheekaynaynaa xidhiidhka uu aabuhu la leeyahay carruurtiisa. Taasna waxaan tusaale ahaan ugu soo qaadanaynaa sheeko yar oo aan akhriyay. Sheekadaas oo kusaabsan aabe faqiir ah, xaaskiisa iyo wiil uu dhalay oo ku noolaa wadanka Armeeniya. Aabahaasi subax kasta oo wiilkiisu soo kaco waxuu ku odhan jiray aabe waxba haka baqin wax kasta oo dhaca anigaa ku garab taagan.

1988 Armeeniya waxaa kadhacay



Raadka dhul gariirkii kadhacay Armeeniya.

# NUXURKA

- Aabaha kuxusan sheekada wuxuu kala garan waayay da'da ilmihiisa, wiilka laftigiisana cid kale uma sheegin da'diisa ama ma aysan waydiin, si uu isku waydiiyo oo u ogaado.
- Aabuhu si wacan uma fahansaneyn sababta uu wiilkiisa uga saarayo iligga.
- Xiriirka wiilka iyo aabihii waa halbowlaha horumarka wiilka iyo inuu aabihii kasii fiicnaado. Sida gabadhu xiriir kalsooni hoose ugu qabto hooyadeed.
- Waxaa la xusaa in wiilashu aad u jecel yihiin hooyooyinkood, laakin waxay aaminsan yihiin su'aalahooda inay uga jawaabi karaan aabayaashood.
- Kalsoonida uu waalidku ku beero caruurtiisa, ayaa kadhigta qof masuuliyad qaada mustaqbalka.
- 7 December 1988, saacaddu markii ay aheyd 11:41, ayuu dhul-gariirkaan loo baxshay (Spitak earthquake) kadhacay gobalada waqooyiga ee dalka Armeeniya.
- Waxaa la xusaa muddo 4 daqiiqo ah inay ku dhinteen dad lagu qiyaaso 25000 oo ruux, buugaagta taariikhda qaar ayaa intaa kabadan sheega.
- Burburku wuxuu gaaray warshado iyo waaxo korontada laga dhalin jiray.
- Burburkan wuxuu saameeyay 20 magaalo iyo 342 tuulo, meesha 58 kamid ah gabi ahaan burbureen.
- Sheekadan Armando iyo aabihii, aduunka qoloba si ayay u isticmaashaa ama uga faa'iida danaheeda, nuxurku'se waa xiriirka iyo kalsoonida aabuhu ku abuuro caruurtiisa.

dhul-gariir, gilgilay dhamaan tuuladii uu reerku ku noolaa. Markii dhul-gariirku dhamaaday ee uu arkay in gurigiisii badqabo, xaaskiisuna nooshahay, ayuu odaygii bilaabey inuu inankiisi baadi goobo. Wuxuu yimid dugsigii, wuxuu arkay in dhamaanba dhismihii iskuulku dhulka galay. Dhamaan waalidiintii caruurtuna rajo dhigeen oo ay banaanka iskuulka ku ooyayaan. Halka ay booliskii oo dhibaatada tahli kari waayay, ay burburka ka ilaalinayaan waalidiinta ay murugadu miyirkii ka qaadday. Aabiihii markuu arkay burburka dhul-gariirka, waxaa kusoo joogsatay illin, balse waxaas oo dhan uma muuqan, wuxuuna soo xasuustay balamihii uu wiilkiisa la galay ee ahaa "Aabo wax kasta oo dhaca waan ku garab taagnahay". Kadibna intuu fekeray ayuu is-weydiiyay fasalkii inankaagu xagee buu ku yaaley?

> "Waxaan weydiiyay waa imisa jir? wuxuu iigu jawaabey waa 7, 8 ama 9 jir, kadibna wiilka laftiisi ayuu waydiiyay horta imisa jir baad tahay?"
>
> DR. HIBAAQ.

Wuxuu xasuustay inuu ahaa fasalka dhinaca midig ugu danbeeya, dhinaciisa ayuuna u dhaqaaqay. Wuxuuna guda galay inuu qodo burburkii oo uu gacmihiisa ula tago si uu raq iyo ruux mid uun ugu helo wiilkiisa.

Waxaa u yimid labo ka mid ah waalidiintii carruurta dugsiga dhiganaysay dhashay, waxayna ku yidhaahdeen jooji waxa aad waddo, waayo cidi meesha kama ay badbaadin. Wuxuu ugu jawaabey ama i caawiya ama iska kay daaya. Hadana waxaa u yimid booliskii waxayna ku amreen inuu joojiyo dhagxaantan uu gurayo, waayo waxaa laga yaaba inaad xadhkaha laydhka aad googoyso oo ay meeshu qaraxdo. Iyagana wuxuu ugu jawaabey ama i caawiya ama iska kay daaya aan ku sabree. Booliskii weey katageen, waayo waxay moodeen inuu waashay.

Waxay xuseen booliska Armeeniya, inuu ninkaasi qodayay burburkii mudo dhan 38-saacadood, isagoon waxba cunin. Islamarkaana aan nasan, waxaa sidoo kale lasheegay in aabahaasi ay gacmihiisu dildilaaceen. Ugu danbayntiina wuxuu ku guulaystay inuu dalool yar baneeyo. Wuxuuna ka arkay madaxyada qaar ka mid ah ardaydii oo dhex tagtaagan burburka dhismaha, wuu miyirsaday wuxuuna bilaabay inuu ku dhawaaqo magaca wiilkiisa isagoo leh "Armand kumee aabo". Wiilkii yaraa ayaa farxay oo ugu jawaabey, aabo waan noolahay, waa i kan aabo. Wiilkii wuxuu yiri, aabo waxaan ku idhi carruurtii uu dhismuhu nagu wada dumay, aabahay ayaa iman doona oo meesha inaga saari doona, waayo wuxuu aabaheey odhan jiray ha baqin aabo waxkasta oo dhaca anaaa ku garab taagane.

Burburka iskuulka maalintaas waxaa ku dhintay 14-arday, waxaana badbaaday 33-arday. Armando waxuu noqday kii ugu danbeeyey ee lasoo saaro 33-kaas arday. Boolisku waxay sheegeen hadii hal saac ay kusii jiri lahaayeen inay dhamaantood ku dhiman lahaayeen meesha.

> "Aabo waxba haka baqin waxkasta oo dhaca anaa kugarab taagan"
>
> ARMANDO IYO AABIHIIS.

Markii uu gaboobey Armando-aabihii, waxaa gacanta ku hayey xaaskiisa iyo wiilkiisa Armando oo macalin noqday. Armando subax kasta wuxuu ku odhan jiray aabihii "Aabo waxba haka baqin waxkasta oo dhaca anaa kugarab taagan".

Caruurtu waxay u baahan yihiin aabo saaxiib la noqda, waxay ubaahan yihiin aabo ay sirta ku qarsadaan ama ku aaminaan oo aysan waxba kaqarin.

Hooyaddu marnaba ma buuxin karto kaalinta aabaha. Waxaadna ogaataa ilmuhu haddii uu naxariista aabaha waayo inuu dibada ka raadsan doono qof u buuxiya kaalintaas ama siiya naxariista uu waayay.

**Fahamka iyo aaminaadda mabd'a fekereed, ayaa ka awood balaaran aqoon badan.**


# AAS-AASAYAASHII SYL, AQOON YAR IYO ARAGTI DHEER

Saddex iyo toban dhallinayaro ah, da'dooduna udhexeyso 16-33 sano, tiro iyo awoodba yar ayay hadana 17-sano gudohood ku gaareen xorriyad iyo dowladnimo. Haddaba waa inaan is-weydiinno duruusta laga dhaxli karo habkay uqorsheeyeen, habkay ufekereen iyo hanaankay dhaqaale usameeyeen.

AV **CABDICASIIS CARTAN**

Saddex iyo toban dhallinayaro ah, da'dooduna udhexeyso 16-33 sano, Bari iyo Galbeed aan wax ku soo baran, jaamacad mid gudo iyo mid dibadeed aan ka bixin, shahaadooyin sarena aan wadan, haddana u fekeray una dhaqmay si ka duwan kana xeel dheer, habka ay ufekerayaan kumanaan maanta jooga, oo helay fursado waxbarasho ama xambaarsan shahaadooyin sare. Saddex iyo toban dhallinayaro ah, aan lahayn hanti magaalo iyo xoolo miyi toona, marka laga reebo mushaarkooda, qiiro wadaninimo iyo neceyb gumeysi. Haddana waxay soo hooyeen miro iyo guulo aanay soo hoynin, kuwii iyaga ka farcamay, dhaqaale iyo hanti ka badanna haystay, bal kuwaasi waxay dayaceen dhaxalkii aabbayaasha haaddana uwareen.

Wax badan baa laga qoray SYL, taariikhdoodii iyo halgankoodii, hadafkayguna maaha qoraalkan kooban inaan ku celiyo soo werinta marxaladdii iyo duruuftii ay ku aas-aasmeen, loolankii iyo caqabadihii la soo gudboonaaday, waxaanse uga gol leeyahay inaan is-weydiinno, ama bidhaaminno duruusta laga dhaxli karo habkay uqorsheeyeen, habkay ufekereen, habkay dhaqaale usameeyeen, habkay ufahmeen waaqicii ay joogeen iyo kii ku soo fool lahaaba. Shan fikradood ayaan wax ka sheegaynaa insha Allaah.




**1 SOOMAALI BAAN AHAY:** Iskuma ay urursan dhalasho gobol ama mid beeleed toona, waayo waxay ka kala yimaadeen badanka dhulkii uu Talyaanigu gumaysanayey, sida gobolada Banaadir, Jubada sare, Mudug iyo Bari. Sidaasoo kalena isuguma ay imaan dan kooxeed ama urur ay ka wada tirsan yihiin sida shaqaale, arday, culimo, tujaar, iwm, waayo shaqooyinkooda iyo tacliintoodu waa dhinacyo badnayd. Waxaa mideeyey hadafka iyo fekerka, iyagoo ufekerey si aanay ufekerin odayaashii, wadaadadii, maalqabeenkii, iyo waxgaradkii waqtigooda joogay, ama ay ku dhiiradeen iyagu, inkastoo ay dad badan ka guuxaysay. Taas macnaheedu wuxuu yahay in dhallinyaradu tahay cajaladda dhaqaaqa, haddii ay helaan dan mideysa oo guud, dareen sax ah iyo duruuf toosan.

**2 WAQTIGA MUNAASIBKA AH:** Inaad fahamto marxaladda iyo waaqica aad joogto waxay qayb weyn ka tahay inaad garato tallaabada aad qaadi karto guusheeda. Fursaddii waqtigeeda laga faa'iideysan waayana ma soo laabato. Markii Talyaanigu ku jabay dagaalkii 2aad ee dunida, Ingiriiskuna waddanka wada qabsaday, dhallinyaradaas waxaa ubidhaantay fursad lama sii daayaan ah, oo ah in gumeystaha cusubi ka dhib yar yahay kii hore, lagana heli karo fursado aanu ogoleyn fashiistihii Talyaanigu. Taasina waxay kuu fasiraysaa maxaa SYC, kaddibna SYL loo aas-aasay 1943, maaddaama joogitaanka isticmaarku wax badan waqtigaas ka horreeyey. Waxaa taa la xiriira fahamka ay garteen inay ururka bilowgiisa ka dhigaan naadi bulsho, ee aanay dalban urur siyaasi ah, waayo gumeysiga cusubi diyaar uma aha inuu rukhso siiyo cid waddanka ku qabsanaysa. Laakiin dhawr sano kaddib 1947 markuu naadigoodu si fiican xididada umutay, shacbiyad waasic ahna ku yeeshay bulshada dhexdeeda, ayuu caddaystay hadafkiisa dhabta ah, magaciisana ubeddelay SYL. Ma waxay ka qaateen habkaas siirada Nabiga NNK marxaladii qarsoodiga iyo kaddib caddayntii dacwada? Mise waxay aqriyeen fikraddii Cabdilxamiid bin Baadiis, iyo habkuu ula dhaqmay gumaystihii Faransiiska markuu aas-aasayey jamciyaddii culimada muslimiinta Aljeeriya?

**3 TACLIIN AMA KHIBRAD:** "Bun haddii la waayo beddelkiisaa la helaa" waa maahmaah

Soomaaliyeed, carabtuna waxay tiraahaa "duruuftaa dariiqa ku tusta". Jaamacado nasiib umay yeelan, laakiin duruuftaa iyo baahida waddanka ayaa wax bartay, in badanna waxay wax ka qorsheyn og yihiin kuwa jaamacadaha ka soo baxay. Ugu horeyn aas-aasayaashu waa kooban yihiin, waayo kalsoonidu iyo ikhlaasku waa muhiim bilowga camal kasta, gaar ahaan gumeysi hoostiis. Waxaadse aad usii fahmi kartaa aragti dheeridooda markaad fiiriso qaar ka mid ah qodobada uu ka kooban yahay barnaamijka ururkooda, sida: In la soo dhiciyo xorriyaddii shanta Soomaaliya. In xoog la saaro tacliinta ubadka, tacliin la'aanteedna aan wax horumar ah la gaari karin. In dagaal lagu qaado lana tir-tiro caadooyinka iyo dhaqamada foosha xun sida qabyaaladda, quursiga, is takoorka, iwm.

**4 Maxaa dan guud ah:** Dhallintaasi wey ka horreeyeen waqtigooda, maanta Yurub oo isu tagtay ayaa waxay garatay inay waddan ka mid ah kuwa ugu yar-yar ay xarun ka dhigtaan, halka carabta iyo Afrika ay xarun ka dhigteen waddamadii ugu waaweynaa markii ururadooda la aas-aasay. Guddoomiyaha SYC kaddibna SYL waxaa loo doortay Cabdulqaadir Sheekh Sakhaawadiin, ku xigeenkiisana Xaaji Maxed Xuseen, oo labaduba ka soo jeeda beelaha laga badan yahay. Waxaa ammaan mudan in waqtigaas aadka uhorreeya ay miisaameen dhallintaasi xasaasiyaadka ka dhexeyn kara beelaha qaarkood, iyo inay ka fogaadaan is qab-qabsiga ka imaan kara haddii beelaha tirada sheeganaya loo doorto madaxda ururka usareysa, iyo siday arrintaasi ula hari karto waxqabadka ururuka. Waayo hadafku waa mid guud iyo waddan ee mid gaara iyo beel maaha. Ahmiyad kale oo uu lahaa Cabdulqaadir Sh Sakhaawadiin oo ay dhallintaasi ku hormariyeen waa isagoo marna nin caalin diineed ahaa, marna uu awoowe u ahaa Sheekh Aweys Biyooleey oo Soomaalida miisaan iyo qiime weyn dhexdeeda ku lahaa. Sidaas darteed waxay arkeen in cilmigiisa, magaciisa ama magaca qoyskiisa ururka sumcad iyo guul ugu soo hoyan karto?

**5 Isku tasho:** Waagii Masar loo diyaar garoobayey ka hortegiddii duullaankii Tataarka, ayey nimankii Mamaaliiktu oo markaas Masar ka talinayey ka dalbadeen culimadii diinta inay dadka baraarujiyaan, si ay jihaadka ugu tabarucaan. Sheekh Cisidiin bin Cabdisalaam ayaa ku yiri dadka waxba la weydiin maayo, illaa idinku aad soo quftaan khasnadihiinna maalka ku jira, si dadweynuhu idiinku daydaan, sidii bayna noqotay. Dhaqaaluhu waa laf-dhabarka dhaqaaq kasta, Sidaan horey uxusnayna dhallintaasi ma haysan wax hanti ah, haddana waxaa waajib ah inay hawshu dhaqaaqdo, horumarto, guulaysato. Si dadka loogu qanciyo inay wax bixiyaan, waa tan koowaade waa inay iyagu bixiyaan oo bilaabaan, kaddibna dadka usoo bandhigaan qorshe ay kaga qayb qaataan wax bixintaas. Sidaas dareteed, waxay isku waajibiyeen in xubin kasta oo shaqeysa ay ururka ku bixiso 20% mushaarkeeda, dadka aan shaqeyna wax baa loo gooyey uu bixiyo bishii siduu doonaba ha ku keenee. Haddaba, hawl aan qofka xigaa uhagar bixin, hana qaadi mayso, waana taan maanta aan garan la'nahay ama gaari la'nahay, hal haysna ay noo noqotay beesha caalamku ha na soo gaarto, Soomaali ama badanka Muslimiinta dhaqanka unoqotay.

### Gunaanad

Ugu danbayn, waxa aan ka hadlayo waa aas-aasyaashii SYC/SYL oo kaliya, ee maaha markii shacabkoo dhami halganka ka qayb qaatay. Tan kale, dhallintaasi waxay na bareen inaan annagoo awood yar wax qorshaysan karno, waxna qabsan karno, guulna gaari karno dhinac kasta oo nolosheenna ka mid ah, haddii la helo niyad, qorshe iyo hadaf toosan. Waxaana yaab leh inay dhallintaasi, tiro iyo awood yar ay 17 sano gudahood xorriyad iyo dawladnimo ku gaareen, halka maanta cadad iyo awood ka badanba, 24 sano lagu soo celin la'yahay dawlad jirtay oo dhacday. Niyad sami iyo hadaf guud ayaana saldhig unoqon kara, guul la gaaro.

> «Hawl aan qofka xigaa uhagar bixin, hana qaadi mayso, waana taan maanta aan garan la'nahay ama gaari la'nahay.»
>
> CABDICASIIS CARTAN

## SYL

- SYL (Somali Youth League) waa xisbigii siyaasadeed ee ugu horeeyey Somalia.
- Waxaa la aasaasay 1943 waxaana la oran jeray SYC (Somali Youth Club).
- Waxaa aasaasay 13 dhallinayaro ah, da'doodu udhexeyso 16-33 sano.
- SYL waxay la baxeen 1947.
- SYL waxay hogaamisay kuna guulaysatay halgankii xorriyad-doonka qaranka Soomaalya.
- SYL waxay ku guuleysatay doorashoonyinkii ugu horreeyey ee Soomaalya ka dhacay 1956, waxayna hogaamisay xukuumaddi ugu horreesay ee dalka hogaamisa xorriyad qaadashadii kadib.
- Shanta fikradood ee si xeeldheer looga baran karo SYL:
  - ***SOOMAALI AYAAN AHAY:***
    - ✔ *Iskuma uruursan dhalasho beeleed ama gobal, cid walba oo arimahaas isku uruursata ujeedkoodu waa ku meelgaar, iyaga ayaana kala dhammaan waaya mustaqbalka dhow.*
    - ✔ *Waxaa mideeyay mabd'a feker ay wada aamineen, daacadna u ahaayeen. Waana awoodda middeyn karta insaanka, waana midda uu ku kala sareeyo. Fekerkaa sara mariya ama dib dhiga dadka – sii akhri maqaalka Ma Istaqaan.*
  - ***MUNAASABADDA WAKHTIGA:***
    - ✔ *Jabkii Talyaaniga iyo guushii Ingiriiska ayay fursad kadhex arkeen.*
    - ✔ *Fahanka waaqica qofku kusugan yahay iyo akhrinta duruufaha taagan iyo kuwa isbedeliya, waxay gogol-xaar u noqon karaan baraarug iyo horumar cusub.*
  - ***TACLIIN AMA KHIBRAD:***
    - ✔ *Khibradda ayaa bartay koobnaanta, kalsoonida iyo daacad u noqoshada waxa qofku doonayo inuu kamira dhaliyo.*
    - ✔ *Barnaamijkoodi kor u qaadidda tacliinta, wuxuu ahaa iftiiminta dadka, si ay udabar go'aan dhaqamada foosha-xun ee dadka kala dila sida qabyaaladda, quursiga iyo takoorka.*
  - ***DANTA GUUD:***
    - ✔ *Fahankoodu wuxuu gaarsiisanaa, danta-guud oo laga heshiiyo inay gundhig u tahay gaarista dan-gaar ah iyo qof walba inuu gaaro yoolkiisa nololeed.*
    - ✔ *Waxaa halkaas ka maqan wax walba oo laxiriira anaanimo iyo dareen-shakhsiyadeed, ee inta badan horseed unoqdo burburka insaanka.*
  - ***ISKUTASHI:***
    - ✔ *SYL waxay isku waajibiyeen in xubin kasta oo shaqeysa ay ururka ku bixiso 20% mushaarkeeda.*
    - ✔ *Shaqo qofkii xigaa u hagar bixi waayay, hana qaadi mayso – waa feker sidoo kale la xuso inay aaminsan yihiin dadka Jarmalka ah ee sida dhakhsaha ah uga soo kabtay dhibaatooyinka dunida soo maray.*
    - ✔ *Isku tashiga shakhsi iyo umad ahaan, waa talaabada koowaad ee xornimada iyo horumarka aadanaha ee taariikhda dunida la xuso.*
    - ✔ *Waana meesha ay ka bilaabato isku-kalsoonida qofka ama umaddi hesho.*
    - ✔ *Natiijada ka dhalata isku-tashi xumada dhaqaale iyo cuskashada dadka kale, kasii akhri maqaalka NGO-yadu ma dhaqaale ayay abuuraan.*



Awoodda maskaxda.

**Insaanku dhulka dabci ayuu ka qaataa, hawada dabci ayuu ka qaataa, biyaha dabci ayuu ka qaataa, dabkana dabci ayuu ka qataa.**

# MA ISTAQAAN?

Bini'aadamku waxyaalo wuxuu la wadaagaa caalamka dareenka, waxyaalo kalena caalamka arwaaxda, waxyaalana waxay u yihiin gooni. Kuwaan danbe ayaa sababay inuu qaado masuuliyadda duniddaan.

AV **MUKHTAR QORANSAY**

**Ma istaqaan?**
Kafaalo Magazine 2014, waxaan is-waydiinay yaa mudan inuu dadka maamulo? Halkaas oo aan ku rogrognay qofka insaanka iyo sadexda qaybood ee uu ka kooban yahay naf, jir iyo caqli iyo sida sadexdaas iskula shaqeeyaan oo midkood, u maamulo kan kale, ayay bulshaduna iskula shaqeyn kartaa, iskuna maamuli kartaa.

Markaa, waxaa noo baxay si loo helo maamul wanaagsan, waa in la helaa bulsho wanaagsan, si taas loo helana waa in la helaa insaan wanaagsan. Hadaba, si'aan u fahano insaankaas wanaagsan, waxaa lagama maarmaan ah inaan is-barano insaan ahaan oo is-waydiino: Muxuu yahay insaanka wanaagsan ee wax maamuli kara? Sidee u samaysan yahay dabci ahaan? Sideese insaankaas iyo bulshadu is-kula falgeli karaan? Sababta loogu baahan yahayna maxay tahay? Si'aan su'aalahaas jawaab ugu helno, waxaan ku eegaynaa aragtiyadii Ibnu Khalduun iyo Faylasuufaradii ka horeeyay.

Su'aalahaas insaanka waxay nagu biyo shubayaan, ayaadda Qur'aanka ee Suuratul Baqarah, Alle ku leeyahay Malaa'ikta «Dhulka waxaan u sameyn Khaliifah» 2:30. Baydaawi wuxuu xusaa in Malaa'ikta u muuqatay insaanku inuu leeyahay 3-tilmaamood oo is-burinaya, shahwooyin iyo caro, keenaya musuq-maasuq iyo dhiig-daadin iyo caqli ugu yeeraya garasho iyo hogaansamid. Markaa waxay is-waydiiyeen sidee khaliifah looga dhigi karaa? Maxaase faa'iido ah oo ka dhalanaya inuu hogaamiyo makhluuqaadka dhulka, hadii uuba leeyahay dabeecadahaas iska hor imaanaya. Balse waxay Malaa'iktu arkin in caqligaas loogu tala galay inuu xakameeyo shahwooyinka iyo carada.

Faylasuufaradii hore markii ay arinkaan is-waydiinayeen, si qalalan oo heehaabid ah ayay isku su'aalayeen. Balse Ibnu Khalduun wuxuu is-waydiiyay isagoo ka duulaya "Khaliifatulah fil-ardi" iyo fikri ku qottoma Islaamka. Wuxuuna ka duulay labo qaacido: 1) Insaanku waa makhluuq. 2) Insaanka waxaa loo xilsaaray dunida inuu ka taliyo.

Sababtuna waxaa weeye inuu dabci ahaan madaxweyne iska yahay. Taasna waxaa laga garan karaa tilmaamo uu qaarna kala mid yahay makhluuqaadka kale, qaarna dheer yahay. Hadaba, su'aashu waxay tahey maxay yihiin tilmaamahaas insaanka ka soocaya makhluuqaadka kale ama isaga dhexdiisa lagu kala sooci karo si uu isku hogaamiyo?

Ibnu Khalduun caalamka u qaybiyaa 3-qaybood, caalamka dareenka waa caalamka aan la wadaagno xayawaanaadka dunida nalagula nool, sida 5-ta dareen ee wax lagu haleelo (aragga, maqalka, urka, dhadhanka iyo taabashada). Caalamka nafta waa ka sareeya midka dareenka, waayo waxbadan ayay doonaysaa nafta insaanka. Caalamka arwaaxda iyo Malaa'ikta, waa caalamka caqligeena ku jira, sida rabitaan, ujeedooyin, sababta ka dhalata ficilka, inaan kasii fakarno, iyo sababta na kicinaysa. Sidaa awgeed, Ibnu Khalduun wuxuu u arkaa insaanka maadama uu caalamka xayawaankana wax la wadaago, kan Malaa'iktana caqliga la wadaago, hadana Malaa'ikta dheer yahay dareenka, xayawanaadka kalana dheer yahay caqliga, wuxuu ehel u noqday inuu ka taliyo dunida.

Halkaa waxaa kudhimanaya aragtidii Ibliis ee aheyd aniga naar ayaa la iga sameeyay, insaankana dhoobo, sidee iigu taliyaa? Waayo taladu kuma xirna guriga aad ka soo baxday, dadka ku dhalay, waxa lagaa sameeyay, midabkaaga inuu cad ama madow yahay ee waa sida aad insaan ahaan tahay, ugana duwan tahay feker iyo dhaqan ahaan makhluuqaadka kale iyo insaanka kale. Insaanku a) dhulka ayuu kayimid, waxa kasoo baxa ayuu cunaa, b)Biyihiisa ayuu cabbaa, c)Hawadiisa qabow ayuu iskaga dhawraa kuleelka, d)Dabkiisa kulul ayuu iskaga dhawraa qabowgeeda. Markaa xayawaanaadka kale ee uu dhulka kula nool yahay intaas ayuu la wadaagaa si ay u badbaadaan.

Markii si xeeldheer loo sii fiirsho, dabciga insaanka, wuxuu ka dhashaa afartaas walxood ee uu la falgalay, loona yaqaan (Classical elements). Dabka wuxuu ka keena qaybtiisa wanaagsan geesinimada, awoodda hal-abuurka, xammaasadda, dhiiranaanshaha. Dabeecadaha aan wanaagsaneyn ee uu dabka ka keeno waa burburinta wax walba, xanaaqa, ololka iyo naceybka. Hawada wuxuu ka qaatay dabeecadaha raxmadda, qalbi-furnaanta, isku-tiirsanaanta, rajada wanaagsan, farxadda, dhoola caddeynta iwm iyo kuwo aan wanaagsaneyn, sida xanta oo la mida qaabka dabeeshu dhawaaqa u qaaddo, joogteyn la'aanta, dul-qaad yarida, fudeydka

> «Ducfigaas jaahilnimo iyo rabitaankiisa inuu ogaado mustaqbalka, ayaa waxaa kadhasha labo fahan oo muhiim Insaanka u ah; masuuliyad iyo xornimo»
>
> IBNU KHALDUUN.

iwm. Dabeecadaha wanaagsan ee biyaha uga yimaada waxaa ka mid ah fahanka, isla falgalka, dabacsanaanta, nadiifnimada, cafiska. Kuwa aan wanaagsaneyn waxaa ka mid ah xasilooni yaridda, naxariis darrada, caajiska iyo fadhiidnimada, tixgelin la'aanta iwm. Dabeecadaha wanaagsan ee dhulka uu ka qaato waxaa ka mid ah adkeysiga, dulqaadka, joogteynta, masuuliyadda, is-difaaca, aaminaadda, ixtiraamka. Kuwa aan wagaansaneyn waxaa ka mid ah dhalanteedka khiyaaliga, caajiska, adeyga, kala duwanaanshaha, isbedbedelka iwm. Sidaas oo ay tahay waxaa la siiyay doorasho uu xor u yahay, oo aan hoos ku faahfaahin doonno.

## Soocnaanta Insaanka

Haddaan usii fiirsano dabciyadaas kore waxaa insaanka la wadaagi kara xayawaanaad badan, laakin waxaa jira dhawr arimood oo insaanka gooni u ah oo muujinaya daciifnimadiisa, waxaana ka mid ah:

1. Inuusan kalgiis waxba qabsan karin oo uusan dhexdiisa kala maarmin xag quud iyo is-difaac ahaan.
2. Inuu u janjeero iska sara marinta insaanka kale, tanoo dhexdooda isku dirta, kana dhalisa coleytan. Waa dabeecad kamid ah nusqaantiisa oo la doonayo inuu xakameeyo.
3. Jahliga oo asal u ah, insaanku aslan waa jaahil, cilmiga iyo khibradda wuu kasbadaa ee laguma dhalo. Sidaas oo ay tahay ogaalkiisa wuu ka shakisan yahay oo wuxuu jecel yahay waxa berri dhici doona inuu ogaado, si'uu ubadbaado. Markaa intuu maanta ogyahay kuma filna. Taasi waxay keentay inuu mar walba wax ogyahay, waxna ogeyn, oo ogaalkiisu ma dhamaystirna. Waana sababta xikmadda Rabbaaniga ah ee cilmu-qaybka looga qariyay.
4. Nafta insaanka kheyrka iyo sharta way aqbali kartaa. Waayo insaanku aslan waa waraaq cad, marka uu uurka hooyadii kasoo baxo. Sidaa awgeed waa nadiif oo xagga kheyrka ayuu u janjeeraa, laakin tarbiyadiisa meeshii loo badiyo ayay kherkiisa iyo shartiisu u bataan.
5. Nafta insaanka waxay u janjeertaa raaxada hadii ay asaasiyaadka nolosha hesho, kadibna halkaas ayay nusqaantu kasoo gashaa.
6. Wax walba oo ay nafta insaanka u aragto inay ka sii fiican yihiin, way ku dayataa.

## Awoodda nafta Insaanka

Insaanku wuxuu qaaday masuuliyad ay diideen cirka, dhulka iyo buuraha, jaahilnimadiisa awgeed. Ducfigaas jaahilnimo iyo rabitaankiisa inuu ogaado mustaqbalka, ayaa waxaa kadhasha labo fahan oo muhiim insaanka u ah; masuuliyad iyo xornimo. Rabbi markii uu insaanka udhiibay masuuliyadda dhulka, wuxuu siiyay rabitaan xor ah oo uu wax kala dooran karo iyo caqli uu ku kala xulan karo doorashooyinkaas. Markaa wuxuu awood u leeyahay inuu kala doorto dabeecaddaha wanaagsan iyo kuwa aanan wanaagsaneyn ee uu ka qaato afarta walax ee aan kor ku xusnay. Haddaba, awooddiisa ugu xoogga weyn waa awooda fekerkiisa, marwalba oo ay xoogeysato, waa marwalba oo uu sii noqdo insaan sareeya oo xagga wanaagga u janjeera.

Fekerka insaanka waxaa ugu muhiimsan oo uu ku dhismaa: a) Qiyaas-qaadasho. b) Jilid


> «Waxaa la oran karaa gundhigga fekerka insaanka waa qiyaas-qaadasho»
>
> MUKHTAR QORANSAY



ama raad-raacid. Qiyaas-qaadashada ayuu insaanku ku dhisi karaa sababaha iyo waxa sababaha keena iyo inuu dhacdooyinka rogrogo oo ciladeeyo. Qiyaas-qaadashada ayaana u suurta gelinaysa wax horay u dhacay inuu ku fahmo waxa taagan, kuna saadaalin karo waxa dhici doona. Waxaana la oran karaa gundhigga fakarka insaanka waa qiyaas-qaadasho. Ammaa raad-raaca walow uu yahay ku dayasho , hadana insaanku wuxuu soo rarayaa xirfaddii iyo dhaqamadii uu jiilba ka bartay midkii ka horeeyay.


Waxyaalaha kale ee goonida usii ah, uu kagana sareeyo makhluuqaadka kale, waxaa ka mid ah inuu hogaan la'aan wada noolaan karin. Maadama uu insaanku isku baahan yahay, waxaa lagama maarmaan noqonaysa wada-xaajood iyo wax-wada-qaybsi oo ay ka dhalan karaan muran iyo dagaal. Labadaan kore oo keenaya fowdo iyo kharibaad inay dhulka ka dhacaan. Sidaa darteed, ayaysan suurtagal u aheyn insaanka inuu noolaado hoggaan la'aantiis.

Arinka ugu danbeeya ee aan ku soo afjarneyno barashada insaanimadeena, waa inaan nahay jiraha keliya ee raad ahaan ka tagi kara khibraddiisa iyo dareenkiisa, una gudbin kara jiilal dib ka imaan kara sida dhacdooyinka, qoraalka iyo xirfadaha farsamada ee qofba usii gudbin karo qofka kale. Inaan insaan ahaan is-barano oo aan qaab baraarug leh dib ugu eegno, sidaan aan u samaysan nahay, awooddaha Alle nasiiyay, sababta aan kaga duwanahay makhluuqaadka kale iyo sababta masuuliyadda naloo saaray, waxay noo fududeyn inaan si xeeldheer isku fahanno. Markii qofka Insaanka ahi is-fahmo, waxaa u fududaanaysa fahmidda la noolaanshaha insaanka kale iyo siday u wada falgali lahaayeen oo aan qaybo kale kusoo qaadan doonno insha Allah.



## NUXURKA

- Insaanku dabci ahaan ayuu naftiisa u yahay madaxweyne.
- Afarta walaxood ee insaanku dabciga ka qaato, wax walbana ka asaasmaan waa:
  - Dhulka
  - Biyaha
  - Hawada
  - Dabka
- Mid walba oo afartaas ka mid ah wuxuu leeyahay dabci wanaagsan iyo mid aanan wanaagsaneyn oo insaanku xor u yahay, awoodna u leeyahay kala doorashadooda.
- Soocnaanta insaanka uu ka soocan yahay makhluuqaadka kale waxaan u kala qaadi karnaa daciifnimo iyo awood.
- Daciifnimada:
  - ✔ *Inuusan kalgiis waxba qabsan karin.*
  - ✔ *Inuu u janjeero iska sara marinta insaanka kale.*
  - ✔ *Insaanku aslan waa jaahil, cilmiga iyo khibradda wuu kasbadaa ee kuma dhasho.*
  - ✔ *Nafta insaanka kheyrka iyo sharta way aqbali kartaa.*
  - ✔ *Nafta insaanka waxay u janjeertaa raaxada hadii ay asaasiyaadka nolosha hesho.*
  - ✔ *Wax walba oo ay nafta* insaanka u aragto inay ka sii fiican yihiin, way ku dayataa.
- Awoodda:
  - ✔ *Masuuliyad iyo xornimo, la socoto kala doorasho.*
  - ✔ *Fakar ku dhisan qiyaas-qaadasho iyo matalid.*
  - ✔ *Hogaan inuu ubaahan yahay.*
  - ✔ *Inuu leeyahay shakhsiyad saraysa oo aan la khasbi karin.*
  - ✔ *Inuu insaanka kale la falgali karo.*
- Nuqulka soo socda, ayaan ku sii faahfaahin doonnaa insaanka-&-dabeecadda iyo insaanka-&-insaanka kale.


Masjidka Buluuga iyo sida Istanbul loo qurxiyay

### Khibrad kala qaadasho

# TURKIGA IYO HOGAANKA ERDOĞAN

Dadyawga Turkiga iyo Soomaaliya waxaa kadhexeeya taariikh qoto dheer, ilaa xilligii boqortooyadii Cismaaniyiinta. Marka xallinta caqabadaha casriga iyo horumarinta dalkooda ayaa u muuqata arrin ku dayasho iyo ka faa ' iideysi mudan, gaar ahaan marka la eego xaaladda adag ee aynu maanta marayno.

AY **CAWIL CABDIRAXMAN AXMED**

Qoraalkani waxaa uu si kooban usoo bandhigayaa taariikh-nololeedka, siyaasadda iyo hawl qabadka madaxweyne Recep Tayyip Erdoğan. Barashada hoggaamiyahan caanka ah ka sokow, waxay ujeeddada qoraalku tahay ka-faa'iideysiga aragtidiisa siyaasadeed iyo hiigsigiisa ku wajahan horumarinta dalkiisa.

Waxaynu ognahay in gaar ahaan dadyawga Turkiga iyo Soomaaliya ay ka dhexayso taariikh qoto dheer, ilaa xilligii boqortooyadii Cismaaniyiinta. Sidoo kale waxay labada shacab leeyihiin dhaqan isu dhaw oo ay keentay wadaagista diinta Islaamku. Laakiin dhinaca horumarka bulshooyinka, ilbaxnimada iyo halka ay dhacaan juqraafi ahaan, waxaa muuqata in labada dal iyo dadkoodu ay aad u kala duwan yihiin. Turkigu waxaa uu ka mid yahay dalalka ugu taariikh fog adduunka, markay noqoto dhinaca dawladnimada. Waxay saldhig u ahayd qaar ka mid ah imbaradooriyadihii ugu itaal weynaa uguna cimri dheeraa ee taariikhda aadamaha, sida Byzantine iyo Cismaaniyiinta.

Dhammaan dawladahaasi waxay dalka kaga tageen raadad taariikheed, dhaqan iyo aqoon ilbaxnimadu keentay oo waqti dheer la soo kala dhaxlayey. Gaar ahaan Boqortooyadii Cismaaniyiinta oo


Madaxweynaha Turkiga oo inta badan dadkiisa laabta ka salaama


Wadahadal dhexmaraya Erdogan & Obama shirkii G-20. Source: Wikipedia


2011 markii ay Erdogan iyo xaaskiina Emina ay soo booqdeen Somalia, sawirada raadka leh dunida uga tageen.

ay burburkeeda wax ka yar boqol sano (1922) kasoo wareegtay ayay Turkigu aad ugu faanaan. Jeneraal Kenan Evren oo hoggaaminayey afgembigii 1980 kaddibna madaxweyne ka noqday Turkiga (1980-1989) ayaa waxaa eedayn afgembiga ku saabsani kaga timid golihii markaas jirey ee Yurub. Mar uu ka hadlayey kulan dhexmaray asaga iyo wefdi reer Yurub ah, waxaa uu yiri:

Waxaa aad ii dhibay hab-dhaqanka saaxiibbadayo reer Yurub waana nafisay markii ay qolka ka baxeen. Waxaa aad iiga xanaajiyay qof ama laba ka socday dalalka aad u yaryar ee Yurub kuwaasoo waqtigii Cusmaaniyiinta u yaqaannay Turkiga "ninka jirran", inay hadda hadlayeen oo weliba cunaqabatayn na saareen. Miyuu tanoo kale istaahilaa qaranka haybadda weyn ee Turkigu, oo mar saddex qaaradood si caddaalad ah ku wada xukumi jirey?

Dhinaca kale, inkastoo xilligii burburkeeda ay boqortooyadii Cismaaniyiintu niyad-jab iyo dulli ku ahayd Turkiga iyo guud ahaan muslimiintaba, haddana Muslimiinta Turkigu, gaar ahaan waa ay ku faanaan taariikhdii boqortooyada waxaana ay jecelyihiin in ay dib usoo nooleeyaan kaalintii Muslimiintu ku lahaayeen caalamka. Haddaba maxaynu ka baran karnaa dalkaas, dadkiisa iyo hoggaamiyayaashooda?

Waa tan koowaade aqoonta iyo horumarka ummadi marna ma noqoto mid meel qura ama ummad kaliya ku kooban. Waxay ku xiran tahay rabitaanka iyo dadaalka cidda danaynaysa in ay waxbarato ama ay horumarto. Tan labaadna: waxaa jira caqabado isku mid ah oo ka dhexeeya dalkeenna iyo dalalka Muslimiinta ah ee Turkigu ka mid yahay. Caqabadahaas waxaa sal u ah cadaadiska reer-galbeedka ee ku salaysan in dawladaha dalalka Muslimiintu ay qaataan nidaamka calmaaniga ah haddii ay doonayaan in ay ahaadaan dawlado horumarsan oo xoog iyo ilbaxnimo sare leh. Nidaamkan calmaaniyaddu waxaa loogu dhaqmaa siyaabo kala duwan dalalka isku maamula, waxaase sal u ah aragtida qabta in bulshooyinka casriga ahi aanay samayn karin horumar dhinaca dhaqaalaha ah haddii aanay ka tagin ku dhaqanka diimaha. Sidaas darteed waa in diinta laga saaro saaxada siyaasadda amase kaalinteeda hoos loo dhigo. Madaxweyne Erdoğan waxaa uu kasoo dhex baxay ummad uu cadaadiskaas calmaaniyaddu aad ugu xoog badan yahay. Waxaase asaga iyo taageerayaashiisu ay tuseen in aanay Muslinnimada ummaddu caqabad ku noqon karin hiigsiga iyo horumarka ummadda. Waddada ay hoggaamiyayaasha siyaasadda ee Turkigu u mareen xallinta caqabadaha casriga iyo horumarinta dalkooda ayaa u muuqata arrin ku dayasho iyo ka faa´iideysi mudan, gaar ahaan marka la eego xaaladda adag ee aynu maanta marayno.

## Waa kuma Recep Tayyip Erdoğan?

Recep Tayyip Erdoğan waxaa uu sannadkii 1954 ku dhashay degmada Kasimpasa, Istanbul, Turkiga. Yaraantiisii waxaa uu ku soo qaatay magaalada Rize, waqooyi-bari, Turkiga. Halkaas waxaa uu aabbihiis ka tirsanaa ciidanka ilaalada xeebaha. Reerkiisu waxaa ay ahaayeen qoys dan yar ah. Waxay ahaayeen reer ku dheggen diintooda islaamka. Asagoo 13 sano jira ayay usoo guureen Istanbul. Waxaa uu halkaas ka galay iskuul sare (Imam Hatip Lisesi) oo diinta lagu barto. Kaddib waxaa uu ka bartay cilmiga dhaqaalaha jaamacadda Marmara University oo uu shahaado «Business Administration» ku qaatay. Ardaynimadiisii waxaa uu Erdoğan aad ugu firfircoonaa arrimaha siyaasadda iyo sport-ga isagoo mar ahaa ciyaartooy kubbadda cagta ah.

Muddadii waxbarashada jaamacadda waxaa uu la kulmay Necmettin Erbakan (oo noqday raysalwasaarihii ugu horreeyey Turkiga ee kasoo jeeday xisbi islaami ah) waxaana uu markaas laga bilaabo ka mid noqday dhaqdhaqaaqa turkiga ee islaamiga ah. Erdoğan waxaa uu leeyahay xaas iyo 4 ilmood. Inkastoo xaaskiisu, Emine Erdoğan, aanay dhinaca siyaasadda ahayn qof firfircoon, haddana waxay ku caan baxday inay noqotay marwadii ugu horraysay ee ku labbisan xijaab ayadoo ah xaaska hoggaamiye dal ku dhaqma nidaamka calmaaniga!

## Waxqabadka iyo caqabadaha

Hawshiisa siyaasaddu waxay ku bilaabatay markii loo magacaabay madaxa laanta dhallinyarada ee degmada Beyoğlu, Istanbul asagoo ka tirsanaa Xisbigii Bedbaadada Qaranka (MSP), xisbigaas oo islaami ahaa waxaa la mamnuucay kaddib afgembigii millateriga ee 1980. Waqtiyadaas waxaa kale oo uu xisaabiye iyo maamule u noqday shirkado khaas ah. Kaddib markii 1983 la asaasay Xisbigii Samafalka (RP) ayaa 1984 loo magacaabay guddoomiyaha xisbiga ee degmada Beyoğlu, Istanbul. 1985-na waxaa xisbisgiisu u doortay jagada guddoomiyaha xisbiga ee gobolka Istanbul.

Doorashadii 1994 ayaa Erdoğan ku guulaystay duqa magaalada Istanbul. Jagadaas oo fursad u siisay in uu soo bandhigo karti iyo hawlkarnimo dheeraad ah ayaa waxqabadkiisa aad loo jeclaystay. Laakiin waxaa mar kale waxqabadkiisa dhinaca siyaasadda hakiyey millateriga iyo taageerayaashooda calmaaniyiinta. Taasaa keentay in Xisbigii Samafalka ee uu ka tirsanaa la mamnuucay 1997, xilkii duqa Istanbul-na laga xayuubiyey 1998. Ayadoo lagu eedeeyey in uu (12.12.1997, magaalada Siirt) fagaare ka akhriyey gabay-taariikheed islaami ah oo dhiirri gelin bulsho ah ayadoo markaas lagu xukumay 10 bilood, waxaase lasoo daayey markii uu afar bilood xirnaa. Waqtigaas laga bilaabo waxaa uu




Erdogan oo uga kacay fadhiga Shimon Peres shirkii World Economic Forum, markii wakhtigiisa lasiin waayay. Source: Wikipedia

Erdoğan noqday nin dalka oo dhan laga yaqaan, sumcad wanaagsanna kasbaday. Waxqabadkiisa dhinaca horumarinta iyo bilicda (sida nadaafadda iyo dhiraynta) Istanbuul waxaa u dheeraa in uu ku caan baxay in aanu musuqmaasuq oggolayn. Tani waa arrin muhiim ahayd oo uu kaga duwanaa madaxdii kale ee kaga horreysay maamulka magaalada. Sidaas waxaa qirsan xataa dadkii asaga iyo xisbigiisaba kasoo horjeeday.

Halganka siyaasadda ee Erdoğan waa uu dheer yahay welina waa uu socdaa oo halkan kuma soo wada koobi karno. Waxaase xusid mudan in uu Erdoğan yahay raysalwasaarihii Turkiga ee ugu muddo dheeraa, asagoo jagadaas hayay 11 sano (2003-2014). Waxaa uu xisbigiisa Caddaaladda iyo Horumarka (AKP) u horseeday in ay ku guuleysteen 3 doorasho oo guud. Waxaa kale oo uu noqday madaxweynihii ugu horreeyey ee si toos ah loo soo doortay, jagadaas oo uu sannadkan 2014 qabtay. Waa nin deggan oo codkar ah. Waxaa uu Alle hibo u siiyey xikmad ballaaran. Suugaanta ayuu aad ugu fiican yahay. Doodaha taagan iyo weerarrada badan ee kaga yimaada mucaaradka waxaa uu uga jawaabaa si hufan oo deggen. Caqabadaha jira waa uu ka hadlaa sida ay la tahay in loo xalliyana waa uu raaciyaa. In xisbigiisu uu ka qorshe iyo waxqabad sarreeyo mucaaradka ayuu dadka si toos ah iyo af ay garan karaan ugu sheegaa. Waxaa uu isticmaalaa warbaahinta casriga ah waxaase la moodaa in uu kasii jecel yahay kulammada fagaarayaasha waaweyn oo uu markiiba ku qaabbilo tobannaan ama boqollaal kun oo qof oo taageerayaashiisa badan ka mid ah.

Waxaa loo qirsan yahay in uu la yimid deggenaan dhinaca siyaasadda ah iyo horumar weyn oo dhinaca dhaqaalaha ah. Dalka Turkigu waxaa uu intii uu raysalwasaaraha ahaa isu beddelay awood wax-soosaar iyo wax-dhoofin oo farta lagu fiiqo. Shakhsiyadda madaxweyne Erdoğan ka sokow waxaa jira sababo kale oo ka qayb qaatay guulaha dawladda maanta ee Turkiga:

1. Kalsoonida dadka oo sii xoogeysatay markii ay arkeen in xisbigu fuliyey ballammadii uu horay u qaaday
2. Musuqmaasuqii oo aad hoos ugu dhacay
3. Deggenaanta siyaasadda iyo qorshaynta dhaqaalaha ee muddada dheer oo soo jiidatay maalgelin gudaha iyo dibeddaba ah
4. In kastoo Erdoğan uu beeniyey in uu wato barnaamij qarsoon oo «islaamayn» ah oo weliba uu sheegay in uu nidaamka calmaaniga ku socdo, haddana waxaa jira dad badan oo xisbigiisa iyo asagaba ku doorta in ay yihiin «islaamiyiin»
5. Siyaasadda arrimaha dibeddu waxay tooshka ku ifisay danaha taariikhiga ah ee Turkiga. Siyaasad ku salaysan madaxbannaanida Turkiga ayaa saamayn wanaagsan ku yeelatay isku kalsoonida iyo sumcadda dawladda iyo shacabka Turkiga

Dhinaca kale waxaa jira cadaadis iyo cambaareyn weyn oo dibed iyo gudaba ah, taasoo kasoo horjeeda qaabka ay Erdoğan iyo xisbigiisu dalka u maamulayaan. Go'aannada muhiimka ah ee ay dawladdu ka qaadatay xaaladaha ad-adag ee ka taagan Falastiin, Suuriya iyo Soomaaliya ma aha mid siyaasiyiinta mucaaradku ku qanceen. Dawladdu waxay dhaleecaynta mucaaradka iyo qaar ka mid ah dawladaha reer Galbeedka kaga jawaabtay in ay dib u qeexday siyaasadda dawladda ee arrimaha dibedda. Waxay tuseen in Turkigu yahay dawlad weyn oo danaheedu ka qoto dheer yihiin dhacdooyinkii qarnigii 20-aad. Sidaannu kor ku xusnay dadka Turkigu way ogyihiin taariikhdooda laakiin waxa cusubi waa in hadda dawladduna ay istiraatijiyad siyaasadeed ahaan ku tustay in taariikhda ummaddu ay qayb ka tahay jiritaankeeda. Geesinnimada iyo mabda'a adag ee hagaya Erdoğan iyo taageerayaashiisa waxaa tusaale lama illaawaan ah u noqday, gaar ahaan soomaalida dhexdeeda, safarkiisii Soomaaliya.

Haddaynu soo koobno caqabadaha madaxweyne Erdoğan iyo hoggaamintiisa:


1. Taageerayaasha calmaaniyadda oo ka shakisan in Erdoğan baabi'in doono isbeddelladii uu sameeyey Mustafa Kemal Atatürk oo ahaa madaxweynaha Turkiga (1923-1938), ahaana madaxweynihii kowaad ee jamhuuriyadda Turkiga (Atatürk waa magac la siiyey 1935 oo la micna ah aabbihii turkida). Shakigaani wuxuu keenay in ay ku adag tahay in madaxweyne Erdoğan iyo xisbigiisu ay fuliyaan isbeddellada loo baahan yahay ee saameeya xeerarka waxbarashada, caddaaladda iwm
2. Millateriga Turkiga oo aan looga baran in ay siyaasadda faraha ka laabtaan, gaar ahaan haddii deggenaan la'aani timaaddo.
3. Taageerayaasha wadaadka Fethullah Gulen oo aad ugu farabadan maxaakiimta, qareennada iyo xeer-ilaalinta, kana soo horjeeda Erdoğan.

Waxay u badan tahay in Erdoğan uu ka dabaalan doono caqabadahaas iyo kuwo kale oo dib ka iman karaba haddii uu sii wado habkii uu markii horaba ku kasbaday kalsoonida shacabkiisa oo ku salaysan xiriir toos ah iyo daacadnimo. Haddaba ma leennahay hoggaamiyeyaal wax ka baran kara Erdoğan oo dadkooda intay toos ula xiriiraan daacadnimo inta awooddooda ah wax u hagi kara, mase leennahay shacab wax ku dooran kara waxqabadka, hufnaanta iyo daacadnimada, sida shacabka Turkiga?



# NUXURKA

- Rajab Dayib Erdoğan waxaa uu sannadkii 1954 ku dhashay degmada Kasimpasa.
- Aabbihiis ka tirsanaa ciidanka ilaalada xeebaha. Reerkiisu waxaa ay ahaayeen qoys dan yar ah.
- Reerkiisu waxay ahaayeen reer diineed, markii ay Istanbul usoo guureen waxaa lagu daray Imam Xaatib Lisesi oo diinta lagu barto. Si dakhli fiican u helaan, jidadka Istanbul ayuu ku iibin jiray liin-dhanaan iyo sisin.
- Kadibna wuxuu jaamacad uga baxay cilmiga-dhaqaalaha.
- Xaaskiisa Emine waxay noqotay marwadii ugu horraysay ee ku labbisan xijaab ayadoo ah xaaska hoggaamiye dal ku dhaqma nidaamka calmaaniga.
- Isku dhaciisa military bilowday 1980, isagoo u shaqeeya dowladda waaxda gaadiidka. Markii uu boss-kiisa oo militariga katirsan kuyiri iska xiir shaarabada, kana diiday, shaqadana uga tagey.
- Muddadii waxbarashada jaamacadda waxaa uu la kulmay Najmudiin Arbakaan (Necmettin Erbakan).
- Markii ugu horaysay hawshiisa siyaasadeed aheyd markii loo magacaabay madaxa laanta dhallinyarada ee degmada Beyoğlu.
- 1994 waxaa loo doortay duqa magaalada Istanbul oo waxqabad ka muujiyay.
- 1997 loo xiray gabey Islaami oo uu ka jeediyay meel fagaare ah magaalada Siirta.
- Xilka raysalwasaarnimada hayay 11 sano, xisbiigisana 3 doorasho ku guulaystay.
- Labada caqabadood eeuu oso maray xisbiga AKP ee Turkiya maamula waa militariyga iyo nidaamka calmaaniga ah, wuxuuna caqabadaas kaga gudbay qodobadaan soo socda:
  - Musuqmaasuqii ayuu la dagaalamay.
  - Waxaa xoogaystay kalsoonida ay dadku ku qabaan dowladooda.
  - Xasiloonida siyaasadeed ee kadhalay, ayaa soo jiidatay maalgashadayaal badan.
  - Dhaqaalihii ayaa kobcay, qof walbana noloshiisa ayaa meel ku hagaagtay.
- Fethullah Gulan wuxuu ku dhashay magaalada Erzurum Turkiga sanadkii 1941.
- Laga soo bilaabo 1999 magan-galyo siyaasadeed ugu nool duleedka Pennsylvania USA, isagoo markaa kasoo cararay militariga iyo Calmaaniyiinta.
- Dadka raacsan Gulan u badan yihiin booliska iyo maxkamadaha.
- Erdogan wuxuu ku eedeeyay Gulan iyo kuwa raacsaan "dowlad kudhex jirta dowlad".
- Erdogan iyo Gulan 10 sano kahor, waxay ka mideysnaayeen inay kasaaraan militeriga iyo calmaaniyiinta saaxadda siyaasadda Turkiga. Erdogan arinkaan awgiis loo xiray 1997, meesha Gulan maqnaan lagu xukumay sanadkii 2000.
- Gulan katirsan yahay urur suufiyo ah oo ku abtirsada nin layiraahdo Said Nursi, oo geeriyooday 1960.
- Xubnaha ururka Gulan, maaha kuwo la diiwan geliyo, balse imaamkooda Gulan ayay qirayaan inay raacayaan. Waxaana afkooda loogu yeeraa "Hizmet" oo ah adeeg.
- Gulan dadka raacsan, waxay u janjeeraan in Galbeedka lala falgalo, diimaha la isku daro, wadanimada Turkigana la xoojiyo, waxaa la sheegaa 3-6 milyan oo xer raacsan ah, inuu leeyahay.
- Waxayna leeyihiin iskuulo isku xiran ilaa 136 wadan. Joornaakooda ugu weyn waa Zaman.
- Gulan wuu kasoo horjeeday, wuuna cambaareeyay 6-dii markab ee gargaarka loogu diray Qaza, loona yaqaan (Gaza flotilla). Iyadoo caalamku wada arkayay 31 May 2010 ciidanka Israel inay soo weerareen kuna dileen dad badan oo aan hub haysan. Arinkaan oo Turkida badankood ka xanaajiyay.
- Soli Ozel oo cilmi baare ka ah jaamacadda Kadir Has University wuxuu xusaa inay Erdogan iyo Gulan asal ahaan isku mad-hab aheyn, mar walbana xasaasiyad ka dhaxaysay, laakin cadow ka dhaxeeyay uun jiray.
- Khilaafkuna wuxuu kor u kacay dowladdu markii ay mamnuucday gunno dheeraada iskuulada qaata oo ay u badnaayeen kuwa Gulan oo dakhligooda iyo jiilasha ay soo saaraan halkaa ku tarbiyadeyn jiray.
- Mudaharaadkii Gazi Park waxaa la xusaa inay ka danbeeyaan koox loo yaqaan "Ergenekon Network" oo salka ku hayay calmaaniyiinta, layiri ujeedkoodu ahaa in ay xasilooni darradu qiil u noqoto af-ganbi militari sida Masar oo kale. Qorshahaasi ma hirgelin.
- Erdogan mar uu la hadlaya dhalinyarada Turkiga wuxuu ku yuri ha eegina keliya sanadka 2023, balse eega mustaqbalka sanadka 2071. Waa taariikh tilmaamaysa inay 1000 sano kasoo wareegtay dagaalkii "Battle of Manzikert" iyo Seljuk Turks.



Sh. Maxamed Idriis oo Canada kusoo bandhigay buugiisa Socdalka Geerida.

**Xoola badan wexey ka jeceshahay hadal macaan, wax sheeg badan wexey ka jeceshahay taabasho naxariis leh.**

# WAA KUMA SH. MAXAMED IDRIIS AXMED?

Taariikhda Sh. Maxamed Idriis, dacwada uga socota Maraykanka, iyo aqoontiisa cilmiga bulshada oo uu noogu bidhaaminayo siyaasadda Soomaalida iyo kala duwanaanshaha dumarka iyo ragga.

AV **CABDIRASHID XASAN CILMI**

Sheekh Maxamed Idris qof Soomaali ah oo aan aqoon aad ayuu u yaryahay. Waa caalim kamid ah culimada Soomaliyeed ee waqtigan nool kuwooda ugu caansan. Sh. Maxamed Idris wuxuu ka mid yahay assaasayashi Golaha Imaamyada ee Waqooyiga Ameerika. Wuxuu sidoo kale hayaa mas'uuliyado kala duwan. Waxaan cadadka majjaladan kusoo qaadanaynaa waraysi aan Sh. Maxamed kula yeelanay safar uu Oslo kusoo gaaray dhamaadkii 2014. Anagoo waydiinay su'aalo ku saabsan taariikh-nololeedkiisa, siyaasadda Soomaalida, diinta iyo arimaha bulshada.

**S** *Sh. Maxamed Idriis halkee ku dhalatay, goorma ayaadse dhalatay?*

**J** Waxaan ku Dhashay Baadiyaha degmada Qandala ee Gobolka Bari, Soomaaliya. Xilliguna qiyaasta waa 1957 waayo waqtigaas diiwaan gelintu ma badnayn, meeshuna cisbitaal ma ahayn.

**S** *Maxaad caruurnimadaadi ka xusuusataa oo aadan wali hilmaamin? Sideese u tilmaami kartaa waqtigii caruurnimadaada?*

**J** Waxaan xusuustaa inaan miyi iyo magaalaba ku koray. Nolosha baadiyahana aan faa'iidooyin badan ka helay xilliyada aanu geediga dheer galno, ama aan dhaanka raaco, amase xoolaha wax ka ilaaliyo.

**S** *Wax yar ma nooga sheegi kartaa hooyo, aabe, yaraantaadi & koriinkaagi?*

**J** Hooyo Allaha u naxariistee iyada ayaan u badnaa yaraantii, caruurteedana ugu yaraa, wexeyna igu beertay daryeel iyo kalgacal. Aabe Allaha u naxariistee wuu safar badnaa, wuxuuna ahaa dadka cibaadada badan.

**S** *Hooyo & Aabe wiil sidee ayay kuu tilmaami lahaayeen yaraantaadi?*

**J** Waxaan filayaa iney igu tilmaami lahaayeen inaan ahay wiil deggan oo baarri ah, waayo ogaantay sidaas ayaan u ekaa.

**S** *Halkee kusoo qaadatay waxbarashadaadi*

*hoose dhexe?*

**J** Dugsiga hoose waxaan kusoo qaatay Qandala oo dalku berigaas dawlad ayuu lahaa, waxbarashada gaarsiisa degmooyinka fog fog. Dugsiga dhexena waxaan usoo aadey Muqdisho.

**S** *Maadadee kuugu xiiso badneyd maadooyinka iskuulka?*

**J** Waxaan jeclaan jirey Taariikhda iyo Qisooyinka.

**S** *Markii aad noqotay kuray dhawr & toban jir ah, wax han ah oo inaad wax kamiro dhaliso ma laheyd? Sidee ama yaase hankaas kugu abuuray?*

**J** Markaan soo hana qaaday waxaan la soo kulmay masuuliyad qoyska oo taalla, waxaanan ku hanweynaa inaan masuuliyaddaas qaado. Waxaana igu abuuray waalidka oo yaraantiiba i baray inaan masuuliyada qaado.

**S** *Waxbarashada sare ilaa heer jaamcadeed, halkee ku qaadatay?*

**J** Waxbarashada jaamacaddu way dib dhacday waxaanan ku horreeyey dhanka xalaqaadka cilmiga iyo xifdinta Qur'aanka Kariimka, oo aan ku qaatay dalka Sucuudiga. Kadibna shahaadada Bachelor iyo Master dhanka Islaamka ayaan ku qaatay Jaamacad Islaamiya dalka Maraykanka.

**S** *Goorma ayaad Soomaaliya kasoo tagtay? Maxayse aheyd sababtu?*

**J** Waxaan dalka kasoo tegey Bilawgii 1975 markii aan ololihii farbarka reer miyiga kasoo noqday ee culimadii 10 ahaa la diley. Sababtuna wexey ahayd inaan raadinayey nolosha inaan wax ka bedelo.

**S** *Hadii maanta Ilaahay waqtiga dib kuugu celin lahaa, duruuf walba oo jirta Soomaaliya maka imaan laheyd? Waayo?*

**J** Mar walba waxaan filayaa inaan soo dhoofi lahaa waayo waqtigaasba dalku wuu degganaa laakiin aniga han inaan wax kororsado ayaa igu jirey.

**S** *Dadka ku yaqaan waxay tilmaamaan inaad tahay nin aad u shaqo badan, jadwalkiisana ku jirin kalmadda "waxba-ha-qaban". Goorma ayaad bilowday shaqadii kuugu horaysay noloshaada? Maxayse kala ahaayeen shaqooyinka aad ka shaqaysay dhalinyaranimaadi?*

**J** Waa Su'aal wanaagsan. Shaqada waxaan bilaabay anoo 16 jir ah magaalada Cadan ee dalka Yeman. Waxaanan ku bilaabay xisaabhaye inaan u noqdo niman ganacsato ah, iyo wakiil dadka alaabta u dhoofiya, tigidhada u jara. Kadibna 1977 waxaan imi dalka



Sh. Maxamed Idriis oo goob ka jeedinaya muxaadaro.

Sucuudiga waxaan shaqooyin ka bilaabay xafiisyo shirkado kala duwan, xoghayn, xafiiska shaqaalaha, maamulka, turjumaadda, ilaa heer Agaasime. Anoo taa ku jirana waxaan xaadiri jirey xalaqaadka cilmiga. Isla markaana waxaan bilaabay 1981 ka shaqaynta saxaafadda iyo wax qoridda.

> " Markaan soo hana qaaday waxaan la soo kulmay masuuliyad qoyska oo taalla, waxaanan ku han-weynaa inaan masuuliyaddaas qaado."
>
> SH. MAXAMED IDRIIS.

**S** *Maxaad xiisaysaa ama waqtigaaga inta badan qaata?*

**J** Wax akhrin iyo wax qorid, mana jecli daqiiqad iney shaqa la'aan noqoto.

**S** *Waaxaha cilmiga diinta & maadiga, dhankee baad ugu fara dhuudhuuban tahay?*

**J** Labadaba waqti hore ayaan bilaabay, waxaanse u badnaa dhanka cilmiga Sharciga ah, oo culimadii Islaamka casrigan ugu waaweynayd, Ilaahay nasiib ii siiyey inaan hor fariisto oo cilmi iyo edeb ka faa'iidaysto.

**S** *Yaa kugu dhiira geliyay inaad cilmiga ka gaadho heerkaan?*

**J** Waa tawfiiqda Ilaahay. Waxaase igu dhiirri geliyey culimada aan wax ka bartay kuwa dhintay ee aan akhriyey iyo kuwa noolaa, kuwaasoo i taabsiiyey sharafta cilmigu leeyahay.

**S** *Waxaa la xusaa inaad muddo dheer qurbaha joogtay, wadamo badana martay, goorma ayaa kuugu horaysay qurbaha, mase jirtaa qaarad aadan wali cagta dhigin?*

**J** Qurbaha Waxaa iigu horreysey 1972, markaan booqasho ku imi Cadan. Kadibna 1975 kusoo noqday, Maraykanka iyo Yurubna waxaa iigu horraysey 1985. Intii waagaa ka dambaysey ilaa maantana qurbaha waan ku jirey dhul badanna dacwa ayaan u maray. Waxaanan weli ii suurta gelin Australia iyadana hadaan jeclahay markaan jawaabihiina dhameeyo insha Allaah.

**S** *Maxay ahaayeen waxa kuugu yaabka badnaa ee aad qurbaha ku aragtay?*

**J** Qoys si fudud ku dumaya, iyo qof muslima oo doorsoomaya, oo markaad aragto aadan garanayn.

**S** *Bulshada Soomaaliyeed ee qurbaha ku dhaqan waxay xusaan inaad u qabatay waxyaalo badan, sida masaajido ka asaasida magaalooyin iyo tuulooyin aanan horay u laheyn, wax manooga sheegi kartaa waxyaalaha aad bulshada Soomaaliyeed usoo qabatay ama hadda hayso?*

**J** Wixii aan qabtay waa tawfiiq Ilaahay, ee tabar aan leeyahay maaha. Anigana maaha kan sheegayaa ee waxaa sheegi doona dadka iyo taariikhda.

**S** *Waxaad sidoo kale tahay qoraa, maxaa kamida mawduucyada aad wax ka qortay iyo buugaagta aad soo saartay?*

**J** Waxa aan qoray ilaa 1981 aad ayey u badan yihiin, inta la daabacayna waa qayb yar, kutubta la daabacay wexey isugu jiraan Carabi iyo Soomaali. Waxaana ka mid ah:

Miraha Kharaar, Dagaaladii Soomaaliya (Carabi), Sh. Bin Baz Taariikh nololeed kooban (Carabi), Innaga iyo Xabashi (Soomaali), Taariikhdu Waa Markhaati (Soomaali), Socdaalka Geerida (Soomaali), Cajaa'ibta Sadaqada (Carabi), iyo kuwa kale. Waxaana jiraa kumanyaal maqaalo gaagaaban iyo dhaadheer isugu jira, iyo Kutub aan weli la daabicin.

**S** *Maalmahan wasaaradda arimaha gudaha ee Maraykanka dacwo ayay kuu haysteen welina kugu socota, maxay tahay dacwadaan?*
**J** Dacwadaan waxaa asalkeeda ay ka soo jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha. Wexeyna dawladdu weydiisaneysaa maxkamadda in loo xukumo iney jinsiyadda Maraykanka igala noqdaan, wixii kale oo talaaba ah oo ay qaadayaanna loo ogolaado. Markii la guda galay ee waxyaabaha dawladdu ku andacootey qareenadu ka jawaabeen, waxaa soo baxday waraaqa dhawra oo muhiima iney fayl-kayga ka maqan yihiin, dacwaduna caga-adag ku taagnayn, wexeyna hortaal hadda maxkamadda. Waxaan rajaynayaa iney sida noo khayr ah ku dhamaato Allah idankiis.

**S** *Siyaasadda Soomaalida waxaad ka jeedisay muxaadarooyin iyo qoraalo kala duwan, xagga Sharciga, xagga hogaanka, xagga kheyraadka iyo arimaha bulshadaba. Hadii lagu oran lahaa 3-kalmadood ku tilmaam mushkiladda siyaasadeed ee Soomaalida, maxaad ku soo koobi laheyd?*
**J** Waxaan oran lahaa mushkiladdu waa iimaan yari, aqoon darro, iyo agaasin xumo. Xalkeeduna waa tawbad, tala wadaag, iyo taliye suuban.

**S** *Waqtigaan Soomaalida dhexdooda qof ama qolo walba waa eedaysane, cid doonaysa ama karti uleh inay eed qaadana majirto. Dadka ahlu-diinka ah ee aad kamid tahay, eedo badan ayaa dusha looga rogaa, maxaad u aragtaa inay si kale u hagaajin kareen xaaladda dadkooda?*
**J** Qofkii shaqeeya ayaa qaldama, dadka ahlu-diinkana dhaliil kasta oo ay leeyihiin, waa wadnaha ummadda iyo dhiiga ay ku dhaqaaqeyso.
**S** *Qurbaha waxaa ka jira wanaag fara badan, mu'tamaraad socday 24 sano oo sii batay, duruus iyo wacdi badan. Hadana bulshada Soomaaliyeed wali cuduradii haystay kama dawoobin. Noocyada muxaadarooyinkii la qabtay 20 sano kahor, wali way socdaan, isbedel weyn oo bulshadeedna ma dhicin! Ma dadka Soomaaliyeed ayaanan fahmin darsiyadaas mise qaabka loogu dhigay ayaan aheyn mid xeeldheer? Culimada qaar ayaa yiraahda waaqica dhabta ah ayaan la fahmin, lana abaarin, mala qabtaa?*
**J** Waan la qabaa, lamana qabo. Haddaan fasirana wax badan oo aad u badan ayaa la qabtay. Mu'tamaraadka jaaliyadaha qurbaha kulayle iyo qaboobe isbedel ayey bulshada Soomaaliyeed ku samayeen. Waxaana nagaga filan iney abuureen wacyi Islaama oo ballaaran oo bulshada miyi iyo magaalo saamayn weyn ku yeeshay. Waxey is bareen ummadda iyo culimadeeda, waxey bulshada aragtideeda ka dhigeen arrin daruuri ah, in diinta la isku xukumo, waxaa bulshada Soomaaliyeed agteeda ceeb ka noqday qofka aan diinta ku dhaqmin. Is bedelkaas weyna waxaa abuuray dacwadaas Ilaahay fadligiis. Laakiin dhanka kale, waxaa jira dhaliilo iyo gaabis badan oo ku aadan horumarinta shirarkaas, qaababka loo maamulo, dhibaatooyinta lagu falanqeeyo, kaalinta dhalinyarta la siiyo iyo arrimo kaloo badan oo aan rajaynayo in la hormarin doono Ilaahay idankiis.

> "Waxaan jeclahay wax akhrin iyo wax qorid, mana jecli daqiiqad iney shaqa la'aan noqoto"
>
> SH. MAXAMED IDRIIS.



Sh. Maxamed Idriis oo Istanbuul shir Soomaaliyeed kalmad kajeedinaya

> "Xoola badan wexey ka jeceshahay hadal macaan, wax sheeg badan wexey ka jeceshahay taabasha naxariis leh"
>
> SH. MAXAMED IDRIIS.

**S** *Maadaama takhasuskaagu yahay culuumta dhanka arimaha bulshada iyo hogaaminta, mawduuca aan doonayno inaan wax kaa weydiino waa cilmiga bulshada. Inta aanan gudo gelin qayb kamid ah, si kooban manoogu sharixi kartaa mafaahiimtan (concepts) ah Umad (ummah), diin (Millah) qolo (qowm) iyo qoys?.*
**J** Ummadi wey guda ballaaran tahay wexeyna tilmaantaa qarni ama dad waqti iyo wadanba ku kulmay. Diintu waa dariiqa ama caqiidada laga aamino Rabbiga dadka abuuray iyo kawnka iyo nolosha macneheeda. Qawm waa dad isku hayb, luuqad iyo deegaan ah. Qoyskuna waa unugta ugu horeysa ee qawmka iyo Ummadda.

**S** *Qoysku wuxuu asaas u yahay bulshada, wuxuuna ka bilowdaa nin iyo haweenay hishiis dhexmaray. Anagoo halkaa ka soo bilaabayna oo doonayna inaan cilmi ahaan ka eegno, maxay ku kala duwan yihiin ragga iyo dumarku?*
**J** Qoysku waa asaaska bulshada. Ummadduna waa qoysas isu tegey. Ragga iyo dumarku waa tiirarka qoysku ku qotomo. Mid walbaa kaalin ayuu leeyahay. Waa dawlad yar oo madax leh, oo shacab leh, oo miisaaniyad leh, oo qorshe leh. Hawlaha ay qabtaan wey kala duwan yihiin, abuurkooduna sidaa darteed wuu kala duwan yahay. Waana xikmadda Eebe ugu tala galay oo mid walba waxaa lagu abuuray maadada hawlaha uu qabanayo.

**S** *Xadiiska Nabiga scw ee sheegaya dumarka in laga abuuray feer-qaloocan, tafsiir iyo fakar noocee ah ayaan ka qaadan karnaa? Mase laga fahmi karaa xadiisku inuu tilmaamayo kala duwanaanshaha psychology ahaan dumarka iyo ragga?*
**J** Waa sax, sida waxyiguba innoo sheegay ragga iyo dumarku wey kala duwan yihiin. Xadiiska Nebigu (csw) tilmaantaas uu bixiyey ee dumarkana waa mid jirta oo muuqata, ceebna ma aha, waxaanba is



Sh. Maxamed Idriis wadanka Turkiga hortaagan Masjidka Buluugga.

leeyahay qalloocaasu waaba midka nolosha basbaaska iyo xawaashka u ah.

**S** *Qoraa Ameerikan ah (John Gray) wuxuu qoray 90-maadkii buug uu ugu magac daray "Men are from Mars, Women Are from Venus", buugaan oo CNN xustay in laga iibsaday 50 malyan iyo ka badan. Buugaan wuxuu xusaa mushkiladda asaaska ragga iyo dumarka waa natiijo ka timid kala duwanaanshahooda cilmu-nafsi ahaan u abuuran yihiin (psychological differences). Wuxuu tusaale ahaan ku doodayaa, haddii ninku soo bandhigo xal ku aadan mushkilad ay haweenaydu xustay, haweenaydu xiisayn mayso xalka mushkiladaas, balse doorbidaysaa in mushkiladda laga sheekeeyo. Ma jirtaa wax ay cilmi-baaristiisaas dheer ee ninkaan John uu ka waafiqi karo xadiiska kala duwanaanshaha abuurka Alle ee dumarka iyo ragga?*

**J** Waa sax, buugaas waan akhriyey marar kala duwan, wax badan oo xaqiiqa ah oo waafaqsan kala duwanaanshaha waxyigu noo tilmaamay ayuu qoraagu xusay. Waxaana ka mid ah bilawga sheekada uu ka bilaabay ee halka uu danaynayey inuu shaqo usoo qabto reerkiisa ay ka door bideysey inuu si caadifad leh ula hadlo. Taasoo tilmaameysa dhanka caadifadda iney dumarka uga muhiimsan tahay dhanka maaddiga. Xoola badan wexey ka jeceshahay hadal macaan, wax sheeg badan wexey ka jeceshahay taabasha naxariis leh.

**S** *Maxaad kula talin laheyd xagga is-fahanka guud ahaan dumarka iyo ragga, si'ay u gundhigaan qoys wanaagsan oo soo saara bulsho wanaagsan?*

**J** Isfahamku waa lagama maarmaan. Waxaana filayaa muhiimadda Islaamku siiyey iney ka muuqato sida Qur'aanka iyo Sunnada ay ugu badan tahay arrimaha qoyska, jacaylka, is fahanka, xiriirka labada is qaba, heerarka xiriirka, qaabka xallinta khilaafaadka, qofka taa dersana inuu kan kale si wanaagsan u fahmi doono. Wexeyna gundhig u tahay qoys deggan oo mira fiican bixiya. Waxaan is leeyahay dhibaatooyin badan oo qoysaska, waxaa sabab u ah garasha la'aanta hab dhaqanka guriga iyo labada is qaba oo dad badani ka arradan yihiin.

> "Mushkiladda Soomaaliya waa iimaan yari, aqoon darro, iyo agaasin xumo. Xalkeeduna waa tawbad, tala wadaag, iyo taliye suuban"
>
> SH. MAXAMED IDRIIS.

**S** *Waxay dad badan qirsan yihiin inaad tahay shakhsi aad u saameyn badan. Dhinacee is leedahay waad ka saameyn kartaa bulshada Soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan, cimrigaaga inta kuu harsan?*

**J** Waxaan Ilaahay weydiisanayaa, akhristayaashana ka codsanayaa iney iigu ducayaan camal saalixa iyo tawfiiq. Waxaan rajaynayaa inta nolosha iiga harsan inaan dacwada wado, gaar ahaanna inaan xoog saaro inaan taariikhda iyo facyaalka soo socda tusmo iyo tusaale uga tago. Da'yartana u gudbiyo wixii waaya aragnima ah kuna tababaro. Intaan awoodana qoraalka iyo tababarka xoogga saaro, maalin kastana aqoon kororsado, insha Allaah.

# NUXURKA

- Sheekh Maxamed Axmed Idris wuxu 1957 ku dhashay baadiyaha magaalada Qandala oo ka tirsan gobolka bari. Yaraantiisi xoolaha ayuu raaci jiray.
- Iskuulka intii uga harsaneyda wuxuu kudhigtay magaalada Muqdisho.
- Qurbaha waxaa ugu horeeyay 1972 oo uu carabaha yimid, iyo 1985 oo uu Yurub iyo Maraykan yimid oo hadda degan yahay, dhalashana ku leeyahay.
- Wuxuu dacwo iyo kheyr sheeg ku maray aduunka intiisa badan, isagoo dadka Soomaaliyeed ugu yeeraya diintooda iyo dhaqankooda inay xajistaan.
- Waxaa hadda ku socda dacwad ku saabsan in jinsiyadda lagala noqdo.
- Xifdinta Quraanka iyo barashada cilmiga diiniga ayaa u horeeyay.
- Wuxuu cilmi kaga qaatay hor fadhiisi culimada Islaamka ee qarnigaan oo ay kamid ahaayeen Sh. Cabdil caziiz Bin Baaz, Sh. Ibnu Cutheymiin, Sh. Xasan Ayuub, Sh. Maxamed Qutub, Sh. Sayyid Saabiq, Sh. Maxamed Saabuuni, Sh. Cali Hindi iyo Sh. Maxamed Islam Pakistani.
- Wuxuu Becholar iyo Master ka qaatay jaamacad kutaala dalka Maraykanka.
- Wuxuu qoray maqaalo badan iyo buugaag dhawr ah oo kusoo baxay afka Soomaaliga iyo Carabiga.
- Wuxuu masaajiddo badan dhismahooda ka hirgeliyay qaaradaha Ameerika, Yurub iyo Afrika.
- Wuxuu bog ku leeyahay Facebook oo ay maalin kasta kala socdan dad dhan 77 941 qof.
- Siyaasadda Soomaaliya wuxuu mushkiladeeda iyo xalkeeda ku cabiray sadex-iyo-sadex: 1) Iimaan yari, 2) Aqoon darro, 3) agaasin xumo. Xalkeedana: 1) Tawbad, 2) Tala wadaag 3) Taliye suuban.
- Xadiiska Rasuulka scw ee ka hadlaya dumarka, fahanka xeelka dheer ee laga qaadan karo waa kala duwanaanshaha dumarka iyo ragga, ee maaha kala fiicnaan.
- John Gray oo ku takhasusay cilmi-nafsiga, muddo 25 sano ahna baarayay kala duwanaanshaha dumarka iyo ragga, wuxuu ka qoray buug uu ugu magac daray "Men are from Mars, Women Are from Venus". Buugaan ayaa ah mid aad loo iibsaday, ilaa haddana la iibsado.
- Buugaan wuxuu noqday " popular paradigm" oo loo isticmaalo xalinta khilaafaadka qoysaska.
- Millah, waxaa inbadan lagu xusay Quraanka iyo Xadiiska, waxayna tilmaamtaa diin, sida Milladii Nabi Ibraahiim ee toosneyd. Waxay kaloo tilmaamtaa qolo hal diin wada haysata. Waxaana la xusaa inay yihiin (Political concepts)ee uu Qur'aanku isticmaalo.
- Maxamed Iqbal wuxuu qabaa in Ummah tahay fahan gude-weyn oo shardi u ah in laga midoobo quluubta iyo waxa la rumaysan yahay.
- Ibnu Khalduun wuxuu xusaa in dadku isku raacaan qolo-qolo, iyagoo ka duulaya xamaasad midow tolnimo ama midow fikri kudhisan. Xamaasadda midowga-tolnimo ayaa qolo-qolo usii kala furfurma, meesha midda kudhisan fikriga ay sal yeelato.



Sawir lagu muujinayo Ibnu Al-Haytham.

**Markaad dib u eegtid taariikhda culimada Muslimiinta, aad baad ula yaabaysaa raadka ay uga tageen dunida maanta casriga ah.**

# IBNU AL-HAYTHAM

Magaalada Basra, ayaa waxay siisey fursad ah in uu goor hore bilaabo xiisaha uu u qabay daba-galka uunka dabiicadda iyo muuqaalladeeda. Wuxuu dadaal ku bixiyey baadi-goobka asraarta ogaallada aqooneed ee aadamiga ka qarsoonaa. Yaraantiisii, wuxuu bartey aqoonta kala duwan ee diinta Islaamka.

AV **DR. SAADIQ EENOW**

Abu Cali Al-Xasan Bin Xasan Bin Al-Haytham. Wuxuu kamid yahay ragga dadaalka ay sameeyeen uu sababey in aadamiga uu u furmo garasho baaxad leh oo noloshooda wax-tar u yeelata. Waa caalim, wax-qabadkiisii aadamiga oo dhan ay mahadiyeen. Waa aabihii aqoonta la xiriirta iftiinka (Optic Science), waa ninkii ugu horeeyey ee bilaaba aqoonta la xiriirta adeegyada xubnaha aadamiga (Physiology). Wuxuu dejiyay xeerarka uu araggu ku dhaco. Maanta ma-jirto qalab fiiro-tebiye ah ee lagu eego wax dhow (Microscope) ama wax dheer (Telescope), qalab muraayado ah ama quraaradaha indhaha, kuwaas oo sameyntooda ay ka maqan-tahay xeerar aqooneed ee uu dejiyey Ibnu Al-Haytham. Si ku dhisan xisaab iyo handasa ayuu ugu kuur-galay dhaqdhaqaaqa xubnaha jirka iyo jihooyinka saddexda ah (Three-Dimension) oo ay u nuuxsadaan (horey-gadaal, midig-bidix iyo kor-hoos.)

Magacyada loo yaqaan waxaa kamid ah Al-Basri oo loo nisbeeyo magaaladii uu ku dhashey ee ah magaalada Basra (Ciraaq). Waxaa kaloo lagu magacaabaa Caalimkii aqoonta dabiicad-baradka (Physics). Waxaa kaloo magacyadiisa kamid ah Ptolemaeus-kii II-aad. Ninkan lagu naaneysey waa Ptolemy Claudius (90-168 cd), kaas oo 1000 sano ka cimri horeeyey Ibnu Al-Haytham. Ptolemy Claudius xilligaas uu noolaa wuxuu ahaa aqoonyahan looga danbeeyey aqoonta xisaabta, cir-baradka (Astronomy) iyo dhul-xariiqa (Geography). Qarniyo dhowr ah ayaa waxaanan jirin nin la bar-bar-dhigo ee wax ka yiqiin aqoonta dabiicadda. Ibnu Al-Haytham wuxuu ku dhashey magaalada Basra ee dalka Ciraaq markey taariikhdu ahayd 965 c.d. (354 taariikhda Hijriyada).

Xilliga uu hanaqaadey Ibnu Al-Haytham, waxaa lagu guda jirey casrigii dahabiga ahaa ee Islaamku uu soo marey. Xilli waxay ahayd muslimiintu ay siyaasad ahaan u hanaqaadeen oo ay ku guuleysteen in ay hor-seed ka noqdaan il-baxnimada dunida. Iyagu waxay markaas ku guuleysteen dhismo hannaan dhaqaale iyo kobcin aqooneed. Taariikhyahannadu waa ay isku khilaafsan yihiin dhalashada Ibnu Al-Haytham in uu yahay Carab iyo in uu yahay Beershiyaan. Waxaa kaloo ay isku khilaafsan yihiin in uu shiica ahaa iyo in uu sunni ahaa. Mid uu yahayba waa caalim wax badan ku kordhiyey garaadka aadamiga. Wuxuu ku fogaadey falaadka aqoonta iyo xeerarka aragtiyaalka ee laga dhaxlo tijaabooyinka aqooneed.

Magaalada uu ku dhashey ee Basra, ayaa waxay siisey fursad ah in uu goor hore bilaabo xiisaha uu u qaadey daba-galka uunka dabiicadda iyo muuqaalladeeda. Wuxuu dadaal ku bixiyey baadi-goobka asraarta ogaallada aqooneed ee aadamiga

ka qarsoonaa. Yaraantiisii, wuxuu bartey aqoonta kala duwan ee diinta Islaamka. Dabadeed wuxuu wakhti badan ku bixiyey in uu daalacdo kutubta aqooneed ee tiil magaalada Basra. Gaar ahaan kutubtii laga af-meershey (turjumey) afafka Giriigga, Hindiga iyo Roomanka. Wuxuu kaloo daalacdey kutubtii ay qoreen aqoonyahannadii Islaamka, gaar ahaan imaamkii reer Andulus Abuu Al-qaasim Khalaf Ibnu Al-Cabaas Al-Sahraawi. Waxaa kaloo kamid ahaa culimada uu daalacdey qoraalladoodii, Imaam Yacquub Ibnu Isxaaq Al-Kandi iyo Abuu Xasan Thaabit Al-Saabi.

Aqoon wejiyo badan ayuu Ibnu Al-Haytham daneeyey oo uu ku caan baxay daba-galkooda. Waxaa u dheeraa xeerarka nolosha ee uu ku ogaadey tijaabooyinka aqooneed, kuwaas oo noqdey kuwo dhaxal-gal u ah aadamiga. Aqoonta uu caalimkan u kuur-galey waxaa kamid ahaa xisaabta (Mathematics), handasada (Geometry), qalliinka caafimaadka (Medical Surgery), falsafadda (Philosophy), dhul-xariiqa (Geography), caafimaadka indhaha (Ophthalmology), cir-baradka (Astronomy), dabiicad-baradka (Physics), arag-baradka (Optics) iyo aqoonta dhaqaaq-baradka (Mechanics). Aqoontaas kala duwan oo uu jecleystey waxay gayeysiisey in uu akhristo wixii qoraallo ahaa oo ay ka wax dhigeen aqoonyahannadii ka horeeyey dhamaantood. Kuma uusan ekaan akhrin keliya ee aqoon walba daba-gal iyo u kuur-gal ayuu ku sameeyey, isaga oo wax-badanna ku kordhiyey. Noloshiisii wuxuu ku dhameystey aqoon kororsi, aqoon dejin iyo tijaabooyin, illaa uu ka noqdey nin dunidii ay il-baxnimadu tiil laga bartey magaciisa. Hadalka afkiisa ka-soo baxa wuxuu noqon jirey ooraah ay dadku isu-tebiyaan, kaas oo gaara magaalooyinkii Islaamku u talin jirey bari iyo galbeed. Caalimka la yiraahdo Al-Qafaadi ayaa wuxuu qorey hadal laga wariyey Ibnu Al-Haytham. Hadalkaasi wuxuu ahaa:

> " Haddii aan Masar ku sugnaan lahaa, webigeeda Niil howl ayaan ka qaban lahaa, taas oo anfacda xaalad walba oo ah xaaladeheeda biyo-yaraanta ama biyo-butaaca ah "
>
> IBNU AL-HAYTHAM.

Ibnu Al-Haytham wuxuu maleynayey aqoonta xisaabta iyo handasada oo uu ku fogaadey in ay ka saacideyso farsamada lagu dhiso biyo-xireenada. Hadalkii uu yiri



Masjidka loogu magac daray Al-Xakiim Bi'amrilaah – Qaahira.

wuxuu gaarey dalka Masar. Waxaa maqley amiirkii Khaliifada Faadimiyiinta (909-1171) ee xilligaas ka talinayey Masar. Amiirka waxaa la oran jirey Al-Xaakim Bi´amri-laahi Mansuur, kaas oo talada hayay muddadii u dhexeysey 1101 -1121. Wuxuu ahaa khaliifkii lixaad ee dowladdaas. Khaliifkan, isaga oo ku sugan Qaahira, ayaa markuu maqley warkii Ibnu Al-Haytham uu ka yiri biyaha Niil, si qarsoodi ah ayuu dhaqaale badan ugu direy. Dabadeed wuxuu ka dalbadey in uu Masar ugu yimaado. Amiirku wuxuu is tusiyey kalsooni ah, marba haddii Ibnu Al-Haytham uu hadalkaas yiri, aqoonta uu leeyahay darteed, in uu yahay nin fulin kara qowlkiisa. Ibnu Al-Haytham waa uu aqbaley in uu Masar u socdaalo. Amiirkii ayaa markaas wuxuu Ibnu Al-Haytham u xil-saarey in uu oofiyo ballantiisii ahayd in uu webiga Niil wax ka qabto oo uu dhiso biya-xireen.

Caalimkii wuxuu guda-galey in uu dhanka koonfur ugu socdaalo qul-qulka biyaha Niil. Wuxuu sii qaatey xoogaa qalab ah oo uu la kaashado dhismaha biya-xireenka. Waxaa socdaalka ku weheliyey rag xirfadlayaal ah, kuwaas oo qudhooda uu ugu xushay in ay wax la dhisaan. Wuxuu soo gaarey meel ku dhow magaalada Aswaan ee ku taal koonfurta dalka. Waa dhul kala sareeya oo halkaas waxaa ka hoobta biyaha webiga. Degaankii ayuu u doortey in uu mashruuciisa ka hir-geliyo. Waxaa xusid mudan in degaankaasi uu yahay degaanka sanadkii 1960-kii dowladda Masar, iyada oo kaashaneysa dowladdii la oran jirey Midowga Soofyeeti, ay u dooratey dhismaha biya-xireenka Aswaan (Aswan Dam). Biyaxireenkan cusub ayaa wuxuu keydiyaa biyo gaaraya 43,000,000 m3.

Ibnu Al-Haytham iyo raggiisii, in muddo ah ayay ku sugnaayeen degaankii. Wuxuu diraaseeyey socodka biyaha iyo muggooda, iyo qaabkii uu biya-xireen uga dul dhisi-lahaa webiga. Ugu danbeyntii wuxuu ku qancey in heerka uu ka gaarey ogaallada aqoonta xisaabta iyo qalabkan uu wato in ayan ku filleyn in uu dhiso biya-xireen uu ku celiya biyaha webiga Niil. Mashruucuna uu yahay mid u baahan aqoon ka badan iyo awood ka xoog-weyn midda uu hayo.

Ibnu Al-Haytham, ma uusan awoodin in uu dib ugu soo laabto Qaahira isaga oo ku fashilmey mashruucii biya-xireenka ahaa. Sidaa darteed, si uu ugu soo laabto magaalo-madaxdii, isla-markaana uu uga badbaado qooqa amiirka, cudur waali ah ayuu isku-ridey. Wuxuu u ekaadey nin madaxa ka xanuunsan. Dabadeed markii uu warkii gaarey amiirkii, wuxuu amrey in la soo xiro. Markii uu magaalada keeney, aqal ayuu keligiis dejiyey. Wuxuu u qorey mushahar iyo dad ilaasha una adeega. Xaaladdaas ayuu Ibnu Al-Haytham ku sugnaa muddo 10 sano ah (1011 - 1021), illaa amiirkii uu ka dhintey sanadkii 1021-kii. Markaas ayuu Ibnu Al-Haytham dib ugu soo laabtey caafimaad iyo fiyow-qab. Halkiisii ayuu ka sii watey cilmi-baaristii iyo qoraalladii aqooneed illaa isna uu dhintey.

Ibnu Al-Haytham wuxuu ahaa nin aad u qiimeeya tijaabooyinka cilmiga. Wuxuu ahaa nin isku howla daba-galka iyo baaritaannada lagu baadi-goobayo xaqiiqooyinka aqooneed




Falceliska iftiinka cirka iyo biyaha.

iyo xeerarka nololeed. Tobankii sano ee uu xabsi-guriga ahaa wuxuu qorey kitaabadiisa midka ugu qiimiga badan. Kitaabkaasi oo uu ku magacaabey Kitaab Al-Manaathir (Book of the Optics) wuxuu ku diyaariyey fikrado iyo aragtiyo aqooneed oo dhab ah, kuwaas oo aqoonyahannadu ayan hortiis ogaal u lahayn. Wuxuu buugaas ku muteystey in caalimkan lagu magacaabo aabaha aqoonta iftiinka (Father of the Light Science).

Buuggaasi wuxuu ka koobnaa toddoba qeybood. Wuxuu kaga hadlayey aqoonta xisaabta, dabiicad-baradka, aragga iyo aqoonta naf-baradka. Ahmiyadda uu buuggu leeyahay waxay tahay in uu si casri ah ugu qorey saldhigyada aragga ee ku saleysan aqoonta dabiicad-baradka ah. Baaritaanka uu ku sameeyey xubnaha aragga (indhaha) iyo shaqadooda ayuu ku muteystey in uu noqdo ninkii ugu horeeyey oo oo wax ka qora aqoonta xubno-baradka (Physiology).

Aragtiyaalka khaldan ee uu saxay oo la xiriira aragga walxaha, waxay ahaayeen kuwo Ibnu Al-Haytham hortiis laga rumeysnaa dunida. Waxaa kamid ah xiriirka u dhexeeya iftiinka iyo aragga. Aragtidan khaldan waxaa horey isugu raacey aqoonyahannadii Giriigga ahaa oo ay kamid yihiin Aristotle, Ptolemy iyo Euclid. Aragtiyaalkaas dheeriga ku ahaa aqoonta aadanaha waxaa kamid ahaa aragtida lagu magacaabo Emission Theory. Waxay tahay in araggu uu dhaco kadib iftiinka ka-soo baxaya indhaha oo ku dhacaya agabka muuqda ee leh qaab, midab iyo weynan ay maskaxdu fasirtu. Ibnu Al-Haytham wuu beeniyey arintaas oo wuxuu muujiyey in araggu u dhaco sidaas la sheegey ka-soo hor-jeedkeeda. Tijaabo qurux badan ayuu dhigey ee uu ku adkeynayo aragtidiisa, taas oo ahayd in uu goor maalin ah qof dhex-joojiyey qol gudcur ah. Dabadeed albaab u furan ayuu meel qofkii hortiisa ku aaddan wuxuu dhigey kursi. Qofkii gudcurka ku jirey waxaa u muuqda kursigii dibadda yiil (meel iftiin ah). Markii la sameeyey tijaabo middaas ka-soo hor-jeedda oo kursigii la dhigey aqalkii gudcurka ahaa gudihiisa, qofkiina la joojiyey dibadda oo iftiin ah. Qofkii waxaa u muuqan waayey kursigii.



Fakarka ay u shaqayso kaamerada pinhole.

Waxaa halkaas ku burey aragtidii Ibnu Al-Haytham hortiis la rumeysnaa ee ahayd shucaaca wax lagu arko ee u dhexeeya qofka iyo walaxda waa mid ka yimaada indhaha qofka. Waayo haddii shucaacu uu ka yimaado indhaha, waxay ahayd in la arko kursigii gudcurka yiil xilli ay indhuhu heysteen iftiinkii qorraxda. Ibnu-AlHaytham wuxuu caddeeyey aragtida ah shucaaca aragga in uu ka yimaado walaxda. Ibnu Al-Haytham wuxuu ahaa aqoonyahankii ugu horeeyey ee soo bandhiga dhismaha lakabyada indhaha iyo lakab walba howsha gaarka ah oo uu ka qaato aragga.

Wax qabadkii Ibnu Haytham waxaa lagaga tusaale qaadan-karaa buugaagtii uu qorey oo gaaraya 200 oo kitaab. Waxaa weheliya qormooyin badan oo uu aqoon kala duwan uga faalloonayo. In badan oo kutubo uu leeyahay ah waxaa la rumeysan yahay in ay lumeen. Kutubtiisii asalka ahaa badankood waxay yaalliin maktabado ku yaal Istanbuul iyo London. Aragtiyaalka aqooneed ee fahamkiisa laga dhaxley waxaa kamid ah in iftiinku uu ku socdo xariiq toos ah ee uusan lahayn qal-qallooc. Wuxuu kaloo qeexey, xariiqda iftiinku haddii ay ka hor timaaddo walax daah-furan (Transparency) oo ay ka dhex-dusto, sida biyaha iyo dhalada, in markaas xariiqdu ayan toos noqoneynin, bal ay jabeyso (Light Refraction). Wuxuu u kuur-galey jajabka ifka qorraxda markuu soo dhex-marayo hawada, iyo soo-celiska ifka (Light Reflection). Wuxuu tijaabooyin badan ku sameeyey quraaradaha indhaha iyo muraayadaha. Wuxuu ahaa ninkii ugu horeeyey ee u kuur-gala socod ifka ee taagga iyo legdanka, jajabkooda iyo soo-celiskooda, taas oo ahayd faham muhim ah si loo helo ogaallada la xiriira handasada aragga.

Wuxuu sheegey hawada aanu dhulka ku heysanno, qeybteeda hoose in ay ka cuf weyn-tahay qeybteeda sare iyo in hawadu ayan ahayn mid u furan fagaagga (Space). Bal ay tahay mid leh xuduud dhexe oo saqaf u ah dhulka, kaas oo ku eg meel naga sareysa oo dusheena ah. Ibnu Al-Haytham wuxuu tilmaamey jajabka nuurka inooga imanaya dusha (Dayaxa iyo xiddigaha), markay soo dhex-marayaan cimilada hawada in ay marar badan jajabayaan. Sidaas darteed jajabkaas badan wuxuu sabab u yahay dayaxa iyo xiddigaha in ay inoogu muuqdaan kuwo ka-dhow masaafada ay inoo jiraan.

Buugaagta uu qorey caalimkan kuwo badan oo kamid ah nuxurka ka akhri. Buugaagta iyo qoraallada cilmiga ah ee uu ka tegey Ibnu Al-Haytham intaas waa ay ka badan yihiin. Qoraalladaas waxaa qiimeeyey ummado badan oo xilligii uu noolaa iyo markuu dhintey dabadiis joogey. Aqoonyahanno badan ayaa goor-danbe waxay gorfeeyeen qoraalladaas. Waxaa kamid ah aqoonyahan muslim ah oo la yiraahdo Kamaalu-diin Al-Faarisi ayaa wuxuu si wanaagsan u guda-galey cilmi-baaristii Ibnu Al-Haytham ee la xiriirey aragga. Caalimkan, markii uu si wanaagsan ugu kuur-galey wax-qabadkii Ibnu-Haytham, wuxuu ka qorey kitaab uu ku faah-faahinayo xeerarka iyo aragtida aqooneed ee aadamigu uu ka dhaxley caalimkaas weyn. Wuxuu ku magacaabey (والبصائر صارلذوي الأب المناظر تنقيح). Kitaabkaas uu qorey Al-Faarisi ayaa wuxuu ahaa midkii ugu horeeyey ee aqoontii Ibnu Al-Haytham ee soo gaara Yurub. Waxaa kitaabkaas asbaanish u af-meershey (turjumey) ninka la yiraahdo Gerard Cremona oo kamid ahaa raggii waaweynaa ee qarniyadii dhexe af-celin jirey kutubtii ay reebeen culimadii

islaamka ahaa. Kitaabkii oo af-asbaanish ah, qaaradda Yurub waxaa markiisii ugu horeeyey lagu iibiyay magaalada Bern ee dalka Swiss sanadkii 1572-kii.

Kutubtii Ibnu Haytham ee la af-meershey waxay raad xooggan ku yeesheen aqoonyahanno badan ee qarniyadii dhexe ka kacay Yurub. Waxaa laga xusi karaa Roger Becon (1214-1294), oo ahaa aqoonyahan u dhashay dalka Ingiriiska. Kitaabkiisa ugu qiimiga badan ee uu qorey waxaa la yiraahdaa Opus Majus. 800 oo safxadood waa uu ka badan yahay. Toddobada qeyboo ee ka kooban yahay, saddexda danbe ayaa waxay ka hadleysaa aqoonta aragga, xeerarkeeda iyo falsafad. Qeybahaas danbe waxay yihiin aqoon uu ka-soo miinguurshey kitaabkii Ibnu Al-Haytham.

«Kuma uusan ekaan akhrin keliya ee aqoon walba daba-gal iyo u kuur-gal ayuu ku sameeyey, isaga oo wax-badanna ku kordhiyey»

DR. SAADIQ EENOW

Ibnu Al-Haytham wuxuu noqdey nin dunida laga xushmeeyo. Maanta dalka Baakistaan waxaa ku yaal isbitaal weyn oo ku dhex-yaal jaamacadda Agakhaan. Waxaa lagu magacaabaa Ibnu Al-Haytham. Waxaa lagu bartaa laguna daweeyaa cudurrada indhaha. Sanad walbana waxaa lagu bixiyaa abaal marin. Diinaarka dalka Ciraaq waxaa ku sawirnaa wejiga Ibnu Al-Haytham, magaciisana waa ku qornaa. Qaramada Midboobay (United Nations) markii ay dowladda Ciraaq baaritaanka ku heysey xilligii Saddaam, magaca Ibnu Al-Haytham waxay u bixisey macmal (Laboratory) lagu baaro waxyaabihii kiimikada ahaa ee dalka Ciraaq laga soo helo. Xushmadda loo hayo Ibnu Al-Haytham waxay gaartey in lagu magacaabo god dayaxa dushiisa ku yaal oo kamid ah godadka ay qaraxyado sameeyaan. Sanadkii




7/ 2- 1999 waxaa Ibnu Al-Haytham lagu magacaabey dayax xilligaas la heley oo kamid ah meerayaasha Qorraxda. Allaha u naxariisto, kana abaal-mariyo dadaalkii uu qabtey caalimkaas weyn ee muslimka ah.

«Degaankii uu Ibnu Haytham u doortay biyo-xireenka, waa midka ay dowladda Masar la kaashatay Midowgii Soofyeeti oo kadhisay biyo-xireenkii Aswaan (Aswan Dam)»

DR. SAADIQ EENOW.

# NUXURKA

- Abu Cali Al-Xasan Bin Xasan Bin Al-Heytham, wuxuu kudhashay Basra dalka Ciraaq, sanadkii 354 Hirji ama 965 Miilaadi.
- Wuxuu markii hore bartay diinta Islaamka, kadibna wuxuu aad u daalacday oo dabagalay kutubta cilmiga, kuwii hore iyo kuwii danbe.
- Culimada uu wax kaqaatay waxaa kamid ah Abuu Al-qaasim Khalaf Ibnu Al-Cabaas Al-Sahraawi, Yacquub Ibnu Isxaaq Al-Kandi iyo Abuu Xasan Thaabit Al-Saabi.
- Wuxuu dejiyay xeerarka uu ku dhaco aragga dhow (Microscope) iyo midka dheer (Telescope).
- Aqoonta uu kuura-galay waxaa kamid ah xisaabta (Mathematics), handasada (Geometry), qalliinka caafimaadka (Medical Surgery), falsafadda (Philosophy), dhul-xariiqa (Geography), caafimaadka indhaha (Ophthalmology), cir-baradka (Astronomy), dabiicad-baradka (Physics), arag-baradka (Optics) iyo aqoonta dhaqaaq-baradka (Mechanics).
- Wuxuu askumay goobta biyo-xireenka (Aswan Dam) oo maanta keydiya biyo dhan 43,000,000 m3.
- Al-Xaakim Bi ' amri-laahi Mansuur, wuxuu kamid ahaa maamuladii dowladdii Faatimiyiinta. Talada wuxuu hayay sanadihii 1101 -1121
- Wuxaana la xusaa inuu ahaa keligi-taliye, isrogrog badan, xukunka iyo ciqaabka dadkana u degdegi jiray.
- Tobankii sano ee uu xirnaa wuxuu qoray kitaab aad loo tixraacay dunida Kitaab Al-Manaathir (Book of the Optics). Wuxuuna buuggaan ku muteystay magaca (Father of the Light Science).
- Aqoonyahanada iyo Feylasuufaradii Yurub ee lahubo inay buugaas ka faa'iideen waxaa kamid ah Roger Bacon, Robert Grosseteste, Witelo, Giambattista della Porta, Leonardo Da Vinci, Galileo Galilei, Christian Huygens, René Descartes and Johannes Kepler.
- Spain markii ay qabsatay Andulus, magaciisa waxay udhigeen (Alhazen), iyadoo la iska yaraynayo saameynta Islaamka. Newton wuxuu aragtiyadiisa badankood kudhisay fikradaha Ibnu Al-Haytham.
- Aragtiyada ugu muhiimsan ee uu dunida kasaxay waxaa kamid ah xiriirka kadhaxeeya iftiinka iyo aragga.
- Wuxuu qoray buugaag gaaraya ilaa 200, waxaase dunida soo gaaray 50 buug.
- Wuxuu tijaabooyin kusameeyay muraayadaha indhaha. Wuxuuna ahaa qofkii ugu horeeyey ee u kuur-gala socod ifka ee taagga iyo legdanka, jajabkooda iyo soo-celiskooda.
- Buugaagta uu qoray:
  - Shaandheyn iyo Lakabyo (Analysis and Synthesis)
  - Shakiyo La-xiriira Ptolemy (Doubts Concerning Ptolemy)
  - Fasiraadda Usuussha Eqliidus (Explanation of Euclid's Elements)
  - Miisaankii Xikmadda (Balance of Wisdom)
  - Sixidda (xisaabta) Almaajest (Correction to the Almagest)
  - Ka-hadalkii Meesha (Discourse on Place)
  - Tilmaansiga Dhabta ah ee Cirifka (Exact Determination of the Pole)
  - Tilmaansiga Dhabta ah ee Xariiqda Dhulka (Exact Determination of the Meridian)
  - Xisaab ku-helidda Jahada Qiblada (Finding the Dirction of Qibla by Colculation)
  - Dhigga Qorrax Ku-joogga (Horizontal Sundialis)
  - Xariiqaha Gooreysada (Hour Lines)
  - Dhamaadka Handasada Koonikada (On Completion of the Conics)
  - Fiirinta Xiddigaha (On Seeing the Stars)
  - Wareejinta Wareegga (On Squaring the Circle)
  - Gubashada Fagaagga (On Burning Sphere)
  - Dhismaha Adduunka (On the Configuration of the World)
  - Jaadka Dhaqaaqa Mid-walba ee Xiddigaha Toddobada ah (The Model of the Motions of Each of the Seven Planets)
  - Dhaqdhaqaada Dayaxa (The Motion of the Moon)
  - Ifka Xiddigaha (On the Light of the Stars)
  - Qaansa-roobaad iyo ifka Haalo (On the Rainbow and Halo)
  - Sixidda Howl-gallada Cir-baradka (The Correction of the Operations in Astromomy)
  - Cir-jiidka (On the Milk Way)
  - Dabiicadda Harka (On the Nature of Shadow)
  - Qormadii Ifka (Treatise on Light)
  - Farqiga u dhexeeya Culeyska Xiddigaha (The Different Heights of the Planets)
  - Ifka Dayaxa (On the Light of the Moon)
  - Maqaalad Dayax-madoobaad iyo Qorrax-madoobaad (On the Form of Eclipse).



Cudurada jeermiska kayimaado.







**Ilaahay waa jecel yahay dadka is-nadiifiya, dad badan oo Ilaahay jecelkiisa doonayana, waxay u dhintaan sababo cuduro nadaafad xumo keentay!**

# NADAAFADDA & CAAFIMAADKA

Diin walba nadaafadda si uun baa loogu xusay, mase jirto Islaamka cid kaga faahfaahin badan 3-da nooc ee nadaafadda: shakhsiga, xirfadda iyo bulshada. Muslimiin badan uma aysan eegin si xeeldheer, balse dhacdooyinkii sida geeridii madoobeyd ee Yurub ka dhacday iyo daacuunadii dunida ka dilaacay, ayaa kor u qaadday aqoonta iyo wacyiga bulshooyinka caalamka maanta intooda badan. Taasoo ka difaacda cuduro badan oo dilaa ah oo jeermisku sabab u yahay.

AV **XALIIMO SH. CALI MAXAMUD** PHOTO **THINKSTOCK**

Nadaafadda (Hygiene) waa eray asalkiisu ka soo jeeda Giriigga. Mid ka mid ah Ilaahyadii ay caabudi jireen Giriiggii hore oo ay u yaqaaneen Ilaahii Caafimaadka ayaa la oran jiray Hygieia. Macnaha casriga ah ee erayga waxa la oran karaa waxaa weeye u wanaagsan caafimaadka.

Diimaha samaawiga iyo kuwa dhulka markaan fiirino kuwa ugu waaweyn sida Islaamka, Yuhuudda, Masiixiyadda, Buudihiistaha iyo Hinduuga waxaan ku arkaynaa, habdhaqanyo kala duwan oo ku wajahan nadaafadda.

Diinta Islaamka oo ah midda sida ugu ballaaran muhiimadda u siisay nadaafadda guud ahaan, gaar ahaanna nadaafadda shakhsiga, ayaa gaarsiinaysa nadaafadda ilaa heer cibaado. Nadaafaddu Islaamka waa wax uu qofku ku gaarayo inuu Ilaahay jeclaado, sida kucad Aayadda 222aad ee Baqarah, macneheedu ahaa (Allah waa jecel yahay kuwa u toobad keena



Jiir meyd ah, waana xayawaanka inta badan sababa cudurada jeermiska

iyo kuwa is nadiifiya). Sidoo kale Rasuulku (scw) wuxuu ku matalay inay nadaafadu tahay diinta barkeed. Islaamku wuxuu qofka siinayaa hagid badan siduu naftiisa iyo agtiisaba u nadiifin lahaa. nadaafadda, si hufan in wax loo cuno, nadaafadda dharka, ilkaha waxyaaabaha jirka aadanaha ka yimaada iyo waxyaabo kaloo badan ayaa kamida arimo ay tahay qofku inuu barto inuu u fuliyo sida ugu wanaagsan ee Islaamku faray.

Yuhuudu sidoo kale, iyadoo ah mid ka mid ah diimaha samaawiga, waxay leeyihiin hab is nadiifin diimeed oo qaarkood ay xata Islamka la wadaagaan sida muhiimada qubayska iyo qubaysyo qaarkood waajib ah. Gacmaha oo la iska dhaqo waxay ugu yeeraan (netilat yadayim), marka la soo koco musqusha la isticmaalo iyo ka hor iyo ka dib cuntada iyo marar kaloo badan. Sidoo kale cidiyaha oo la iska jaro iyo cadayga ayaa ah waxyaabo kale oo ay Islamka la wadaagaan.



Diinta Masiixiga ayaan iyadu xoogga saarin nadaafadda nolol maalmeedka. Masiixiyadu maleh is nadiifin la xiriirta cibaadaysiga. Waxay Masiixiyiintii qarniyadii dhexe u arkeen nadaafad yaraantu inay tahay ka saahididda waxa



Waysada 5-ta wakhti oo la cadeeyay inay dawr weyn ka ciyaarto nadaafadda iyo kahor tagga cudurada. Culuumta nadaafadda waxay xusaan gacmaha oo ladhaqo hawl walba dabadeed, waxay baabi'isaa jeermiska, difaacdaa cuduradada, kana hortagtaa inuu jeermisku faafo.



Lo' qashin daaqaysa, kadibna caanaheeda iyo hilibkeedu dad cuni doonaan

raaaxaysiga keenaya. Sidaas darteedna ayba cibaado iyo alle u dhawaansho tahay inuu qofku nadaafad yar yahay. Maleh diintani wax gacma dhaqasho la yiraahdo ilaa hal mar oo cuntada dabadeed la sheego mooyee. Waxay faraha biyaha ku taaban jireen si dhaqan diimeed ahaan ah marka ilmaha yar kaniisada lagu biyo shubayo iyo marka ay cunayaan rootiga iyo khamriga cas oo ay yiraahdaan. Wuxuu yiri St. Bernard of Clairvaux 1090 – 1153 "kulligayo waanu uraynaa, cid ay u urayso'se majirto". Taasoo tusaysa inay nadaafad yaraantu wax la qabatimay ahayd.

Dadka masiixiga ah oo maanta nool waxay intooda badan aqoon u leeyihiin nadaafadda muhiimka ay u leedahay caafimaadka, dhaqankooduna waa ka duwan yahay kii dadkii hore ee masiixiga ahaa. Waxaa la oran karaa aragtida nadaafadda iyo caafimaadku maanta waa arin caalami ah oo aad loogu baraarugsan yahay caalamka. Qoraalo laga helay diinta Hinduuska, kana soo jeeda 200-sano dhalashadii Nabi Ciise (cs) kahor, ayaa waxay sharxayaan iska ilaalinta 12 wax ee wasakhda jirka ah, sida saxarada, kaadida, dhukayga, duufka, dhiigga, oohinta, dhididka iwm. Buudismaha ayaa iyaguna qaba inuu qofku korkiisa dhinacyadiisa iyo dharkiisaba nadiifiyo.

Nadaafaddu waxay sal u tahay ka hortagga faafidda cudurada, iyo ilaalinta caafimaadka wanaagsan. Nadaafadda waxaa si caam ah loo kala qaybin karaa saddex qaybood oo waaweyn. Nadaafadda shakhsiga, Nadaafadda xirfadaha iyo Nadaafadda bulshada. Taariikhda aadanaha waxay soo martay marxalado kala duwan, nadaafaduna waxay mar walba ku xirnayd aqoonta bulshadu leedahay, muhiimadda nadaafadda iyo hadba horumarka dhaqaale ee umadaas.

## Cudurka Geeridii Madoobayd & Nadaafadda

Xiriir toos ah ayaa ka dhexeeya nadaafad xumadda iyo fididda cuduradda. Nadaafadda qofka waxaa saamayn wayn ku leh guriga uu kusoo barbaaro iyo fahamka bulshada uu ku dhex nool yahay. Yurub waxaa qubayska loo arkayay wax u wanaaagsan caafimaadka, ka hor intii aanu ka dilaacin cudurkii dilaaga ahaa ee loo yaqaanay Geeridii Madoobayd (The Black Death). Dhibta cudurkaan waxay keentay inuu is badalo aragtidii bulsho wayntu kaqabeen qubaysashada. Waxaa baahay aragtiyo qaldan oo sheegaya in xanuunku ku faafo qubaysashada badan iyo waliba biyo kulul in lagu qubaystaa u xun tahay qofka. Dadkii Yuhuuda ahaa ee waktigaas ku noolaa Yurub uguma dhicin xanuunkan dilaaga ahaa sida uu dadka kale u baabi'iyey. Sababtu waa dhaqankii ay u lahaayeen nadaafadda iyo gacmaha oo la is ka dhaqo. Taasi waxay keentay in suuqa loo galiyey inay iyagu ceelasha sumeeyeen cudurkana ay sabab u ahaayeen, balse xaqiiqdu aheyd inay bakteeriyo keentay, nadaafadduna xadidi laheyd faafidiisa.

## Aqoonta Wacyiga Bulshada

Aragtida nadaafaddu waxay marwalba isla badalaysay, fahamka bulshada, laakiin mar walba wuxuu bini'aadamku higsanayay sidii u u heli lahaa nolol wanaagsan oo caafimaad leh. Haweeney qoraa ah oo u dhalatay Kanada, oo la yiraahdo Katherine Ashenburg ayaa waxay ka qortay taariikhda nadaafadda ee Galbeedka buug la yiraahdo (The Dirt on Clean, Unsanitized history), kaasoo qaadaa dhigaya nadaafad xumadii aqoon darradu ay ku haysay reer Galbeedka. Waxay tiri boqoraddii Ingiriiska Elisabeth I

> " Xiriir toos ah ayaa ka dhexeeya nadaafad xumadda iyo fididda cuduradda. Nadaafadda qofka waxaa saamayn wayn ku leh guriga uu kusoo barbaaro iyo fahamka bulshada uu ku dhex nool yahay"
>
> XALIIMO SH. CALI

"Anigu bishii mar ayaan qubaystaa hadii aan u baahanahay iyo hadii kaleba". Hadalkaasi waxa uu aad uga turjumayaa fahamkii nadaafadeed ee casrigaas.

Waxaa la isku raacsanyahay, nadaafad xumadu inay horseedo, in jeermisku bato, isla markaana xanuunadu faafaan. Inkastoo meelo badan aduunka iyagoo

> " Aqoontu waa furaha nadaafadda, nadaafaduna waa furaha caafimaadka, caafimaadkuna waa furaha horumarka bulshada."
>
> XALIIMO SH. CALI

dadku ogyihiin waxa cudurada keena ay marmar ku fara adaygaan dhaqamo hore oo khuraafaad ah. Burkina Faso waxa la yiraahdaa haduu ilmuhu shubmo caanaha hooyadiis ayaa wasakhaysnaa! Xaqiiqaduna waxay tahay in caanaha hooyadu ay difaac siiyaan ilmaha. Waliba bilaha ugu horeeya noloshiisa, jirka ilmuhu wali malaha difaac ku filan. Aqoontu waa furaha nadaafadda, nadaafaduna waa furaha caafimaadka, caafimaadkuna waa furaha horumarka bulshada. Markii la sameeyey mikroskoobka (microscope), waxaa la ogaaday inay jiraan noolayaal aan ishu qaban karin, kadibna waxaa la ogaaday inay noolayaashaasi masuul ka yihiin cuduro badan oo ku dhaca bini aadamka. Taasi waxay gogol xaar u noqotay, samaynata daawooyinka iyo talaalada. Waxa la ogaaday in cudurro badan laga hortagi karo qaar kaloo badanna la dawayn karo.

Waxa jira dhacdooyin taariikhi ah wax wayna ka badalay hab fakarka nadaafadeed ee aadanaha. Waxa ka mid ah daacuunkii ka dhacay London bartamihii qarnigii 19aad ee dilay tobanaan kun oo dad ah. Nin dhakhtar ah oo la oran jiray John Snow, ayaa markii uu u fiirsaday dhimashooyinka iyo meelaha uu cudurku ka dilaacayo, wuxuu ogaaday in ay nadaafad xumo sabab u tahay. Wuxuu arkay in xaafaddda ay dadku ku dhamaanayaan ay biyaha isku tuubo ka wada dhaansadaan. Kadib markuu ku guulaystay in taliskii xaafaddu xirraan tuubadaas, ayaa waxaa joogsaday faafidii cudurka. Waxaa la yihraahdaa dhacdadaan ayaa ahayd bilowgii cilmiga faafidda cuduradda (Epidiomology).

Dhacdo kale oo taariikhi ah marka la fiiriyo nadaafadda iyo caafimaadka ayaa iyaduna aad u mudan in la xuso. Dhakhtar la oran jiray Ignaz Semmelweise oo ahaa masuulka qaybta caruurta iyo dhalmada ee isbitaalka guud ee Viena sanadkii 1847, wuxuu arkay in haweenka ay ka umuliyaan umulisooyinka iyo ardaydoodu ay umul raacaan kaliya 2%, Halka hooyooyinka ay ka umuliyaan dhakhaatiirta, ama ardayda dhakhtarnimada baranaya, ay ka umul raacaan ilaa 18%. Xanuunka ay u dhimanayeena wuxuu ahaa infekshan ku dhaca haweenka dhala (puerperal fever/ child birth fever). Markuu u kuur galay sababaha keeni kara farqiga baaxadaan leh, ayuu wuxuu ogaaday inay dhakhtaradu ka shaqeeyaan qaybta maydadka lagu baaro ee isbataalkaas, ka hor inta aanay imaan, qaybta lagu umulo. Wuxuu soo jeediyey inay dhakhtaraddu gacmaha iska dhaqaan inta aanay soo galin qaybta haweenka iyo caruurta. Taasi waxay mudo aad u gaaban gudeheed keentay inay dhimashaddii ama umulraacii hooyooyinku hoos ugu dhoco 2%. Markii uu amar ku bixiyey in aad loo nadiifiyo qalabka la adeegsado marka haweenka laga dhalinayana dhimashadii waxay hoos ugusii dhacday ilaa 1%. Halkaana waxa ka bilowday fahamka xadidida faafidda cudurada( infection controll). .

Nadaafaddu waa halbowlaha caafimaadka, waxay ka bilaabataa kuna dhamaataa shakhsiga. bulshaduna waa shakhsiyo isu tagay, xirfadahana waxaa fuliya dad isu tagay. Nadaafada bulshada iyo nadaafadda xirfaduhuba waxay ka asaasmaan nadaafadda shakhsiga. Waxaan eegi doonaa Nadaafadda Shakhsiga, cadadka soo socda.




Tuubada biyaha London ee cudurku ka faafayay.



Qof gacmaha dhaqanaya

# NUXURKA

- Nadaafadda (Hygiene) waa eray asalkiisa ka soo jeeda Giriigga, uguna yeeri jireen mid kamida Ilaahyadooda.
- Diinta Islaamka waa midda ugu faahfaahin badan nadaafadda shakhsiga, bulshada iyo xirfadda.
- Aayadda 222aad ee Baqarah wuxuu Allah kuxusay inuu jecel yahay dadka is-nadiifiya, meelo badan oo Quraanka kamid ahna Muslimiinta la faray inay is-nadiifiyaan jir ahaan iyo qalbi ahaan.
- Rasuulkuna scw wuxuu xusay inay nadaafaddu tahay diinta barkeed.
- Yuhuuddu meelo badan la wadaagtaa nadaafadda Islaamka, meesha Masiixiyiintu ay arinkaa kadhacsanaayeen qarniyo fara badan.
- Geeridii madoobayd ee ka dhacday Yurub 1347 wuxuuna socday 1353, wuxuuna qubuurta u kaxeeyay kala bar dadka Yurub kudhaqnaa 80 malyan oo qof. Magaalada Paris keliya maalintii waxaa dhimanayay 500 ruux.
- 2000 Yuhuudda ayaa lagu dilay hal magaalo keliya Strasbourg sanadkii 1349 oo lagu tuhmay inay ka danbeeyaan Geeridii Madoobayd.
- Waxaa la isku raacsan yahay nadaafad xumadu inay sababto jeermiska oo faafa, kadibna cudurada oo bata.
- Khuraafaadyada ay rumaysan yihiin dalalka Afrika qaarkood sida Burkino Faso in ilmuhu shubmo caanaha hooyadiis ayaa wasakhaysnaa, meesha caanaha hooyadu yihiin nadiif, kadifaac caruurta cuduro badan oo dilaa ah. Lana ogaaday caruurta wakhtigooda caanaha hooya kudhamaysta, ay ka caafimaad iyo xoog badan yihiin kuwo kale.
- Hindisidda mikroskoobka ayaa lagu ogaaday cuduro badan, sidaana lagu sameeyay daaweooyin iyo talaalyo badan.
- Daacuunkii London loo yaqaan (Broad Street cholera outbreak) wuxuu dhacay 31 August 1854, kana dhashay sababo la xiriira adeegga nadaafadda biyaha iyo qashinka (sanitary services) oo aan soo gaarin xaafadda Soho.
- Dakhtarka John Snow wuxuu shakki weyn ka muujiyay khuraafaad dadku iska dhaadhaciyeen markaa oo ah in cudurkaan faafinayso dabeesha iyo hawada xun. Baaritaankiisana soo helay tuubada biyaha ee kutaala wadada Broad Street inay faafinayso cudurka
- Cusbitaalka weyn ee Vienna wuxuu Ignaz Semmelweise soo helay jeermiska ay kasoo qaadaan dhakhaatiirku qaybta mayd baarista, inay sabab u yihiin dhimashada caruurta. Halkaana waxaa ka bilowday fahamka xadidida faafidda cudurada ama (infection control) markaa dhasha.



Fayruuska Ebola-da – Nadaafadda waa lagama maarmaan.

**Cudurkii dunida gilgilay bilihii ugu danbeeyay 2014.**

# EBOLA

Cudurkaan oo dunida aad u saameeyay sanadkii tagey, wuxuu kasoo bilowday Kongo, shan nooc ayuuna u kala baxaa. Waxaana udhintay dad kor u dhaafay 8-kun oo qof. Kahor tagiisa iyo faafidiisana, nadaafaddu dawr weyn ayay ka ciyaartaa.

AV **CAALIYA AADAM SH. CALI** PHOTO **THINKSTOCK**


Fayruuska keena cudurka Ebola waxaa markii ugu orraysey helay caalim u dhashay dalka Belgium sannadkii 1976. Waxaa laga helay dalka D. R. Kongo (Zaire) webi yar oo kuyaal bartamihiisa oo la yiraahdo Ebola river, magacuna halkaas ayuu kasoo jeedaa. Waxaa kaloo la sheega in isla sannadkaas laga helay cudurkaan laftiisa dalka Sudaan. Waxaa ilaa hadda sugan in fayruuskaan uu shan nooc u kala baxo. Afar ka mid ah ayaa cudur ku rida dadka iyo naasleyda waaweyn oo kale, sida gorillaha, shimbanseega iyo wixii la mid ah. Tan iyo markii la helay cudurkaan wuxuu hadba si kedis ah uga dillaacayey meelo kala duwan oo ay ugu dambaysey tan hadda weli ka taagan Afrikada Galbeed. Waxaa muhiim ah in la is waydiiyo sida lagu garto cudurkaan, sida uu dadka ugu yimaado iyo ahammiyadda ay leedahay in laga gaashaanto.



Kalkaaliso gacmaha dhaqanaysa Afrikada Galbeed

Cudurka Ebola oo uu keeno fayruusyada ay kamid yihiin (Marburg virus - MARV) waa cudur naadir ah laakin dilaa ah. Wuxuu dilaa dadka uu ku dillaaco 95 %. Wuxuu jirka ka soo galaa nabar korka kuyaal ama xuubabka dhacaan oo dhaawacma (mucous membrains) ama qof qaba cudurka oo qof kale dhacaan u gudbiyey. Sidaas awgeed waxaa lagama maarmaan ah qofka daryeelaya ama dawaynaya qofka cudurkaan qaba inuu gashado qalab casriya oo ka celiya cudurka. Waxaa khatarta ugu wayn ku jira shaqaalaha caafimaadka oo dadka ebolada qaba la tacaalaya haddi aan la siin qalab ka celiya cudurka. Waxaana in badan oo shaqaalaha caafimaadka ah ku dhaca cudurka. Waxaa iyaguna halis ugu jira cudurka ehelada dadka cudurka qaba oo iyagu ku dhaw bukaanka. Waxaa iyana qaadi kara cudurka dadka ka soo qayb gala duugta oo maydka cudurkaan u dhintay ay wax ka soo gaaraan.

Waxaa lagama maarmaan ah in shaqaalaha caafimaadka iyo bulshadaba loo sharaxo cudurka iyo sida uu ufaafo iyo sida looga gaashaanto si loo xakameeyo loona yareeyo waxyeelladiisa. Astaamaha lagu garto waxaa ka mid ah xummad ku soo boodda qofka, muruqyada oo xanuuna, tabarta oo ku yaraata, shuban-biyood iyo matag, kelyaha




ama beerka oo shaqayn waaya. Ebolada fufkeedu (waqtiga u dhexeeya marka ay jirka gasho iyo marka ay qofka soo riddo) waa 2-21 maalmood. Marka uu cudurku fufo oo astaamihiisu soo baxaan ayuu bukaanku halis ku yahay dadka ku dhow. Inta ka horraysa dadka ma qaadsiin karo.

Ururka caafimaadka adduunka (WHO) waxay si adag ugula talisaa cid kasta oo astaamaha cudurkaan ku aragta qof ka mid ah qoyskeeda inay degdeg ugu sheegto hayàdaha daryeelka caafimaad oo aan bukaanka lagu haysan guryaha. Haddii aan goobaha daryeelku meel u hayn bukaanka, waxay WHO faraysaa hayàdaha daryeelku inay siiyaan qoyska gacmogashi iyo qalab korka oo dhan daboola oo ka celiya cudurka. Waxay kale oo ku talisaa WHO in dadka la baro sida la isaga bixiyo qalabka iyo sida loo fogeeyo qashinkiisa.

Ilaa iyo hadda ma jirto daawo shati ogolaansho loo gooyey oo la aqoonsaday oo Ebola lagu daweeyo ama tallaal lagaga hortago. In kastoo baaritaan badan iyo dadaal hadda uu socdo. Dhimashada badan ee Ebola waxaa loo tiriyaa qaleyl (dehydration) ku dhaca bukaanka oo dila. Waxaa marka daryeelka ugu muhimsan oo la siiyo bukaanka ugu wayn biyaha xididka la raacsiiyo oo milixda leh ama wax u dhigma oo afka laga siiyo si uusan u en-gagin. Marka qofka cudurka qaba astaamah cudurku ay ka ba'aan, weli waxaa jirkiisa ku jira fayruuska cudurkana wuu qaadsiin karaa dadka ku dhow muddo toddoba taddobaad ah. Marka waa in weli laga digtoonaado inuu fido cudurku. Qofka cudurka qabey oo ka kacayna waa inuu ka dhawro dadka ku dhow. Galmaduna waa ka mid siyaalaha cudurka loo kala qaadi karo. Marka lammanaha midkood lagala tacaaley cudurkaan waa inay dul qaataan toddobada-toddobaad oo hubiyaan inuu cudurkii baxay inta ayan galmo samayn.

# NUXURKA

- Jeermiska uu kadhasho cudurka Ebola, waxaa 1976 ugu horeyntii soo ogaaday Dr. Baron Peter Piot, udhashay dalka Belgium.
- Ebola ugu horaysay ka dilaacday tuulada Yambuku dalka hadda loo yaqaan Kongo, awalna Zaire.
- Fayruuska (Marburg virus – MARV) waa nooc kamid ah fayruusyada laga helo daanyeerada iyo qaybo kamid ah dhirta, wuxuuna ku dhacaa dadka iyo xayawaan-ka, waa mid kamid ah fayruusyada sababa Ebola-da.
- Qofkii ugu horeeyay ee ay ku dhacdo ahaa maamule iskuule oo la oran jiray Mabalo Lokela wuuna udhintay. Isagoo markaa booqasho uga yimid webiga layiraahdo Ebo-la River ee loogu magac daray xanuunkan.
- 1995 ayuu hadana Kongo ka dilaacay cudurkaa oo la xuso inuu dilay 254 ruux. Kadibna Sudaan.
- 2000 ayuu hadana ka dilaacay Koonfurta Suudaan iyo Yugaandha.
- Feyruuskaan u kala baxaa 5-nooc, 4-ka-mida ayaa cudurkaan u sababa dadka iyo xoolaleyda. Loona yaqaan 5-taan nooc.
  1. Bundibugyo virus
  2. Sudan virus
  3. Taï Forest virus
  4. Ebola virus
  5. Reston virus
- Qofkuu ku dilaaco 95% waxay ubadataa inuu u dhinto.
- Wuxuu jirka ka soo galaa nabraha iyo dha-ceenada ama qof qaba oo dhaceenkiisa ama dhiigiisa u gudbiya qof kale.
- Astaamaha lagu garto waxaa kamid ah
  - Xumad iyo indho-casaan
  - Neefta iyo wax-laqidda oo ku adkaata
  - Tabar-darnaan iyo murqo xanuun iyo jileec
  - Matag iyo calool xanuun
  - Shuban-biyood
  - Kalyaha ama beerka oo shaqo beela
  - Jirka oo baa'ba iyo dhiig
- Marka ay jirka ku dhacdo qofkana soo rid-do, waxaa udhaxeyn kara 2-21 maalmood
- (Case Counts) ee WHO waxay xustay 6 January 2014 in Ebola:
  - Laga helay 20 712 dhacdo
  - Laabaratooriyad lagu cadeeyay 13 191 dhacdo
  - Udhinteen 8 219 ruux
- Wadamada ugu dhacdooyinka badana waa Guinea, Liberia iyo Sierra Leona.
- Nadaafadda waa lagama maarmaan cudu-radaan oo kale, fiiri maqaalka nadaafadda.

**Ilaahay waa jecel yahay dadka is-nadiifiya, dad badan oo Ilaahay jecelkiisa doonayana, waxay u dhintaan sababo cuduro nadaafad xumo keentay!**

# MUXUU AADANUHU KA BARAN KARAA ISLAFALGALKA WALXAHA DHULKA, XAGGA WADA NOOLAANSHAHA?

Wada shaqeynta walxaha biyaha iyo is-haysiga macdanta kala duwan ee buuraha, ayaa ah fakar laga qaadan karo kala duwanaanshaheena iyo baahida aan u qabno wada shaqeynteena.

AV **DR. WARFAA CABDI (GARWEYNE)** PHOTO **THINKSTOCK**

Aadanuhu aad ayuu uga faa'iideysan karaa wada shaqaynta iyo wada-jirka walxaha dabiiciga ah sida ay muujinayaan labadan mabda' ee soo socda.

### A Wada shaqaynta walxaha biyaha

Biyuhu waxay ka kooban yihiin walxo aad u kala duwan noocyo ahaan, iyo weliba astaamo ahaanba ee ma aha walax keliya. Sidaasoo ay tahay, waxay wadajir u qabtaan shaqo aad muhiim ugu ah jiritaanka nolosha aadanaha iyo tan nafleyda oo idil, sida ay tilmaamayaan aayadaha Qur'aanka ee soo socda.

Waxaan daruuraha ka soo dejiney biyo badan si aan ugu soo saarno miro, daaq iyo dalag-beereed oo iska-dulbaxay. (An-Naba', 14-16)

Aayadaha Qur'aanka ee sare waxaa aad uga muuqda shaqada iyo waxtarka biyaha, tiro iyo tayaba. Biyuhu waxay wadajir u sameeyaan, doorka ugu weynna ka ciyaaraan carrada ay dhirtu ka badxo (soil formation). Iyadoo protium-ta biyuhu ayan eegaynin deuterium-ta ama tritium-ta isla biyahaas. Waxay ku hooraan buuro waaweyn, waxay jejebiyaan dhadhaabta buurta (physical erusion), waxay wadajir u milaan macdanta dhadhaabta (hydration and dissolusion), waxay wadajir u xambaaraan dhammaan



Sagxadda biyaha badda

«Macdanta qaar ayaa weligood isbedelin oo kulaylka, qabowga iyo cadaadiskuba ayan waxba kabedelin sida dahabka»

DR. WARFAA

macdanihii kala duwanaa oo dhan, waxayna dabadeed tuulimaad ku sameeyaan macdanahaas (transporting and deposition), iyagoo dhigaya meelaha joogga hooseeya ee dooxada ah.

Waxaa sidaas ku samaysma dhul-beereed ballaaran oo barwaaqo ah oo ay ku noolaadaan dad iyo duunyo aad u tiro badan. Wadajirka walxaha biyaha iyo wada shaqayntoodu waa wax aadanuhu uu kaga dayan karo biyaha, sida ay tilmaameen aayadaha Qur'aanku.

### B Is-haysiga macdanta kala duwan ee buuraha

Dhadhaabaha waaweyni waxay ka kooban yihiin macdan aad iyo aad u tiro badan oo cadad ahaan, noocyo ahaan iyo astaamo ahaanba la oran karo waa tiro-beel. Sidaas oo ay tahay, waxay wada-jir u sameeyaan buuro aad u waa weyn oo waxtar aad u weyn u ah jiritaanka nolosha aadanaha sida uu tilmaamayo xadiiska Rasuulka ee soo socda.

«Waxaad heleysan dadka oo sida macdanta oo kale ah. Akhyaartoodii jaahiligu waa akhyaartoodii Islaamka hadday fahmaan....»

WAXAA WERIYEY MUSLIM

Xaddiiska sare waxaa aad uga muuqda tiro badnida iyo kala duwanaanta cadadka



# NUXURKA

- Biyuhu waxay ka kooban yihiin walxo aad u kala duwan noocyo ahaan, iyo weliba astaamo ahaanba ee ma aha walax keliya.
- Quraanka wuxuu Alle kuxusay shey walba inuu biyo ka ahaaday.
- Giriigii hore markii ay dunida wax iska way-diinayeen waxay kutageen in shey walba oo dunida yaal asaas u yihiin 4-shey (biyo, dab, hawada iyo dhulka), isla markaana gundhig u yihiin xeerarka lagu dhaqmo ama awood walba oo dunida kadhisanta.
- Biyuhu asaas ahaan waa qabow yihiin waana qoyan yihiin – dabciga aadanaha sidaas ayaa laga helaa.
- Protium, Deuterium iyo Tritium ($^1H$, $^2H$, and $^3H$) waa sedexda walxood ee xasiloon ee uu Hydrogen-ku ka kooban yahay.
- Buuraha Talampaya (Talampaya National Park) waa buuro ah beer-qaran, barta-maha-bari ee gobalka La Rioja Province, wadanka Arjantiina. Waxaa la habeeyay 1975, kadib waxaa lagu daray (UNESCO World Heritage Site) sanadkii 2000. Dherer-koodu waa 1500 mitir.



Buuraha Talampaya

macadanta dunida ku sugan. Sida uu tilmaamayo xadiisku, macdanta dhulku aad ayey u kala duwan tahay. Macdanta dhulku waxay ku kala duwan tahay nooca iyo cadadka waayo waxaa jira milyanno nooc oo macdan ah. Waxay ku kala duwan tahay midabada, waxayna leeyihiin milyanno midab oo kala duwan. Waxay ku kala duwan tahay cufanaanta iyo culayska waayo qaar ayaa aad u culus, qaana waa khafiif. Waxay ku kala duwan tahay adkaanta waayo qaar ayaa aad u adag, qaarna sahal ayey u burburaan. Waxay ku kala duwan tahay isku dhiskooda kiimikaad iyo ka minerologiyeed waayo waxaa jira milyanno iskudhis kiimikaad oo ay leedahay macdantu. Macdantu waxay ku kala duwan tahay isbedel la'aanta, waayo qaar ayaan weligood isbedelin oo kulaylka, qabowga iyo cadaadiskuba ayan waxba ka beddelin sida dahabka. Macdantu waxay ku kala duwan tahay dhismaha wiriqlaha macdanta (cristal habit) waayo qaarkood waxay leeyihiin qaab dhululubo, qaar waa afar-gees salaxan (tetrahedral), qaar waa lakabley (bladed), qaar waa prismatic, qaar waa tabular, qaar waa xuubabley (foliated), iyo kuwo kale oo aad u tiro badan.

Sidaas oo ay tahay, macdantu waxay wada-jir u sameeyaan buuro aad u waa weyn oo qurux dabiici ah ku kordhiya degaanka, waxaana buurahaas laga qotaa macdan aad qaali u ah oo soo hooya dhaqaale aad u lixaad weyn. Macadantu waxay wada-jir u sameeyaan carro ballaaran oo barwaaqo ah oo ay dhirtu ka baxdo, lagana soo saaro dalagyo beereed oo kaalmeeya nagaadiga nolosha aadanaha. Macdanta dhulka waxaa lagu dhisaa waddooyin iyo daaro dabaqyo badan leh. Waxaas oo idil waxaa sababay atamada kiimikaad ee macdanta oo markii hore gooni isu qabsaday oo sameeyey iskudhis kiimikaad oo deggan, dabadeedna macdanba midda kale ee ku xigta ay qabsatay ama noqday dersaan isku wada dheggan. Haddii macdan walba tan ku dheggan ay ka fuqi lahayd wax buur iyo berri toona la yiraahdo ma samaysmeen. Wada-jirka macdanta kala duwan iyo is-haysigoodu waa wax aadanuhu uu kaga dayan karo xagga wada-jirka iyo wada noolaanshaha.

> «Islaamku waa mabaadii' aad uga shaqaysa wadajirka iyo wadanoolaanshaha ummadda.»
>
> DR. WARFAA

Gabogabadii, mabaadii'da dastuuriga, dabiiciga, daa'imka ah, haddana cilmiga ah ee Islaamku, waxay nabarayaan in aan kafaa'iideysanno kala duwanaanshaha walxaha dabiiciga ah. Waxaan uga faa'iideysan karnaa fahmidda kala duwanaanteenna xagga ra'yiga, innagoo aan isku fogeynayn, iskuna riixaynin muuqaalka qofka iyo qabiilka uu ka soojeedo. Islaamku waa mabaada'a aad uga shaqeeya wada-jirka iyo wada noolaanshaha ummadda.

Qoraxda oo wabi kasoo dulbaxaysa



Haweenay wacyi gelinaysa haween kale.

Photo: Thinkstock/ilkafranz_com

**Bangladesh oo ay ka diiwan gashan yihiin 2333 NGO iyo Soomaaliya oo aan tirokoobkeeda laheyn, laakiin NGO-yadu kusii qulqulaan, halkee iskaga ekaan karaan?**

# MA DHAQAALE AYAY ABUURAAN NGO-YADU?

Peter Hallward wuxuu dhacdadii Hayti ugu magac daray NGO-yadu inay yihiin "Humanitarian face of imperialism", waji-samafaleed oo la isku gumeysto.

AV **MUKHTAR QORANSAY** PHOTO **THINKSTOCK**

Gargaarka bini'aadamka uu qaarkii u fidiyo qaarka kale, waa taariikh soo jireen ah nolosha aadanaha. Inta badan wuxuu ujeedku ku saleysnaa qof dhibbane ah in laga saaro dhibtaas, si kumeel gaar ama joogta ah, waana lagu guulaysan jiray. Hadii hawsha gargaarka joogto sii noqonayso, waxay dowladihii Islaamku hindiseen awqaaf, sida ceel la qodo oo dadku si joogta ah uga cabbaan ama jaamacado la dhiso oo dadku ay bilaash ku dhigtaan. Markaana waxaa booska ka bixi jiray qolo dan-gaara ka leh hawshaas gargaarka, nolosha bini'aadamkuna way is-dabooli jirtay, wayna horumari jirtay oo dadkii jaamacadaas wax ku soo dhigtay, ayaa dunida ku sii horumarin jiray aqoontooda.

Dagaaladii soo maray dunida qarnigii tagey iyo markii la dhisay Qaramada Midoobay (UN), ayaa waxaa sanadkii 1945 soo caanbaxay magaca NGO (Non-govermantal organisation). Inkastoo la xuso in NGO-yada caalamiga ah jireen qarnigii 18aad, iyagoo loo asaasay dhaqdhaqaaqii adoonsi-kaxoroobidda iyo dhaqdhaqaaqyadii looga soo horjeeday cadaadisyadii lagu hayay dumarka inay helaan xaquuqdooda insaanimo iyo kuwii shaqaaluhu ku doonayeen xuquuqahooda. Kadib markii dhaqdhaqaaqyadaas ka dhasheen natiijooyin, ayay sii balaarteen asaaska NGO, iyadoo laxuso 1914 inay dunida kajireen 1083 NGO-yo. Dagaaladii kadhacay Galbeedka kadib iyo xoreyntii wadamada Afrikaanka ah ee la gumaysan jiray iyo loolankii dagaalkii qaboobaa, waxay sii xoojiyeen in awoodihii is-haystay ay mid walba samaysato hay'ad gargaara oo ay ku kasbanayso dowladaha kale. Sidoo kale dowladihii wax gumaysan jiray inay caawimaad u fidiyaan dowladihii ay gumaysan jireen, iyagoo kadhex arkayay

masaalixdooda ama dad kale u arkayeen mag-dhow iyo saaxiibtinimo.

Markii ay sanadihii danbe sii kordheen tirada NGO-yada kajira wadamada dhibban, isku cabirna noqon waayeen tirobadnidooda iyo natiijada horumarineed, ayaa la is-waydiiyay NGO-yadu ma dhaqaale kobcin ayay sameeyaan mise dib udhac iyo ujeedooyin kale? Waxaa la is-barbardhigay wadamo ay qaarkood kamid yihiin Nayjeeriya, Suudaan, Soomaaliya, Tanzania, Yugaandha, Hayti, Hindiya iyo Bangladesh. Waxaana muuqatay inaysan wadamadaan wax horumar ah ka sameyn gargaarkii NGO-yadu u fidiyeen ama aysan wali ka bixin baahidii faqri ee dadkaas la yiri waa laga saarayaa, balse wadamadaas aad loogu dhaliilo musuq-maasuq iyo maamul xumo. Markaa, waxaa la is-waydiiyay dawr miyay kuleeyihiin NGO-yadu dib u dhaca wadamadaas?

Wadanka Bangladesh waxaa la xusaa inuu yahay dalka ugu NGO badan dunida. 1 January 2015, waxaa ka diiwan gashanaa 2333 NGO-yo, waana wadanka ugu faqrisan dunida. Shamima Axmed oo macalimad ka ah (Northern Kentucky University), isla markaana qortay buugga layiraahod (NGOs in Internatinal Politics), waxay xustaa inuu dalkaas siyaasiyan iyo dhaqaale ahaanba u dib-dhacsan yahay, iyadoo ay ka hawl galaan NGO-yo badan oo ku dooda horumarinta iyo wanaajinta xaaladda dadka fuqarada ah. Nayjeeriya, haweenayda Ogechi Njoku, ka ah madax urur layiraahdo (Secretary of Women In Nigeria -WIN), waxay ku xustay qoraal cilmi-baaris ay ku samaysay in NGO-yada caalamiga ah, adeeg walba oo ay ka dhisaan Nayjeeriya uusan sii jirin, markii ay hawshaas ka baxaan, sida iskuul, caafimaad iwm. Sababtana waxay ku tilmaamtay dadka meesha degan oo aan xirfad ahaan loo maalgalineyn si kal-iyo-laabi ay ku jirto, si'ay ula wareegaan masuuliyadda adeegyadaas. Iyadoo raacisay siyaasadda NGO-yada caalamiga ah inay tahay inaan la dhisin dad iyaga ka madax banaanaan kara, si joogitaankoodu u noqdo mid loo baahan yahay.

Markii loo fiirsado, way kooban yihiin NGO-yada caalamiga ah ee ku nool tabarucaadka dadweynaha caadiga ah ama awqaaf ay iyagu sameysteen. Dib markii loo sii raacraacay NGO-yada caalamka ugu waaweyn badankood, waxay salka ku hayaan dowlado xoog leh oo ay u adeegaan masaalixdooda. Isla mar ahaantaana difaaca. Waxaana inta badan isku xiran safaaradaha jooga wadankaas la taageerayo iyo NGO-yada ay taageerto dowladda iska leh safaaradaas, si looga warqabo hawlgalka NGO-gaas. Hadii aysan maslaxad u arkin safaaradda dalkaas joogta, kobcinta dhaqaale ee dadka wadankaas kunool, macquul ma noqon karto in NGO-ga kuxiran safaaradaas ay kobciso dhaqaalaha wadankaa. Marar badan waxaa soo shaacbaxa arimaha ay NGO-yadu u ololeeyaan inay kujirto masaalixdooda gaarka ah. Tusaale ahaan Oxfam waxay u ololeysaa "fair trade" coffee, iyadoo hadana Oxfam ay 25% saami ah ku leedahay ururka loo yaqaan (Cafedirect) ee la yiraahdo ganacsi xaq ah ayuu horumariyaa. Joornaalka The Economist oo u kuura-galay hawlgalada NGO-yadu ka sameeyaan wadamada soo koraya, ayaa ku tilmaamay inay tahay 'imperialism' oo nooc kale loo dhigay.

> «Dadkii fuqarada ahaa ee aan haysan asaasiyaadkii nolosha bini'aadamka, sida hooy, hunguri iyo dhar,ayaa lagu hawl geliyaa arimo la xiriira siyaasad»
>
> MUKHTAR QORANSAY.

Arimaha sii kiciyay dhaliisha ujeedooyinka NGO-yada caalamiga ah, ayaa ah in dadkii fuqarada ahaa ee aan haysan asaasiyaadkii nolosha bini'aadamka, sida hooy, hunguri iyo dhar, lagu hawl geliyo arimo la xiriira siyaasad oo si dadban loogu kiciyo maamulkooda dowladeed. Ujeedada ayaa loo fasiran karaa inaysan xasilooni kadhicin wadankaas, iyadoo laga faa'iidaysanayo hogaamiyayaal leh aragti aanan hooskooda kadheereen. Waxyaalaha kale ee aadka




Sawir lagu muujinaya baahida gargaar ee Afrika.

# NUXURKA

- Isku-gargaarka bini'aadamka waligiis ayuu soo jiray.
- 1914 waxaa jiray 1083 NGO oo caalami ah.
- Magaca NGO wuxuu soo can baxay sanad-kii 1945 kadib.
- Waxaa sii kobciyay dagaaladii dunida ka-dib iyo dagaalkii qaboobaa ee dowladaha la kala kasbanayay.
- Wadanka Bangladesh waa midka dunida ugu faqrisan, waxaana kadhisan 2333 NGO.
- Waxaa NGO-yada caalamiga ah lagu dhaliilaa in:
  - Adeegyada ay kasameeyaan wadamo badan, masii jiraan markii ay wadankaas iskaga baxaan.
  - Waxyaalaha ay ololeeyaan inta badan masaalixdooda ayaa uga dhex muuqata sida Oxfam oo kuleh 25% saami ah Ca-fedirect.
  - Dadka fuqarada ah ee aan haysan asaasiyaadka nolosha waxaa lagu hawl geliyaa dhaqdhaqaaqyo looga horkeen-ayo dowladda aanan markaa la jeclaysan.
  - Dowladdaha ayay ka uruursadaan dad-kooda xirfadda leh,kadibna waxaa luma kalsoonidii loo qabay adeegga dowladda. Waxaa halkaa kadhasha dowlad kuhoos jirta dowlad kale.
- NGO-yada Soomaaliya tababar ayaa la siiyay, inta badana waxaa lagu dhaliilaa ta-babarkii la siiyay oo ay dabcigiisi yeesheen.
- Wadamada Ruushka, Hindiya iyo Itoobiya waxay ka soo saareen sharciyo gooni u ah la dhaqanka NGO-yada caalamiga ah, si aysan dhaawac ugu gaysan wadamadooda.
- Dunida maanta waa mid la iska rarto mas-kaxda iyo kheyraadka. Qofkii aan laheyn xirfad wada-hadal iyo mid wax-wadaagid, wuxuu halis ugu jiraa isagoo ogeyn in mas-kaxdiisa iyo kheyraadkiisa lagu adeegto.
- Waxaa arimahaan wax ka qaban kara dad leh karti, khibrad iyo awood ay ku kala saa-raan faa'iidada, khasaaraha, masaalixda la is-waydaarsanayo iyo lugooyooyinka ku aasan. Isla mar ahaantaana arki kara mustaqbal fog iyo jiilasha imaan doona sidii ay nolol ka fiican tooda ugu noolaan lahaayeen.



Ilmo Neyjeeriyaan ah oo dhawaan dhashay.
Photo: Thinkstock/ agafapaperiapunta



Caruur yaryara oo joogta tuulo kamida Afrika.

umuuqday tobankii sano ee danbe waxaa kamid ah dhaqaalaha ay NGO-yadu u isticmaalaan maamul iyo mushahaar ahaan.

James Pfeffier oo kamid ah dadka u kuura-galay NGO-yada caalamiga ah ee ka hawl galay dalka Mosambiik, wuxuu xusaa NGO-yada inay ka dhigeen kuwo beylahan xarumaha caafimaadka ee wadankaas. Sababtana wuxuu ku sheegay inay cusbitaalada dowladda ka soo gurtaan dadka xirfadda sare leh, iyagoo mushahaar badan u balanqaadaya. Arinkaan oo dhaawac u geystay adeegii shaqo ee dowladda ay u haysay dadkeeda iyo cusbitaalada caamka ahaa oo noqda kuwo aanan daaweyn karin dadkooda. Sidaasna ay ku luntay isku-kalsoonidii ay dadka shacabka ah kuqabeen naftooda iyo adeegyada goloyaashooda caaafimaad. Markaana meesha waxaa ka dhashay dowlad ku hoos jirta dowlad kale, kana xoog badan dhaqaale ahaan iyo taageero dibadeed. Maalintii ay NGO-yadaas ka baxaan dalkaas, waxaa la burburaya adeegyadaas ay ku carqaladeeyeen kuwii dowladda. Natiijaduna waxay noqon dalkaasi inuusan horumar ka sameyn dhinacaas, kuna xirnaado NGO caalami ah.

Faylasuufka Peter Hallward ee udhashay Kanada, wuxuu xusaa NGO-yada Action Aid iyo Christian Aid inay ka danbeeyeen af-gambigii loo geystay dowladdii dadkeedu doorteen ee dalka Hayti, isagoo markaa ugu magac daray NGO-yadu inay yihiin "Humanitarian face of imperialism". Androw S. Natsios muddo kusoo dhex jiray NGO-yada wuxuu xusaa in xornimada balaaran ee la siiyay, ay mushkilad ku ah dalka ay taageerayaan. Madhacdo ayuu yiri inay dhexdhexaad noqdaan, sawirkaas way u muujiyaan dadka ay lacagta ka soo qaataan. NGO waxay uruuriyaan macluumaad aad ubadan, kuwaan oo khalkhal gelin kara xasiloodina iyo amniga dal leeyahay.

Arimahaas kore waxay sababeen wadamo badan inay sharciyo gooni ah ka soo saaraan NGO-yada caalamiga ah ee dalalkooda ka hawl galaya. Tusaale ahaan Ruushka sharciyadiisa wuxuu gaarsiiyay NGO-ga ka diiwan gashan dalka gudihiisa hadii uu doonayo inuu ka hawl galo arimo la xiriira siyaasadda, kana helo dhaqaale wadan kale, waa inay isku diiwan geliyaan inay yihiin urur wakiil u ah dowlad shisheeye. Dowladda Kanada waxay sidoo kale u aragtay xornimada dalka inay ka hor imaanayso ururada u ololeeya arimaha bii'ada ee maalgelinta ka hela wadanka dibadiisa.

> «Dadka dalka udhashay ayaanan xirfad ahaan loo maalgalineyn si kal-iyo-laabi ay kujirto, si'ay ula wareegaan masuuliyadda adeegyadaas»
>
> OGECHI NJOKU.

Wadamada ka qaatay go'aamada cadcad hawlgalka NGO-yada caalamiga ah, waxaa ka mid ah Itoobiya iyo Hindiya oo aad u kala saara ujeedooyin horumarineed iyo la falgelid kuwo siyaasadeed NGO-yada wata. Isla markaana kula xisaabtama hawlaha ay dalka gudihiisa ka qabtaan. Go'aamadaan oo keenay inay dalalkaan aad uga faa'iidaan NGO-gii ka hawl gala dalkooda.

### Xaalka Soomaaliya

Soomaaliya oo la wada ogsoon yahay inay utahay dalal iyo dadyow kale goob maslaxadeed, ayaa kamid ah wadamada ay NGO-yada caalamiga ah aad uga hawl galeen. Isla markaana saameyn weyn ku yeesheen go'aamada, hab fakarka bulshadeeda iyo dib udhaca kobaca dhaqaale iyo siyaasadeed ee tusaalayaasha loo soo qaato. Waxay xusaan Soomaali badan oo u shaqeysay iyo xubno kamid ahaan jiray maamulada dowladda iyo dowlad gobaleedyada, in NGO-yada caalamiga ah ee laga leeyahay wadamada



Photo: Thinkstock/AHMCPHERSON

awoodda leh, ee ka hawl gala Soomaaliya, u dirsadaan maclumaadyo aanan shaqo ku laheyn hawlaha gargaarka bini'aadamnimo ee qofkaas lagu shaqaaleysiiyay.

Arimahaan oo ugu yaraan keenaya inay sii burburto kalsoonida dadka Soomaaliyeed ku qabi karaan maamuladooda ama qaarkood qaarka kale, dalkana ka dhigaysa goob ay dadkii lahaa ugu shaqeeyaan masaalix dadyow kale. Lamase oran karo qof walba oo Soomaaliyeed ee u shaqeeya NGO caalami ah, shaqooyinkaas ayuu u qabtaa, laakin waxyaalo badan wuu ka markhaati furi karaa qofkii la shaqeeya. Waxaa dhacda NGO-yada caalamiga ah inay ku eedeeyaan kuwa gudaha Soomaaliya jooga ee iyagu tababareen musuq-maasuq, gobaleysi, qabyaaladeysi, xisaab-xumo, xirfad-yari, ammaano-xumo iyo dalaalnimo, eedaymahaan oo lagu soo daabacay bogga “Insight on Conflict”. Iyadoo ay Soomaalidu is-taqaan, isna difaaci karin, hadana marka qofku wax ka eego meel ka fog Soomaaliya iyo sawirka guud ee yaala Soomaaliya, wuxuu is-waydiin dhawr arimood. Hadii ardayga macalinkiisu u barin xisaabta si wacan, kuna abaal mariyo isdib-maryeen walba oo uu sameeyo, indhahana ka



Lacag gargaareed.

«NGO waxay uruuriyaan macluumaad aad ubadan, kuwaan oo khalkhal gelin kara xasiloodina iyo amniga dal leeyahay»

ANDROW S. NATSIOS.

laabto khalad walba oo uu fasalka ka-dhex sameeyo, inta ardaygaas fulinayo maslaxadda macalinka. Isla markaana, ardaygu ufahmo sida saxda ah ee iskuulada looga dhaqmo inay sidaa tahay, ma macalinkaa eedda iska leh mise ardayga mise labadooda? Hadii ardaygaas lagu ganaaxo doqonimo, fahan iyo feker yari, muxuu noqon ganaaxa macalinka aan doqonka aheyn, fekerkiisuna xumeyn?

### Xalka & Gunaanadka

Caalam ahaan NGO-yada, waa kuwo laga warhayo, Soomaali badana way ku baraarugsan tahay, laakin inta badan waxaa laga raaco masaalixda gaarka ah ama inaan waxba laga qaban karin, maadama uusan jirin qaran xoog leh. Guud ahaan cambaareynta dunida iyo isla fahmidda arimahaan markii ay sii xoogeysteen oo la arkay inaan indhaha laga laaban karin, ayaa la soo jeediyay mashruuc la magac baxay UN Programme for Africa's Economic Recovery and Development ((UNPAAERD), walise natiijo la taaban karo kama aysan dhalan.

Wadamada arimahaas ka badbaada, inta badan dowladda ayaa la falgasha hawlaha NGO-yada, iyagoo u tilmaama adeegyada ay uga baahan yihiin. Kadibna kala wareega xilka hawshaas, loona dhiibo masuuliyiin lagu kalsoon yahay waxqabadkooda. Sidoo kale Hindiya iyo Itoobiya, waxay dowladahoodu xoojiyeen NGO-yada gudaha dalka laga leeyahay oo laga dhigay kuwo loo carbiyay ka shaqeynta masaalixda dalka. Kadibna waxaa lagu khasbaa NGO-yada caalamiga ah inay la shaqeeyaan kuwaas gudaha. Wadamo kale sida Ruwaandha, gargaarka iyo NGO-yada waxay ka doorbidaan maalgashiga iyo ganacsiga, iyagoo arinkaan aad usii fududeeyay. Waayo dadka udhashay dalka, markii ay helaan dhaqaale abuur, iyagaa dhisanaya iskuulada iyo cusbitaalada ay ubaahan yihiin oo marba la jaanqaadaya inta ay le'eg tahay tayadooda dhaqaale. NGO-yo badan way qabtaan wax wanaagsan, laakin wanaaggu wuxuu miro-dhali karaa, markii ay dadkii lahaa katashan karaan aayihiisa, faa'iidadiisana u harayso iyaga.

Siduu Ra'iisul wasaarihii hore ee Ingiriisku Winston Churcill yiri "The Empires of the future are the empires of the minds”. Aduunka maanta iska noqday mid la iska haysto xagga maskaxda iyo dhaqaalaha, dadkii aan labadaas ka xoroobin, iyagoo isku haysta inay xor yihiin, ayaa la gumaysanayaa. Gumeysiga dunida maantana maaha sidii kii waayihii hore jir ahaan la is-raran jiray, balse waxaa la iska rartaa maskax ahaan iyo kheyraad ahaan. Taas macnaheedana maaha, qofku inuu khalad u fahmo la shaqeynta dowladaha caalamka ee ay masaalixdu dhexmari karto ama qolo walba oo ay ka dhexeyn karto masaalix ay dan ugu jirto.

Sababtoo ah bini'aadamku ma kala maarmo, waana isku baahan yahay isagoo kala diin iyo dhaqan duwan. Isku baahnaantaas, ayaana keenaysa aadanaha inay dhexmarto wada-xaajood iyo wax-wada wadaag. Laakin waxa is-waydiinta leh waa goorma ayuu qof ama qaran gaari karaa karti wada-xaajood iyo mdi wax-wadaagid? Sidoo kale waxaa fahan iyo dood ubaahan isku cabbirka masaalixda la is-dhaafsanayo, dhibta ay u keeni karto qofka qiyamkiisa, akhlaaqiyaadkiisa, dadkiisa iyo dalkiisa iyo faa'iidada ay u keeni karto. Taasna waxaa cabbiri kara dad awood, karti iyo khibrad uleh fahmidda masaalixda la isku darsanayo, khasaaraha kujiri kara iyo hagardaamooyinka ku hoos qarsoon. Dadkaas oo isla markaana doonaya dhawrista jiritaanka mustaqbalka jiilashooda jooga iyo kuwa soo socda.

«Waxaa fahan iyo dood u baahan isku cabbirka masaalixda la is-dhaafsanayo, dhibta ay u keeni karto qofka qiyamkiisa, akhlaaqiyaadkiisa, dadkiisa iyo dalkiisa iyo faa'iidada ay u keeni karto. Taasna waxaa cabbiri kara dad awood, karti iyo khibrad uleh fahmidda masaalixda la isku darsanayo, khasaaraha kujiri kara iyo hagardaamooyinka ku hoos qarsoon.»

ANDROW S. NATSIOS.

Waxyaalo aad ogtahay ama aadan ogeyn, laakin hadaad u fiirsato si kale u ogaanayso.

# MA OGTAHAY?

AV AXMED CAWIL, CABDIRASHIID XASAN IYO MAXAMED FAARAX PHOTO THINKSTOCK



Calamada aduunka & luuqadahooda kala duwan.

## LUUQADEE AYAAA UGU FUDUD ADUUNKA?




Qoraalka afka-Shiineeska.

Barafasooro ku xeel dheer afafka iyo luuqadaha aduunka waxay qabaan in luuqada ugu fudud ee la baran karo ay tahay luuqada Mandarin ee lagaga hadlo wadanka Shiinaha, luuqadaan oo ay ku hadlaan 70% dadka degan wadanka Shiinaha.

Af-aqooladu labo sababo ayey sheegaan in ay fududeysay afka-Mandarinka- Waxay ku doodan in luuqadan qaabdhismeedkeedu aad u fudud yahay iyo ku dhawaaqeeddu oo fudud. Sidaas oo ay tahay waxay (Foreign Service Institute) ee Maraykanku ku doodaan inay saas tahay, laakiin aysan luuqadaan iyo af-Carabigu u fududeyn, dadka afkooda hooyo yahay English.

Afka ugu adag Aduunka in la barto waxaa lagu sheegaa in u yahay Greenlandic. Waa af lagaga hadlo wadan yar oo u dhaxeeya Arctic and badda Atlantic, lagana maamulo Denmark. Af-aqooladuna waxay sheegaan in ereyada afkani aad u adag yihin iyo qaab-dhismeedka jumladihiisuna aad u cakiran yihin.

## Maxaa Looyiraahdaa <Hallo> Markii Telefonka Laqabto?

Ereyga <Hallo> wuxu ka soo askumay afka Jarmalka erayga ah halå ama holå, eraygan qaabab kala duwan ayaa loo isticmaala afafka aduunka maanta.

Ereyga hello wuxuu soo shaac baxay markii hal abuurihi Maraykanka ahaa Thomas Edison uu sannadkii 1877 ku wargeliyey gabadhihii ka shaqaynayey xarunta teleefoonada in ay ku jawaabaan hello. Dumarkii ka shaqayn jiray xarunta telefoonada ayaa waxay ku caan baxeen Hello-gabdho.

Markii telefoonku aduunka ku baahay, eraygii hello aad buu aduunka u shaac baxay. Wuxuuna noqday eray qof kasta oo telefoon qabanaya qofka kale ku salaamo.




Sawir muujinaya kalmadda <Hello> iyo xiriirkeeda dunida



Haweenay Muslimad ah oo oohin meel la fadhida.

# MAXEEY DUMARKU UGA OOHIN BADAN YIHIIN RAGGA?

Wax walba waxay u noqonayaan abuurka Ilaahay, saas oo ay tahay bini'aadamka inuu wax baaro, waxna ogaado, waa qayb kamid ah dabcigiisa. Markii la sameeyay cilmi-baaris, waxaa la arkey in ay dabcigooda ku samaysan tahay inay qiiroodaan, kadibna ilinto ka daadato. Waayihii hore laga soo bilaabo raggu way ugaarsi tagi jireen, dumarkuna masuuliyadda caruurta ayay hayaan. Arinkaan oo u sahlay haweenayda inay akhrisan karto dhaqdhaqaaqa ilmaha iyo oohintooda iyo waxa ay rabaan. Dumarku waxay leeyihiin baahi ka weyn tan ragga oo ah ku dhex jiridda bulshada ama la yeelashada xiriir nafsi ah. Taasina waxay keentay inaysan hayn karin dareenkooda, sidaasna ugu khasabtay in aysan hayn celin ilinta.


Dadka culuumtan ku takhasusay waxay leeyihiin, dumarku waxay ku gaaraan heerka naxariista dhexdooda oo aad u sareysa. Oohintu waxay kicisaa dareenka qofka bini'aadamka ah, waxayna asal ahaan ka timid cunugga yar oo raadinaya in uu helo feejignaanta hooyadii. Baaritaan arintan la xiriira oo ka dhacey Jarmalka, waxaa uu tusayaa in dumarku inta badan ilmeeyaan, marka ay ku fakarto arin murugo leh, ama marka laga horkeeno xaalad ay ku adag tahay inay ka dabaalato ama waxba ka qaban karin. Meesha raggu inta badan ilmeeyaan marka uu badbaadin kari waayo xiriirka xaaskiisa iyo ilmihiisa ama marka uu dareemayo "empathy".

Ka hor inta uusan qofka bini'aadamka ahi soo gaarin 13 jir isku in baa la ooyaa. Waxii intaas ka danbaysa dumarka ayaa oohin badan.


| | DUMAR | RAG |
|---|---|---|
| Tirada oohin sannadlaha ah | 30-64 | 6-17 |
| Waqtiga ay ooyan | 6 daqiiqo | 2 ilaa 4 daqiiqo |
| murugo | 7 kamida 10-kii xaala-doodba | 1 kamida 16 xaala-doodba |

# WAA INTEE XAWAARAHA DHIIGU UU KU WAREEGE IRKA?

Qofka weyn wadnihiisu waxa uu sameeyaa 70-garaac halkii daqiiqo. Halkii mar ee uu wadnuhu garaac sameeyo waxuu kalifaa in 70 ml oo dhiig ah, ku wareegaan xididada-dhiiga. Taas oo u dhiganta 4.9-litir halkii daqiiqo, cadadkaas oo udhigma dhammaan dhiigga ku jira qofka aadanaha ah jirkiisa. Tiriooyinkan waxay quseeyaan qof xaalad degan ku jira oo aan samaynin wax jimicsi ah ama wax kalifa in uu dhiigiisu kaco. Haddii uu sameeyo jimicsi ama dhaqdhaqaaq kale, waxay keenaysaa inuu wadnihiisu u garaaco si dhakhso badan. Taasi waxay sababeysaa inuu dhiiggu dhakhso ku wareego jirka oo dhan. Xawaaraha wareegga dhiiggu waxay ku xiran tahay baaxadda qofka jirkiisu le'eg yahay. Qof weyn iyo ilmo yar isku waqti ku qaadan maayo, sidoo kale maroodiga iyo jiirka isku waqti ku qaadan maayo dhiiggoodu inuu jirka ku soo wareego. Jiirka waxay ku qaadan 4-ilbiriqsi, meesha ay maroodiga ku qaadanayso 218-ilbiriqsi.



Xididadda wareegga dhiiga jirka.



Tilmaamaha maskaxda qaybteeda midig iyo bidix.

# Waa maxay sababta dadka badankood ay gacanta midig wax ugu qoraan?

Arintaan faa'iido dheeri ah ma leedahay? Maxaase arrintaan keena?
Cilmi-baarayayaal ayaa ku dooda in maskaxda xiddidadeedu si gudub ah jirka ula xiriiraan. Qaybteeda midig waxay maamushaa jirka qaybtiisa bidix. Dhankaan midig ee maskaxdu waxay ku fiican tahay hal-abuurka, waxyaalaha aan la taaban karin, fekerka, wax-suureysashada iyo dareenka. Maskaxda qaybteeda bidix waxay maamuushaa jirka qaybtiisa midig. Dhinacaan bidix ee maskaxdu waxay ku fiican tahay kartida hadalka, luuqadaha, wax-qorista, mandiqa, xisaabta iyo culuumta sayniska ah.
Waxaa sababa maskaxda inay dadka qaarkood midigle noqdaan, qaarka kalena ay u noqdaan bidixlayaal. Labada qaybood ee maskaxda shaqooyin badan bay wada qabtaan, laakiinse badanaa midkood ayaa gacan sarreeya. Culimada ku takhasustay cilmigaan ilaa hadda ma aysan garan sababta ay 90% ay dadku u yihiin midiglayaal, faa'iido dheerna ugama muuqan. Inkastoo la arkay in dadka gurran, ay isku ekaansho badan yihiin labada qaybood ee maskaxdooda. Balse waxay xusaan in dadka badankood ku fiican yihiin qaybta arimaha ay maamusho maskaxda qaybteeda bidix. Mindhaa sidaa bay midigle u noqdeen, illeyn maskaxda qaybteeda bidix u talisaa jirka qaybtiisa midig?

AL AMAL EXPRESS
EXCHANGE

# OUR SERVICES

Buying & Selling of
Foreign Currencies

Instant & Fast
Money Transfer

Electronic Fund Transer

Inter Emirates Fund Transfer

Telex Transfer

Amal Express
Payment System

**A SECURE , CONVENIENT & LOW-COST WAY TO SEND MONEY**
**MONEY WILL REACH YOUR LOVED ONES WITHIN MINUTES**

+917 4 2595 272 / +971 4 2278440
Email: info@amalgroup.net / Web: www.amal-express.com